Xadka Riddada: Maxaa Ka Run Ah?

Siciid A. Ismaaciil

Okt 28, 2009

1- Hordhac:

Waayadaan danbe waxaa Soomaaliya iyo guud ahaan dunida islaamka ku soo badanaya dacwooyinka dadka lagu eedaynayo in ay riddoobeen. Dadkaas xukunka riddada lagu qaadayna waxay isugu jiraan qaar la dilay, qaar la sheegay in ay toobad keeneen oo la cafiyey, iyo qaar weli billaawaha lala baadi goobayo, oo cabsi darteed dhufeeys ugu jira. Erayada muddooyinkaan danbe ku soo biiray qaamuuska Soomaalidana waxaa ka mid ah: Riddo, murtad, khawaarij, iwm.

Bulshada islaamka oo ay ku yar yihiin aqoonta iyo naqdigu waa mid u nugul faafidda khuraafaadka iyo sheeko-baraleeyda. Arrinkaasina wuxuu dhaliyey in diinta islaamka lagu barxo dhaqankii Carabta iyo fikradihii culumada islaamka, ilaa heer ay ka qariyeen diintii islaamka ee nebi Muxamed (SCW) lagu soo dejiyey. Sheeko-baraleeyda sida weyn ugu xididaysatay dunida islaamka ee ay adag tahay in la beeniyana waxaa ka mid ah midda sheegaysa in islaamku yahay diin aan dulqaad lahayn, oo luqaddada qura ee uu garanayaa ay tahay tan seefta[1], ruuxa ka baxana luqunta u dheereeya. Soomaalida oo sida la og yahay been sheegta laakiin aan been maahmaahininna waa tii tiri: "Been fakatay runi ma gaarto".

Waxaa jira labo walxaad oo loo baahan yahay in la kala saaro, waayo labadaas walxaad oo la isku barxo waxaa ka dhalanaya wareer iyo walaahow fara badan. Labadaas walxaadna waxay kala yihiin: diinta iyo afkaarta diiniga ah.
Diintu waa wixii nebigu (SCW) la yimid oo ah quraanka kariimka iyo sunnada nebiga oo ka kooban wixii uu afka ka yiri ama addinka ka fuliyey ee la xiriira fulinta diinta. Afkaarta diiniga ahina waa sida diinta loo fahmay geeridii nebiga ka dib. Haddii si kale loo yiraahdo, afkaarta diiniga ahi waa sida aadamigu u akhriyo aayadaha quraanka iyo sunnada nebiga. Diintu waa kooban tahay, oo quraanka kariimku waa inta musxafka ku qoran, axaadiista nebiguna waa intuu yiri ama falay intuu noolaa[2]. Laakiin si taa ka duwan, afkaarta diiniga ahi ma dhammaato, oo waxaa xukuma waqtiga iyo meesha la joogo, oo seben walba iyo meel kasta waxaa ka jira afkaar diini ah oo u goonni ah. tusaale ahaan, fiqiga culumada maanta joogaa dhinacyo badan buu

[1] Axaadiista nebiga (SCW) carrabka loogu tiro ee aan har iyo habeen maqalno waxaa ka mid ah kuwa oranaya: " Seef baa la ila soo diray, kheyrkuna seeftuu ku jiraa." iyo mid kale oo oranaya: "Ummaddaydu kheyr ka suuli mayso inta ay seefta sidato." iyo weliba mid kale oo oranaya: "Arsaaqdayda waxaa la galiyey warankayga hoostiisa !! ". Akhristow aan isweydiinnee nebigu ma bililiqo ku nool buu ahaa?

[2] Run ahaantii, axaadiista bugta ama been-abuurka ahi aad bay uga badan yihiin kuwa runta ah ee nebiga loo tiirin karo. Waayo, axaadiista runta ah nebiga (SCW) oo qur ah ayaa sanooyin kooban laga maqlay, laakiin kuwa beenta ah kumanyaal ruux ayaa boqollaal sano allifayey.

Copyright © 2009 WardheerNews.com

uga duwan yahay fiqigii Abuu Xaniifa, Maalik, Shaafici iyo Axmed bin Xanbal. Shakina kuma jiro in fiqiga culumada jiilalka danbe uu aad uga duwanaan doono fiqiga maanta jira. Waayo, fikirka dadka waxaa xukuma duruufaha dhaqan-dhaqaale ee ay ku nool yihiin, duruufaha adduunyaduna maalinba waa si gaar ah, oo waxay leedahay waji cusub. Tusaale ahaanna, waxaa la og yahay in Imaam Shaafici markuu tagay Masar oo dhinacyo badan uga geddisnayd Baqdaad, inuu afkaartiisii hore wax ka beddelay, sidaa awgeedna fiqigiisa loogu qaybiyo mid hore iyo mid cusub. Waxaana la qiyaasi karaa in Imaam Shaafici hadduu maanta qabriga ka soo bixi lahaa, inuu fikrado cusub la imaan lahaa.

Diintu waa muqaddas, waayo waa waxyi Alle soo dejiyey. Laakiin dhanka kale, diintu waa nusuus [quraan iyo xadiis] aan iyadu iskeed isu macnayn ee had iyo jeer u baahan cid fasirta. Nebigu intuu noolaana isaga ayaa ahaa marjaca loogu noqdo fasiridda nusuusta.

Geeridii nebiga ka dibna sharrax ka bixinta diinta waxaa isu xilqaamay culumo isbiday inay u dhuun-daloolaan macnaha nusuusta diinta, oo isku dayey inay fasiraan quraanka iyo axaadiista nebiga. waxaana abuurmay culumo ku kala takhasusay laamaha fikirka diiniga ah, sida: tafsiirka quraanka, culuumta xadiiska, siirada nebiga (SCW), fiqiga, usuulu-fiqiga, …iwm. Dadka takhasusaadka lehna waxaa loo bixiyey magcaan ay ka mid yihiin mufasiriin, muxadisiin, fuqaho, …iwm.

Waxaase habboon in la ogaado in dadaalka culumadu sameeyeen,inkasta oo uu diinta u adeegayo, laakiin isaga qudhiisu uusan diin ahayn. Tusaale ahaan, tafsiirka iyo fiqigu waxay naga kaalmaynayaan sidii aan ku fahmi lahayn diinta, laakiin tafsiirka iyo fiqiga midkoodna diin ma aha, ee waa afkaartii culumada iyo sida mid waliba u fahmay nusuusta diinta. Fahamka culumaduna waa dadaal aadami oo sax iyo khalad labadaba waa noqon karaa. Oo wadaadka quraanka fasirayaa 100% ma hubo in sida uu quraanka u fasiray ay tahay sidii Alle dhab ahaan ula jeeday, sidaa darteedna waxaan aragnaa culumada tafsiirka oo ku celcelinaya oraahda ah: " Eebbaa yaqaan ulajeeddada / Wallaahu Aclamu Bimuraadihi". Cali bin Abii Daalib-na (RC) waxaa laga hayaa inuu yiri: "Quraanku waa wajiyo badan yahay / al-Quraan Xammaalu Awjuh[3]". Taa awgeedna, muslimiintu waa isku raacsan yihiin in quraanku yahay kitaab Alle, laakiin aad bay isugu khilaafaan tafsiirkiisa.

Soomaalidu waxay tiraahdaa: " Xaajo nimaan ogayni indhuhuu ka ridaa". Cabdullaahi bin Cabbaas (RC) oo aad mooddo inuu xigmaddaas ka duulayeyna mar uu ka jawaabayey su'aal Cumar bin Khaddaab (RC) weydiiyey oo ahayd: Sidee ummadda islaamku isu khilaafi kartaa iyada oo nebigoodu mid yahay, qibladdooduna mid tahay? wuxuu yiri: " Gadaasheen waxaa imaanaya qolo quraanka akhrinaya, iyaga oo aan ogayn wuxuu ku soo degey, dabadeedna way awilayaan, kaddibna waxay isku khilaafayaan sida loo awilay, dabadeedna waxay ku dagaallamayaan waxay isku khilaafeen".

[3] Oraahda Cali bin Abii Daalib (RC) waxay naxusuusinaysaa murtida Soomaaliyeed ee tiraahda: " Hadal waa margi, margina hadba waa meesha loo jiido".

Copyright © 2009 WardheerNews.com

Run ahaantiina, saadaashii Cabdullaahi bin Cabbaas waa dhabowday, waayo khilaafka ugu badan ee muslimiintu dhiiggooda ku daadiyeen wuxuu ka dhashay tafsiirka aayadaha quraanka oo qolo waliba derbi gaar ah la fuushay. Tusaale ahaan, colaadda ugu ba'an ee muslimiintu dhiiggooda ku xalaashadeen waxay ka dhalatay macnaha la siinayo aayadaha oranaya: " Ciddaan xukumin wuxuu Eebbe soo dejiyey, kuwaasi waa gaalo/ **Waman laa yaxkum bimaa anzala laahu fa- u-laa'ika humul kaafiruun** " [Al-Maa'idah: 44]. In sidaa wax u dhacaanna waxaa ugu wacan iyada oo la iska indho tiray sababtii aayaddu ku soo degtay.

Inta badan culumada tafsiirku- marka lagu daro Cabdullaahi bin Cabbaas- waxay qabaan in aayaddu ku soo degtay Yahuuddii Madiino, waxayna yiraahdeen: Yuhuuddu nebiga (SCW) waxay ka codsadeen inuu xukumo nin iyo haweenay Yuhuud ahaa oo lagu eedeeyey inay sineysteen, sidaasna waxay u yeelayeen iyaga oo diiddanaa in labadaas qof lagu qaado xukunka kitaabka towreedku siinayo denbigaas oo ah in dhagax lagu dilo. Ogaanshaha sababta aayaddu ku soo degteyna wuxuu muujinayaa in aayaddaan iyo kuwa la macnaha ahi aysan innaba wax shaqo ah ku lahayn xukun iyo maamul dowladeed.

Waxaana xusid mudan, in quraanka kariimku uusan marna maamaulka dowladda (Siyaasadda) u adeegsan eray-bixinta xukun, dhammaan meelaha erayga xukun uga soo arooray quraankuna waxay ka hadlayaan nidaamka garsoorka iyo kala saaridda dadka kiisasku dhexmaraan, mar qurana quraanku erayga xukun siyaasad uma adeegsan.

Run ahaantii, madaxdii muslimiinta – ee khulufaa'u raashidiinta ka danbeeyey- ayaa ka mas'uul ah in siyaasadda [xukunka] loo muujiyo sidii in ay tahay aasaaska diinta islaamka, waayo fikraddaasi waxay madaxda fursad u siinaysaa inay isu-muujiyaan sidii inay diinta metalayaan, sidaa darteedna aan loo baahnayn in cidi mucaaraddo ama xataa la xisaabtanto, ciddii sidaa yeeshaana waxay noqonaysaa murtad diinta ka baxay.
Dunida islaamka, taniyo taariikh aad u fog mucaaradku mas'uuliinta talada haya waxay ku eedayn jireen in aysan shareecada islaamka wax ku xukumin, sidaa darteedna ay gaaloobeen. Muxaafidkuna dhankooda mucaaradka waxay ku eedayn jireen inay riddoobeen, sidaa awgeedna loo baahan yahay in luqunta loo dheereeyo. Arrinkaasina wuxuu dhaliyey in la xalaashado qubidda dhiigga muslimiinta, iyada oo isla markaana la xurmaynayo dhiigga diqsiga.

Kala duwidda diinta iyo afkaarta diiniga ahi waxay fursad noo-siinaysaa inaan kala garanno waxa ay tahay in isku si loo arko iyo waxa lagu kala aragti duwanaan karo, maxaa yeelay diinta la iskuma khilaafi karo, laakiin si taa ka duwan afkaarta diiniga ah aad baa la isugu khilaafi karaa. Tusaale ahaan, muslimiintu marna iskuma khilaafaan aayadaha quraanka, laakiin aad bay isugu khilaafaan afkaartii Abuu Xaniifa, Maalik, Shaafici, Axmed bin Xanbal, Abuu Xasan al-Ashcari, Abuu Xaamid al-Gasaali, Ibnu Taymiyah, Maxamed Cabdi-Wahaab, xasan al-Banna, Ibnu Baas, Qardaawi, …iwm. Sababta oo ah duqaydu waxay ka hadleen duruuftoodii, isla markaana waxay ka hadleen maankooda, oo waa tii Soomaali horay u tiri: “Ninna madaxiisa kama boodo" iyo "Ninna maankiisa ma saluugo", sida la og-yahayna "maan dad waa mudacyo afkood".Abuu Xaniifa oo xaqiiqadaas noo tilmaamayaana

Copyright © 2009 WardheerNews.com

waa tuu yiri: " Kuwaasi [Taabiciinta] rag bay ahaayeen, annaguna rag baan-nahay", Imaam Maalik oo isaguna Abuu Xaniifa ku waafaqay xaqiiqadaasi wuxuu yiri: "Ruux walba warkiisa waa la qaadan karaa, waana la diidi karaa, marka laga reebo kan qabrigaan ku jira [nebi Muxamed (SCW)]", Ibnu Xasmina wuxuu yiri: " Ku dayashada saxaabada ka dhalanmayso inay waajib tahay in lagu daydo Maalik, Abuu Xaniifa iyo Shaafici, …fuqahadaanna kumo jiro mid aan saxaabada ku khilaafin boqollaal mas'alo".

Kaarle Maarkis waxaa laga hayaa inuu yiri: "Dhaleecaynta [= naqdinta] diintu waa shardiga aasaaska u ah dhaleecayn oo dhan." Run ahaantiina, caqliga reer Yurub wuxuu shaqo bilaabay, sheeko-xariir iyo khuraafaadna ka xoroobay, noloshana fahmay ka dib markii dhaleecayn badan lagu sameeyey afkaartii diiniga ahayd ee culumadu [=wadaaddada kaniisaddu] caamada ku addoonsadeen. Muslimiiintuna maanta waxay ku jiraan xaalad dhinayco badan uga eg tii reer yurub ku jireen qarniyadii dhexe, taa awgeedna muslimiintu waxay u baahan yihiin aqoon-yahanno qaadan kara kaalin la mid ah kii ay ciyaareen aqoon-yahannadii reer Yurub ee horseedka ka ahaa dhaqdhaqaaqii maan-furka [enlightenment] ee dhawr boqol oo sano ka hor yurub ka hanaqaaday. Waxaa loo baahan yahay aqoon-yahanno leh garaad iyo geesinnimo ay dib u akhrin ugu sameeyaan afkaarta diiniga ah ee muslimiintu boqollaalka sano kala dhaxlayeen.

Waxaa la wariyey in wadaad Soomaaliyeed oo la oran jirey Xaaji Saciid Maxamuud Isxaaq, uu fatwoon jirey in sadaqada fidriga [Sakaatu Fitriga] lagu bixin karo caano iyo hilib [= cad iyo caano]. Wadaaddadii Soomaaliyeed oo fatwadaasi ka degi weydeyna shiikha waa ku dhaleeceeyeen mas'aladaas, arrinkuna wuxuu gaaray heer culumadii ay kutubta isu soo gurteen. Kolkii madashii lagu ballamay la isugu yimidna Shiikh Saciid wuxuu culumadii weydiiyey su'aasha ah: culumoy kolka aad baaraysaan masalooyinka mugdigu idinka galo halkee baad ka raadisaan? Culumadiina waxay ugu jawaabeen: waxaan ka baarnaa kutubta fiqiga ee ay ka midka yihiin Minhaajka iyo shuruuxdiisu. Mar labaadkiina wuxuu weydiiyey: oo horta minhaajka yaa qoray? Waxay yiraahdeen: waxaa qoray caalim weyn oo la oran jirey Imaam Nawawi. Mar saddexaadkiina wuxuu weydiiyey: oo horta shiikh Nawawi halkee buu ku noolaa? Waxay yiraahdeen: wuxuu ku noolaa dhul la yiraahdo Shaam. Mar afraadkiina wuxuu weydiiyey: dhulka la yiraahdo Shaam maxaa u quutu qaalib ah? waxay yiraahdeen: Shaam waa dhul-beereed, dadkiisuna waxay cunaan dalagyada beeraha ka soo go'a. dabadeedna, Xaaji Saciid wuxuu culumadii ku yiri: " Culumoy! wadaadka reer Shaam anaa reerkayga uga xog-ogaalsan[4]"
Hubantidii, Soomaalidu waxay u baahan tahay culumo sida Xaaji Saciid hal-abuur u leh, dadkooda iyo dalkoodana ku kalsoon, xurmo iyo qaddarinna u haya, kana xoroobi kara fikradaha qalloocan ee dibedaha laga soo dhoofiyo.

Yeelkadeede, qoraalkaan gaabani -haddii Alle idmo- wuxuu isku dayi doonaa inuu wax yar ka bidhaamiyo doodda kulul ee maanta ka aloosan mawduuca riddada. Su'aasha qoraalku isku dayi doono inuu ka jawaabaana ma aha in riddadu tahay denbi

[4] Sheekadaan waxaan marar badan ka maqlay buuniga weyn ee Aw jaamac Cumar Ciise, waxaanse ka xumahay in aanan sheekada u soo tebin karin sida quluudda iyo xalladda badan ee Shiikh Jaamac u tebiyo.

Copyright © 2009 WardheerNews.com

aakhiro cadaab lagu mudanayo iyo in kale, balse ujeeddada qoraalku waxay ku kooban tahay inuu ka jawaabo su'aasha ah: ma tahay in murtadku ciqaab aadane ifka ku muto mise maya?

Ugu dambayntii, ujeeddada qoraalka laga leeyahay ma aha wacdi, danta qoraaguna ma aha in akhristuhu qoslo ama qarracmo, balse dantu waa inuu wax bidhaamiyo, oo su'aalo abuuro.

2- Waa Maxay Riddo?

Erayga Ridda ama Irtidaad waa eray af Carabi ah, macnihiisuna af ahaan waa "noqosho", eraybixin ahaanna waa in diin laga noqdo ama laga baxo, siiba in diinta Islaamka laga baxo[5]. Ruuxa diinta ka baxayna waxaa loogu yeeraa murtad. Diin ka bixidduna waxay leedahay labo waji oo kala ah: in qofku diinta islaamka ka baxo isaga oo aan qaadan diin kale iyo in qofku ka baxo islaamka isla markaana uu qaato diin kale, sida inuu ka baxo Islaamka isaga oo ka dooranaya diinta Kiristaanka ama Yahuudda ama Buudiisimka, .. ,…iwm.
Murtadkana waxaa loo qaybiyaa labo nooc oo kala ah: Murtad Fitri ah; waana ruuxa ay dhaleen waalidiin muslim ahi, oo qaangaaray isaga oo muslim ah, laakiin isagu mar danbe islaamka isaga baxa, iyo Murtad Milli ah, oo ah ruuxa ay dhaleen waarid aan muslim ahayn, oo qaangaaray isaga oo aan muslim ahayn, hase ahaatee gadaal ka qaatay diinta islaamka, laakiin mar danbe ka noqda diinta[6].
Waxa riddada ama gaaloobidda loo daliishanayaana waxay yeelan karaan dhawr waji oo kala ah: wax uur laga rumeeyo, ama af laga yiraahdo ama addin laga falo.
Culumada qaarkoodna waxay isku dayeen inay dejiyaan qaacido koobta arrimaha riddada keena, waxayna dejiyeen qaacido oranaysa: **waxaa riddada keena in la diido arrin ay khasab tahay in diinta laga ogaado [Macluum mina diin bidaruurah**]. Hase ahaatee, qaacidadaani ma aha mid la isku waafaqsan yahay run-sheeggeeda, waxaana jira aqoon-yahanno badan oo rumaysan in qaacidadaani aysan si cad u qeexnayn, waxayna ku tilmaameen inay sida mergiga u jiidanto, oo hadba sidii la rabo loo fasiran karo.

Culumada islaamkuna waa ku kala aragti duwan yihiin ciqaabta uu ifka ku mutaysanayo murtadku, culumada badankooduse waxay qabaan in riddadu tahay denbi ciddii ku dhacdaa ay mutaysanayso ciqaab la yiraahdo "Xad Arridda" oo ah in

[5] Aqoon-yahannada qaarkood waxay qabaan in riddadu [= noqoshadu] tahay in ruuxa ama bulshadu ay ka noqdaan diinta islaamka iyaga oo ku noqonaya diintoodii hore. Taa awgeedna aqoon-yahannadaani ma oggola in erayga riddo loo adeegsado muslimiinta islaamka ku dhashay ee aan diimaha kale soo marin. Tusaale ahaanna, Soomaaliga -inta la hubo-abidki muslimka ahaa ma habboona in loogu yeero erayga riddo, waayo ma laha diin hore oo uu dib ugu noqonayo.

[6] Maxamed Cumar Faaruuq wuxuu qabaa inaan loo baahnayn in la adeegsado eraybixinta ruux diin ama muslimnimo ku dhashay ama qof gaalnimo ku dhashay, balse sida saxda ahi ay tahay in la yiraahdo qof ay dhaleen waarid muslim ahi iyo qof ay dhaleen waarid gaal ahi. Sababtana wuxuu ku sheegay in caqiidada la qaato [=la rumeeyo], laakiin aan lagu dhalan. Fiiri faalladiisa cinwaankeedu yahay "Being born as a muslim: Is there such as thing?".

Copyright © 2009 WardheerNews.com

la dilo[7], laakiin waxay isku khilaafeen in loo baahan yahay in ka hor inta aan la dilin la siiyo waqti uu ku toobad keeni karo oo islaamka dib ugu soo noqon karo haddii uu doono iyo in kale?[8] Qaar ka mid ah culumada islaamkuna waxay qabaan in ay arrinkaas ku kala duwan yihiin murtadka fitriga ah iyo kan milliga ahi, oo waxay leeyihiin murtadka milliga ah waa la toobad weydiinayaa, laakiin kan fidriga ah lama weydiinayo. Si taa la mid ah culumada qaarkood waxay kala duwaan murtadka riddada qarsada iyo kan caddaysta, oo waxay yiraahdeen murtadka riddada qarsada waxaa la dilayaa isaga oo aan la weydiin inuu toobad keeno, laakiin kan riddada cadaysta waa la toobad weydiinayaa, oo hadduu islaamka u soo noqdo waa la iska daynayaa, haddii kalena waa la dilayaa.

Sidoo kale, culumada qaba toobad weydiintu waxay isku khilaafeen inta ay le'eg tahay muddada ay tahay in murtadka loo sugo si uu u toobad keeno. Si taa la mid ah, fuqahadu waxay isku khilaafeen haweenayda riddoowda waxa laga yeelayo, ma la dilayaa mise maya? Tusaale ahaanna, fuqahada mad-habta Xanafigu waxay qabaan in haweenayda riddowda aan la dileyn. Oo bilmatal, haddii wiil iyo gabar walaalo ah, ama afo iyo saygeed ay riddoobaan, culumadaani waxay qabaan in wiilka iyo sayga la dilayo, laakiin bilis xaawo aan waxba loo raacanayn.

3- Xumaha Iyo Taariikhda Gaalaynta Muslimiinta:

3-1: Xumaha Gaalaynta Muslimiinta:

Islaamku gaalaynta muslimiinta wuxuu u arkaa dhaqan xun oo loo baahan yahay in muslimku iskala weynaado. Nebigana (SCW) waxaa laga wariyey axaadiis badan oo muslimiinta uga digaya dhaqanka gaalaynta, waxaana ka mid ah xadiiska oranaya: " Haddii ninku [= qofku] ku yiraahdo walaalkiis gaalyahow midkood bay ku noqotaa [= gaalnimadu], oo haddii kan lagu sheegay gaalnimadu uu sidaa yahay isaga ayaa gaal ah, haddii kalena waxay ku noqotaa kan yiri". Riwaayad kalena waxay leedahay: " Ruuxii nin ku sheega gaalnimo, ama yiraahda cadowgii Alle, haddii uusan sidaa ahayn isagay ku noqotaa". Xadiis kalena wuxuu leeyahay: " Ruuxii muumin gaalnimo ku ganaa [= ku sheegaa] wuxuu la mid yahay sidii inuu dilay".

Culumada islaamkuna waa isku khilaafeen macnaha dhabta ah ee gaalnimada axaadiistaani sheegayso, oo waxay isweydiiyeen su'aasha ah: ruuxii muslim gaalnimo ku sheegaa ma gaaloobayaa mise denbi weyn buu kasbanayaa? Haddii si kale loo yiraahdo, gaalnimada axaadiistu sheegtay ma gaalnimo ruuxa diinta ka saaraysaa mise maya? Culumada badankooduna waxay qabaan in gaalnimada axaadiistu sheegaysaa

[7] Afarta mad-hab ee ugu waaweyn fiqiga ahlu sunnadu waa isku waafaqsan yihiin in la dilo ruuxa riddadu ku caddaato.

[8] Ibnu Sureyj [dhintay 235 ee hijrada] oo ka mid ahaa fuqahada waaweyn ee mad-habta Shaaficigu wuxuu ku dooday in loo baahan yahay in murtadka la siiyo waqti uu ku toobad keeno, sidaa darteedna wuxuu fatwooday inaan murtadka mar qura qoorta laga goyn, ee lagu dilo ul lala dhaco, maxaa yeelay ushu murtadka waxay fursad u siinaysaa inuu helo waqti uu ku toobad keeno (Eeg: Al-Maawardi ; al-Axkaam al-Suldaaniya, B.75).

Copyright © 2009 WardheerNews.com

aysan ahayn mid diinta looga baxayo balse ay tahay mid muujinaysa faasiqnimo iyo in ruuxa sidaa u dhaqmaa uu mudanayo caro Alle. Laakiin qaar kale oo culumada ka mid ahi waxay yiraahdeen haddii ruuxa gaalnimada lagu sheegay uu dhab ahaantii gaal yahay ruuxa erayga yiri wax eed ah yeelan maayo, laakiin haddii uusan gaal ahayn isaga qudhiisa ayaa gaaloobaya, waayo xaaladdaas wuxuu ka dhigan yahay inuu islaamka qudhiisa gaalnimo ku sheegayo, ruuxii islaamka gaalnimo ku sheegaana waa gaaloobayaa. Intaa waxaa dheer, culumada qaarkood waxay yiraahdeen: ruuxa muslimka ku yiraahda gaalyahow, ama faasiq-yahow ama faajir-yahow wuxuu mudanayaa ciqaab tacsiir ah, maxaa yeelay wuxuu ku dhacay denbi aan xad go'an lahayn, denbiyada aan xadka lahaynna waxaa lagu ciqaabaa ciqaab lagu edbinayo oo ah ciqaabta loo yaqaan tacsiirta.

Saxaabigii Usaama bin Seyd (RC) oo nebiga ka warinaya dhacdo isaga qudhiisa qabsatayna wuxuu yiri sidatan: " Rasuulkii Alle (SCW) ayaa wuxuu noo diray hawl gaar ah [=sariya], waxaanna ku waa beriisannay al-Xuruqaatka [= waa meel magaceed] Reer-Juhayno. Dabadeedna waxaan haleelay nin, markaasuu yiri: Alle mooyee Ilaah kale ma jiro. Dabadeedna waan la dhacay [= seefta]. Arrinkaasina shaki buu igu beeray. Dabadeedna nebigaan u sheegay, markaasuu yiri:
"Ma isaga oo yiri: Alle mooyee Ilaah kale ma jiro ayaad dishay!!"
Waxaan iri: Rasuulkii Allow, wuxuu sidaa u yiri isaga oo hubka ka baqay darteed.
Nebiguna wuxuu yiri: " Oo maxaad u jeexi weyday qalbigiisa si aad u kala ogaato inuu sidaa u yiri iyo in kale?!!" nebiguna kama suulin inuu su'aashaas igu celceliyo, jeer aan ka jeclaystay inaan maalintaas soo islaami lahaa![9]"

Culumada islaamka qaarkoodna waxay sheegeen in haddii hadalka ruuxa muslimka ahi uu 99% yeelan karo macne gaalnimo muujinaya, 1% uu leeyahay macne islaamnimo muujinaya, hadalka muslimka waxaa lagu xanbaaraya macnaha wanaagga iyo muslimnimada muujinaya. Haddii si kale loo yiraahdo: halka macne ee dhanka wanaagsan wax ka eegaya ayaa laga hormarinayaa sagaal iyo sagaashanka kale ee dhanka xun wax ka eegaya. Waayo, wanaagga ayaa asal ah, arrinkana asalkiisii horaa ayaa lagu xanbaaraa.

Sidoo kale, culumada islaamka qaarkood waxay isweydiiyeen su'aasha ah: gaalnimada, faasiqnimada iyo dulmilownimada kee baa ugu xun? Su'aashaasna culumadu waxay uga jawaabeen in dulmigu ka xun yahay gaalnimada iyo faasiqnimada, waayo , caadi ahaan dhibka gaalka iyo faasiqu waxay ku kooban tahay qofka nafsaddiisa, laakiin dhibka dulmigu wuxuu u gudbaa bulshada .

Waxaa la wariyey in nin askari ahi uu wadaad faqiih ah waydiiyey inuu waddada u tilmaamo, laakiin wadaadkii iska dhegotirey su'aasha askeriga. Sababta wadaadku sidaa u yeelayna wuxuu ku macneeyey inuu ka baqay in askarigu u socday meel uu dulmi ka gaysanayo, haddii uu waddada u sheegana uu noqanayo mid dulmiga gacan

[9] Waxaa wariyey Muslim, Abuu Daa'uud, Ibnu Maajah iyo Axmed.

Copyright © 2009 WardheerNews.com

ku siiyey, oo denbiga la qaybsanayo.

Imaam Maxamed al-Gasaali oo dhacdadaan faallo ka bixinayaana wuxuu yiri: " dadkii hore ee wanaagsanaa taxadarka noocaan oo kale ah kulama dhaqmi jirin faasiqiinta iyo gaalada, balse wuxuu ku goonni yahay dulmilowga. Waayo macsidu waxay u qaybsantaa mid gudubta iyo mid aan gudbin, fisqigu ma gudbo ee wuu kooban yahay, sidoo kalana gaalnimadu waa denbi Alle laga galay, la xisaabtankiisana isagaa iska leh. Laakiin dulmigu waa gudbaa [= dhibkiisu bulshaduu gaaraa]".

3-2: Taariikhda Gaalaynta:

Iyaga iyo ku Allahoode waxay wariyeen in tuke arkay tuke kale oo la nooc ah, markaasna uu ka carooday madowga iyo foolxumada ka muuqata wajiga saaxiibkiis. Wuxuu ka naxay madoobaanta wajiga saaxiibkiis, laakiin haddii uu wejigiisa muraayad ku eegi lahaa, wuxuu ogaan lahaa in qudhiisu uusan ka caddayn saaxiibkiis, laakiin halka sartu ka quruntay waa in tukuhu uusan haysan muraayad uu wejigiisa ku eego, isla markaana uusanba dareensanayn inuu u baahan yahay muraayad u qabata shaqada noocaas ah.

Run ahaantiina, dhibaatada haysata aadanaha oo dhan, siiba kuwa kala aamminsan diimaha, firqooyinka iyo madaahibta kala duwani waxay la mid tahay dhibaatada qabsatay tukahaas, waana in qolo waliba iska indho tirto xumaheeda isla markaana karbuuno weyn ku ifiso xumaha kuwa kale, in qolo kastaa iska dhaadhiciso in iyada oo keli ahi ay xaqa iyo xaqiiqada metesho, iskana indho tirto in xaqiiqadu wejiyo badan leedahay, cid walibana ka arkayso dhanka ay ka eegto oo qura, sidaa darteedna loo baahan yahay in la qaddariyo aragtida kuwa dhanka kale wax ka eegay.
Waxaa la wariyey in feylasuufkii weynaa ee Suqraat [= Socrat] -oo loo qiray inuu ahaa ugaaskii falaasifadii hore, laguna magacaabi jirey naanaysta ah " Garaadka garaadleyaasha/ Xakiimka xukamada" – mar la weydiiyey su'aasha ah: maxaa laguugu bixiyey magaca "Xakiimka xukamada? Suqraadna uu ku jawaabay: "Waayo dadka badankoodu ma oga jaahilnimada weyn ee ay ku sugan yihiin, aniguse waxaan ogahay jaahilnimadayda gaamurtay."

Waa run oo jahligu waa kan dadka ku bixiya inay keligood isla saxsanaadaan, fikradaha kale oo dhanna ka soo qaadaan waalli iyo nacasnimo. Wadaaddadii magaalada Atena oo jahligoodu ku bixiyey inay ra'yigooda oo qura tixgeliyaanna waa kuwii Suqraad dilka ku xukumay, kaddib markay ku eedeeyeen inuu diintii aabbayaashiis bidco ku barxay, dhalinyaradana maskaxda ka xado, oo si xun wax ugu sheego.

Diinta asalkeeda iyo nuxurkeedu waa turid, naxariis iyo xishood, waayo diintu waxay daahirisaa damiirka dadka, waxayna ku xirtaa samada, muuminkana waxay ku xanbaartaa inuu ka fogaado dulmi iyo denbi, waxayna ku bixisaa inuu u turo dhammaan uunka Alle. Laakiin si taa ka duwan, siyaasadda waxaa asal u ah danaysi,

Copyright © 2009 WardheerNews.com

xoog iyo ismaquunin, waayo siyaasaddu raxim ma leh[10], raxmadna ma taqaan. Diinta iyo siyaasadda oo la isku walaaqana waxaa ka dhalanaya in siyaaddu diinta ku daarato cudurrada danaysiga iyo ismaquuninta.

Si kastaba ha ahaatee, marka si qotodheer loo akhriyo taariikhda islaamka, waxaa la ogaanayaa in dhaqanka gaalayntu uu yahay dhaqan fac weyn, oo soo taxnaa in ka badan kun sano. Fikradda gaalayntuna waxay curataa mar kasta oo siyaasadda maro diineed loo geliyo. Danta laga leeyahayna waa in lagu faquuqo, bulshadana looga dheereeyo cidda la gaalaynayo.

Muslimiinta waxaa dhexmaray dagaallo kharaar oo ku reebay aano iyo utun aan abid laga bogsoon. Dagaalladaas oo af iyo addin labadaba lahaana, waxaa xanuun badnaa oo ay adagtahay in laga bogsadaa dagaalka afka ah. Nebigu (scw) wuxuu magaalada Madiino ku geeriyoodey sannadkii 632 C.D., geerida nebiga oo filan waa ku ahayd saxaabada badankoodana waxaa ka dhashay in saxaabadu isweydiiyeen su'aalo aan horay la isu weydiin, su'aalahaasna waxaa ugu muhiimsanaa labo su'aalood oo tan hore ahayd: Nebigu ma dhiman karaa? Tan labaadna ahayd: Haddii nebigu dhintay yaa buuxinaya xilkii hoggaamiyenimo ee nebigu mislimiinta u hayey?
Su'aasha hore dhib badan lagalama kulmin, oo waxaa si dhib yar u xalliyey khaliifkii Abuu Bakar Asadiiq (RC), ka dib markii uu muslimiinta u khudbeeyey, kuna dul akhriyey aayadaha quraanka ah ee muujinaya in nebigu yahay aadami, ay ku dhici karaan dhammaan cilladaha aadamiga ku dhacaa, isaga iyo aadamiga kalena farqiga u dhexeeyaa uu yahay waxyiga isaga iyo anbiyada kale lagu goonni yeelay.

Laakiin su'aasha labaad furdaaminteedu ma ahayn arrin fudud, waayo dan iyo damac ayaa dabada ka riixayey. Meydkii nebiga oo aan weli la aasin, ayaa Ansaartii Madiino - oo horay Muhaajirta eedo uga tirsanayey- waxay guriga ku caanbaxay magaca "Saqiifat Banii Saacida", waxay ku qabteen shir ujeeddadiisu ahayd inay ku doortaan ninkii geli lahaa booskii nebiga, ee noqon lahaa madaxa muslimiinta. Durbadiibana waxay hoggaamiye u magacaabeen ugaaskii beesha Khasraj oo ka tirsan bahwadaagta Ansaarta,. Ugaaskaasna waxaa lagu magacaabi jirey Sacad bin Cubaadah (RC).
Hase yeeshee, Ansaartii oo aan weli madashii ku kala dareerin ayaa waxaa ka war helay Abuu Bakar, Cumar bin Khaddaab iyo asxaab kale. Abuu Bakarna akhyaartii shirsanayd wuxuu u jeediyey khudbo uu ku yiri: " **Ansaarey! Rasuulka Alle annaguu naga dhashay, booskuu banneeyeyna annagaa idiinka xaq leh**".
Ansaartiina waxay ugu jawaabeen: " **Amiir baan magacaabanaynaa, ee idinkuna amiir magacawda / Minnaa Amiir waminku Amiir**". Abuu Bakarna wuxuu ugu jawaabay: " **Amiirradu annagay noqonayaan, wasiirraduna idinkay noqonayaan/ Minnaa al-Umaraa, wa'antum al-wusaraa**".
Iyada oo dooddu ay halkaas marayso, arrinkana la isku mari la' yahay, ayaa waxaa istaagay saxaabi ka mid ahaa odayaashii Ansaarta oo la oran jirey Abuu Cubeydah bin

[10] Dowladdii Cabbaasida, xilli ay boqortooyada ku loollamayeen labadii boqor ee walaalaha ahaa ee al-Amiin iyo al-Maamuun, ayaa Al-Amiin maalin waxaa lagu yiri: hadii walaalkaa dagaalka ka waantoobo, oo is-dhiibo, dhalashada iyo raximka aad wadaagtaan darteed ku cafi, oo ha dilin. Al-Ammiin-na ninkii taladaas soo jeediyey wuxuu ugu jawaabay: " Boqortooyadu waa ma dhalays oo raxim ma leh!"

Copyright © 2009 WardheerNews.com

Jarraax (RC), wuxuuna gacan qaaday Abuu Bakar, wuxuuna kula heshiiyey inuu noqdo khaliifka muslimiinta, Ansaartiina marka laga reebo Sacad bin Cubaadah, waxay arrinka ku waafaqeen Abuu Cubeyda, waxayna oggolaadeen khaliifnimada Abuu bakar. Sidaasna Abuu Bakar wuxuu ku noqday kii ugu horreeyey afarta nin ee muslimiintu u bixiyeen magaca Al-khulafaa Ar-Raashidiin, oo afartuba ah Muhaajiriin iyo Qureesh.

Yeelkadeede, loollanku halkaa kuma dhammaan, balse mar kale ayaa waxaa loollan ka dhex aloosmay muhaajiriinta dhexdooda, waxaana habboon inaan la illoobin mandiqa qabyaaladda ee yiraahda: " Aniga iyo walaalkay waxaan la dirirnaa ina adeerkayo, aniga iyo ina adeerkayna waxaan la dirirnaa shisheeyaha". Muhaajiriinta qaarkood waxay ku doodeen in arrinka lagu degdegay, Abuu Bakarna uusan khaliifnimada xaq u lahayn. Tusaale ahaanna, waxaa la wariyey in Cutba Bin Abii Lahab uu madashii Saqiifa bin Saacida ka tiriyey gabay uu ku ammaanay Cali bin Abii Daalib, si sarbeeb ahna uu ugu dooday in Cali madaxnimada xaq u leeyahay.

Run ahaantii, Cali si toos ah ugama horimaan Abuu Bakar iyo khaliifkii ka danbeeyey ee Cumar bin Khaddaab, sidoo kale waa run in Ansaartu aqbaleen go'aankii odaygoodii Abuu Cubeyda, laakiin dhab ahaantii arrinka lama xallin, oo khilaafka lagama bogsan, balse wuxuu ahaa dhuxul hoos ka hulaaqaysa, oo mar uun danbaaburo qarxin doonta.

Gacan ka hadalkii ugu horreeyey ee muslimiinta dhexdooda ka qarxay wuxuu ahaa kii ka dhashay kacdoonkii looga horyimid, markii danbana lagu diley khaliifkii 3-aad ee Cusmaan bin Cafaan (RC). Waxaana la rumaysan yahay in loollankaasi uu ku salaysnaa dano siyaasadeed iyo kuwo bulsho oo ay kala matalayeen kooxaha loollanku u dhexeeyay. Oo bilmatal, kooxda kacdoonka samaysay waxay ku doodayeen inay rabaan in dulmiga la suuliyo, madaxdii ka danbayseyna la ruqseeyo, haddii taa la waayana ay khasab noqonayso in la casilo khaliifka ka gaabiyey gudashada xilkiisa. Mana jirin cid sheegatay inay diin iyo caqiido metalayso, ama in qolada kale ay gaaloowdey[11].

Geeridii Cusmaan bin Cafaan (RC) waxay horseedday in la isku barxo qabyaalad, siyaasad iyo diin, waxayna daahfur u noqotay dhacdooyin taariikhda islaamka ku caanbaxay magaca "Al-Fitna al-kubraa ama fitnadii Cusmaan". Dhacdooyinkaasna waxaa ka mid ah dagaallo kharaar oo dhexmaray muslimiinta, oo ay ugu horreeyeen goobihii al-Jamal, Sifeyn, iyo Karbalaa. Dagaalladaasina waxay galaafteen noloshii tobannaan kun oo ruux, oo boqollaal ka mid ahi ay ahaayeen saxaabadii rasuulka, waxayna dhaliyeen in khilaafkii siyaasadeed loo yeelo waji diineed, koox walibana waxay bilowday inay raadsato aayado iyo axaadiis ay mowqifkeeda ku difaacdo, sidaasna waxaa ku abuurmay xisbiyo siyaasadeed oo kala matala dano kala duwan, isla markaana mid kastaba ay sheeganayso inay iyadu tahay

[11] Afadii nebiga ee Caa'isho binti Abuu Bakar oo markii hore ka mid ahayd dadkii Cusmaan bin Cafaan mucaaradka ku ahaa, ayaa waxaa laga wariyaa inay mar ay dadka ku diraysey Cusmaan ay tiri: " Dila Nactal wuu gaaloobaye", iyada oo Cusmaan ugu yeeraysa magaca Nactal. Erayga Nactalna dhawr macne ayaa lagu fasiray, waxaase loo badinayaa in Nactal ahaa magac loogu yeeri jirey nin Qibdi [Kirishtaan] ahaa, oo gar weyn lahaa oo ku noolaa magaalada madiino.

Copyright © 2009 WardheerNews.com

tan metasha diinta saxda ah. xisbiyadaas kuwii ugu horreeyeyna waxay ahaayeen xisbiyadii Khawaarijta, Shiicada, Sunnada, …iwm.
Qodobkii ugu horreeyey ee xisbiyadaani sida weyn ugu murmeen wuxuu ahaa: mansabka khaliifnimada ma Allaa bixiya mise aadamiga? Jawaab u helidda su'aashaasna muslimiintu waxay ugu qaybsameen labo kooxood oo tan hore ay ku tagtay in mansabka khaliifku uu yahay mid Alle baxsho, uuna la mid yahay mansabka nebinimada. Kooxda sidaa ku andacootay oo mar danbe loo bixiyey magaca Shiico, waxay yiraahdeen darajada khaliifnimadu [imaamadu] waa mid Alle bixiyo, waxayna la mid tahay nebinimada, Eebbana darajadaas wuxuu u doortay Cali bin Abii Daalib[12] iyo durriyaddiisa. Shiicada oo ciil badan qabay, eedo badanna tirsanayey dadkii fikraddooda mucaaraday waxay u bixiyeen magaca "Naasiba ama Nawaasib", waxayna ku xukumeen inay yihiin eey gaalo ah, oo Yahuudda iyo Majuustu ay ka diin fiican yihiin.

Dhanka kale, kooxdii diiddey in darajada khaliifnimadu tahay mid Alle bixiyo dhexdeeda waxaa ka curatay dood kale oo oranaysa: khaliifnimadu ma waxay ku gaar tahay jifida Banii Haashim, mise waxaa leh Qureesh oo dhan, mise Carab baa wadaagta, mise waa darajo muslimiinta oo dhan [carab iyo cajamba] u dhaxaysa xataa haddii ruuxa qabanayaa uu noqonayo "Xabashi addoon ah".

Kooxda ugu ballaaran kooxahaani waa midda Shiicadu u bixiyeen magaca "Naasiba", laakiin iyadu la baxday magaca "Ahli Sunna ama Sunna". Guud ahaanna, waxay qabaan in khaliifnimadu tahay darajo muslimiintu bixiyaan, laguna gaaro hannaanka shuurada. Waxayna ku doodeen in dhammaan khulufadii Abuu Bakar, Cumar, iyo Cusmaan ay waddo sax ah xilka ku qabteen, isla markaana loo baahan yahay in laga aammuso doodihii iyo dagaalladii saxaabada dhexmaray. Sunnadu [= Nawaasibtu] iyagu Shiicada waxay u bixiyeen magaca "Raafida", waxayna ku xukumeen inay yihiin dameerro aan diin lahayn, oo Yahuudda, Nasaarada iyo majuustu ka khayr badan yihiin, waxayna ku andacoodeen in la cuni karo xoolaha ehlu kitaabku gawracaan, isla markaana la guursan karo dumarkooda, laakiin si taa ka duwan marna ma bannaan in ruux Shiico [raafido] ah wax lagu darsado. Xiriirka qura ee Raafidada lala yeelan karaana uu yahay kan looga golleeyahay in lagu dilo ama si kale loogu hagardaameeyo.

Teeda kale, waxaa la oran karaa Khawaarijtu waxay ahaayeen kuwa kooxahaas hardamaya ugu diin jecel, laakiin isla markaa waxay ahaayeen kuwa ugu waalan, uguna dhiig daadin badan. Khawaarijtu iyaga oo adeegsanaya halkudheggoodii ahaa: " Cid aan Alle ahayni wax ma xukumi karto/ Laa xukma illaa lillaah" ayay waxay gaalaysiiyeen Cali bin Abii Daalib - oo markii hore ay ka tirsanaayeen taageerayaashiisa- iyo dhammaan ciddii qabta fikrad tooda ka duwan. Welibana intaa kuma ay ekaana waxay fuliyeen siyaasad ah in dadka wixii aan firqadooda ahayn ay seefta ka aslaan. Sidaa darteedna, Khawaarijtu waxay ku caanbexeen madax-falluuq iyo dhiig daadin.

[12] Nusuusta shiicadu ay arrinkaan u daliishadaan waxaa ugu muhiimsan xadiiska loo yaqaan "Gadiir al-Khum", oo muslimiintu isku waafaqsan yihiin jiritaankiisa, laakiin isku khilaafsan yihiin macnaha la siinayo.

Copyright © 2009 WardheerNews.com

Si kastaba ha ahaatee, taniyo taariikhdaas aadka u fog waxaa abuurmay firqooyin islaam wada sheeganaya, oo tiradooda lagu sheego dhawr iyo toddobaatan[13], oo midkastaa ku andacoonayso in iyada oo keli ahi ay tahay firqada badbaadaysa, ayna u taagan tahay sidii ay caqiidada uga waardiyeyn lahayd firqooyinka ka ambaday waddada cad ee habeenkeedu maalinta yahay. Firqooyin mid waliba ay gaalaynayso inta kale, adduun iyo aakhiro toonnana aysan wax uga oggolayn. Su'aalaha isweydiinta u baahanna waxaa ka mid ah: War jannadu miyaysan dadkoo dhan ku filnayn? Dadka gaalaynta iyo riddada ku mitidayaase ma waxay ka baqayaan in jannada laga buuxiyo, oo ay boos ka waayaan?

Isku soo xooriyoo, fikradda gaalayntu waa fikrad taariikh dheer leh, ururrada maanta wax gaalaysiinayaana waxay heli karaan suugaan badan oo ay dantooda ugu kitaab dayi karaan. Laakiin taasoo jirta, haddana mar walba waa caddahay in gaalayntu tahay siyaasad muuqaal diineed loo yeelay.

4- Islaamka Iyo Xorriyadda Diinta:

Iimaanku waa qanaaco qalbigu ku xasilo, qanaacadaasina kuma iman karto dirqin iyo jajuub. Sidaa awgeedna, iimaan iyo dirqin meel ma wada galaan. Dirqinta iyo sandulleyntana iimaan laguma gaari karo, balse waxaa lagu heli karaa munaafaqnimo iyo qof ama bulsho labo waji leh. Nifaaq iyo iimaanna ma aha labo la isku doorsan karo.

In wax la rumeeyaa waxay u baahan tahay in lagu qanco waxa la rumaynayo, qanaacadana waxaa lagu hantaa labo arrimood midkood:
Kow: **ku dayasho**: waxaa jira dad sheegta inay wax rumaysan yihiin, laakiin waxaas ay rumaysan yihiin kuma gaarin baarid iyo xog-ogaalnimo, balse waxay ku gaaraan inay cid kale uga daydaan. Iimaanka noocaas ahina waa iimaanka caamada oo ah dadka dunida badankooda. Sida la og-yahayna caamadu xagga maskaxda waxay kala mid yihiin duunyada la soofsado, oo maskaxdoodu ma taqaan inay su'aalo iska weydiiso waxa aan hortooda ka muuqan, sida fikraha la rumeeyo. Iimaanka caamaduna wuxuu ku qotomaa ku dayasho, oo waxay rumaystaan wixii ay cid ka arkeen ama ka maqleen, siiba waxay ku arkaan ama ka maqlaan waalidiintood. Siduu Jaaxidh sheegayna caamadu ma taqaan shaki balse waxay taqaan "Haa" iyo "Maya"[14].

Waxaa la wariyey in gabyaagii feylasuufka ahaa ee al-Cataabi (Dhintay 220 ee Hijrada) oo u duurxulaya culumada cilmiga xadiiska, oo waagaas ku faani jirey in dadweynuhu la hayaan iyaga iyo cilmigoodu, uu galab fariistay gole isaga oo iska dhigaya inuu doonayo inuu dadka baro cilmiga xadiiska, wuxuuna yiri: " Rasuulku (SCW) wuxuu yiri: qofkii carrabkiisu gaaro sankiisa ma galo naarta". Dadkii

[13] Aqoon-yahannada u dhuundaloola firqooyinka islaamku waxay sheegaan inay tiradaas aad uga badan yihiin.
[14] Al- Jaaxidh (Camar bin Baxar); al-Xayawaan (Taxqiiq Cabdi-Salaam Haaruun, al-Qaahira, dabcadii 2-aad) juska 6-aad, BB.35-37.

Copyright © 2009 WardheerNews.com

golaha fadhiyeyna mar qura ayay waxay bilaabeen inay carrabka iyo sanka isla raadiyaan, si ay u kala ogaadaan jannada iyo naarta tan loo dheelmayo[15].

Labo: Shakibax: waxaa jira dad ay ku adag-tahay in ay rumeeyaan wax aysan ku qancin ka dib markay su'aalo iska weydiiyaan. Dadka noocaas ah, oo runtii aad u yarina waa kuwa dhab ahaan erayga iimaan uu ku rumoobayo. Dadkaanna waxay leeyihiin tilmaanta lagu yaqaan culumada dhabta ah, oo ah waxa loo yaqaan shaki-cilmiyeed. Culumadaani waa kuwa rumaysan in aqoonta iyo iimaanka shaki ka horreeyo. Oo qofka si loo yiraahdo wuu rumeeyey, waa in waxa uu rumaynayo uu markii hore shaki ka qabay oo su'aalo iska weydiiyey. Tusaale ahaanna, sida la og-yahay qofka caqiido mid kale ku doorsanayaa wuxuu marka hore maraa marxalad shaki, oo uu ka shakiyo caqiidada uu ka tagayo iyo xataa midda danbe ee uu qaadanayo. Shakigana siduu sheegay Xujatu Al-Islaam al-Gasaali [450-505H / 1058-1111 C.D.] waxaa lagu gaaraa xaqa, waayo: " Ruuxa aan shakini ma eego, kaan eeginna ma arko, kaan arkinna wuxuu ku waaraa indho la'aan iyo baadi[16]".

Quraanka kariimkuna wuxuu noo-sheegay dood dhexmartay nebi Ibraahiim oo u baahday marag uu ku qanco iyo rabbigi. Quraanka oo dhacdadaas noo soo tebinayaana wuxuu yiri: " Xusuuso markii Ibraahim [rabbigi ku] yiri: Rabbow I tusi sidaad u noolayso waxa dhinta, uuna ku yiri: miyaadan rumayn? Oo uu yiri: waa rumeeyey laakiin [waxaan doonayaa] inuu xasilo qalbigaygu, markaas [Rabi] yiri: qaado afar shimbirood una iil xaggaaga [= jarjar] ka dibna yeel buur kasta qayb ka mid ah, dabadeedna u yeer waxay kuu imaan iyaga oo ordiye, ogoowna in Eebbe yahay adkaade falsan' [Al-Baqarah: 260] Xadiis uu wariyey Abuu Hureyrana (RC) wuxuu sheegayaa: in nebiga (SCW) ay u yimaadeen koox saxaabada ka mid ahi, ayna ku yiraahdeen: " Rasuulkii Allow, midkeen naftiisa wuxuu kula hadlaa wax uusan jeclayn inuu ka sheekeeyo xataa haddii la siinayo wax dhulka hanti taal .. nafteennana waxaan ka helaynaa wax ku weyn in midkeen ku hadlo!!" nebiguna (SCW) wuxuu ku yiri: "Oo ma hesheen?" waxay yiraahdeen: "Haa". Markaasna nebigu wuxuu yiri: "Kaasi waa iimaan cad .. kaasi waa iimaan barax la !! [17]" .
Halkaan waxaan ku arkaynaa saxaabada oo si dadban nebiga ugu sheegaya inay xoogaa shakiya qabaan, su'aalana isweydiiyaan. Nebiguna (SCW) ma dhihin waxba ha isweydiinnina, balse si taa ka duwan, wuxuu ula hadlay si dhimrin iyo xeeladi ku dheehan tahay, wuxuuna u sarbeebay in loo baahan yahay in qofku shaki-bax sameeyo, oo su'aalo isweydiiyo.

Waxaana la wariyey in labo wadaad oo muslim ah oo sheekaysanayey uu midkood yiri: " Anigu sina uma shakiyo" kii kalena wuxuu ugu jawaabay: " Aniguna sina uma qanco"[18].

[15] Al-Asfahaani (Abuu Faraj); Al-Agaani (Taxqiiq:Cali Asubaaci, Beyruut, Mu'asasat Jamaal Lidibaacati Wanashri) juska 13-aad, B.114
[16] Al-Gasaali (Abuu Xaamid Muxamed bin Muxamed); Miisaan al-Camal, B.409.
[17] Waxaa wariyey Muslim iyo Axmed.
[18] Al- Jaaxidh (Camar bin Baxar); al-Xayawaan , juska 6-aad, B.35.

Copyright © 2009 WardheerNews.com

Yeelkadeede, quraanka kariimka waxaa ku badan aayado si qayaxan u muujinaya xorriyadda diinta iyo inaan ruuxa lagu khasbi karin caqiido uusan ku qanacsanayn. Qofkana sida aan loogu khasbi karin inuu diin qaato, ayaan loogu khasbi karin inuu ku sii jiro diin uusan ku qanacsanayn.

Shiikh Maxamed al-Gasaalina buuggiisa " Asunna Anabawiya Beyna Ahli al-Fiqhi Wa Ahli al-Xadiis" wuxuu ku yiri: "waxaan koobay in ka badan labo boqol oo aayadood oo ka hadlaya xorriyadda diinta iyo in iimaanka lagu saleeyo ku qancid … laakiin in islaamka loo sawiro sidii inuu yahay mid jecel daandaansiga kuwa kale, una oomman yahay dhiiggoodu, waa been abuurad lagu samaynayo Alle iyo Rusushiisa,…"

Aayadaha quraanka ee xorriyadda diinta tilmaamayana waxaa ka mid ah dhawrka soo socda:

1- "Khasab ma aha diinta galiddeedu, hanuunku [= iimaanku] waa ka caddaaday baadida [= gaalnimada], ruuxiise diida dhaaquut oo rumeeya Eebbe wuxuu qabsaday xarig adag oo aan go'ayn, Eebbana waa maqle og" [Al-Baqarah: 256].

Macnaha aayadduna wuxuu si cad u muuqanayaa marka la ogaado munaasabaddii ay ku soo degtay. Culumada tafsiirkuna waxay wariyaan dhawr munaasabadood oo ay sheegaan inay aayaddu ku soo degtay. Run ahaantiise, in kasta oo munaasabadda siyaabo kala duwan loo wariyey haddana nuxurkoodu waa isku mid, waana in aysan bannaanayn in diinta la isku khasbaa.

Tusaale ahaanna, waxaa la wariyey in dumarka Ansaartu islaamka ka hor caado u lahaayeen inay sharad ku galaan in haddii ubadku u noolaadaan ay Yahuud ka dhigayaan[19], sidaa darteedna waxaa jirey carruur badan oo Ansaartu dhaleen oo qaatay diinta yahuudda. Kolkii nebigu amray in yahuuddii Banuu Nadiir laga raacdeeyo magaalada Madiinana waxaa jirey ubad badan oo Ansaartu dhaleen oo qaatay diinta Yahuudda. Ansaartiina waxay damceen inay ilmahooda ku khasbaan islaamka, si ay ugala haraan yahuudda, laakiin waxaa soo degtay aayadda kor ku xusan oo diidaysa in diinta la isku khasbo.

Waxaa kaloo la yiri: waxaa jirey nin u dhashay qabiilada la yiraahdo Saalim bin Coof ee Ansaarta ka mid ah, oo la oran jirey al-Xuseyn,oo dhalay labo wiil oo qaatay diinta kiristaanka. Al-Xuseynna wuxuu nebiga (SCW) ku yiri: miyaysan ii bannaanayn inaan islaamka ku khasbo? Nebigana waxaa ku soo degtay aayaddaan. Waxaa kaloo la sheegay in wiilasha qudhoodu ay nebiga aabbahood uga soo dacwoodeen iyaga oo ka sheeganaya inuu doonayo inuu diinta islaamka ku khasbo, markaasna ay nebiga aayaddu ku soo degtay.

Culumada qaarkood iyaga oo ka cararaya macnaha cad ee aayaddu leedahay ayay waxay ku doodeen in macnaha aayaddu yahay: "gelidda diintu khasab ma aha". Hadalkaas oo macnihiisu yahay: waxaad xaq u leedahay inaad diinta soo gasho iyo in aadan soo gelin, laakiin mar hadaad soo gasho xaq uma yeelanaysid

[19] Dunidii hore dadku waxay rumaysnaayeen in ilmuhu u dhintaan sababo la xiriira uuman shar leh oo ku dega dartood, sidaa awgeedna waxaa loo baahday in ubadka diinta looga dhigo xirsi-xir.

Copyright © 2009 WardheerNews.com

in aad mar danbe dib uga baxdo. Haddii si kale loo yiraahdo: islaamku waa waddo hal dhan loo raaco, ciddii mar waddadaas gashana looma oggola inay mar kale dib ugu noqoto.

2- " Hadduu doono Eebbahaa waxaa rumayn lahaa waxa dhulka ku sugan oo dhan, ee ma adaa ku khasbi intay ka rumeeyaan (=xaqa)" [Yuunus: 99].

3- " … Miyaan idinku laasimin karraa [= xaqa iyo hanuunka] idinka oo nici" [Huud: 28].

4- " Waxaad dhahdaa xaqu Eebbihiin buu ka ahaaday ee ciddii doonta ha rumayso, ciddii doontana ha gaalowdo .." [Al-Kahf: 29].

5- " Waxaad dhahdaa Eebbe uun baan caabudi anoo u keli-yeeli diintayda. Ee caabuda waxaad doontaan Eebbe ka sokow …." [As-Sumar: 14-15].

6- " Waxaad dhahdaa gaalooy ma caabudayo waxaad caabudaysaan, idinna ma caabudaysaan waxaan [Eebbahaan] caabudi …."[Al-Kaafiruun: 1-6].

Dhanka kale, waxaa jira culumada qaar ku dooda in la nasakhay aayadaha quraanka ee tilmaamaya xorriyadda caqiidada. Culumadaani waxay ku andacoodaan in aayadaha tusinaya xorriyadda caqiidada lagu nasakhay aayadda seefta[20] iyo guud ahaan ayaadaha jihaadka[21]. Laakiin dhab ahaantii, aayadaha dagaalku ma nasakhayaan aayadaha tusinaya xorriyadda diinta, maxaa yeelay aayadaha dagaalku waxay farayaan in lala dagaallamo kuwa muslimiinta la dagaallamaya, oo dadka diintooda ka fidnaynaya, sababta loola dagaallamayaana ma aha in diinta khasab lagu soo galiyo, balse waa in dhibkooda dadka laga badbaadiyo. Culumada qaarkoodna waxay isweydiiyeen su'aasha ah: sidee aayadda seefta oo la siiyey in ka badan siddeetan macne ay u nasakhi kartaa aayadaha ka hadlaya xorriyadda diinta oo macnahoodu aad u qeexan yahay?

Xorriyadda diinta ee quraanku sheegayna, maanta waxay ka mid noqotay xuquuqu insaanka lagu qeexay heshiisyada dowliga ah iyo dastuurrada waddamada, oo dhigaya inaan muwaadiniinta lagu kala faquuqi karin sababo la xiriira diinta iyo caqiidada ay rumaysan yihiin dartood. Tusaale ahaanna, qodobka 18-aad ee Bayaanka Caalamiga Ee Xuquuqda Aadanuhu wuxuu leeyahay sidatan: " Qof kastaa wuxuu xaq u leeyahay xorriyadda fikirka, damiirka iyo diinta; xuquuqdaasna waxaa ka mid ah in ruuxu beddeli karo diintiisa ama caqiidadiisa, iyo xorriyadda muujintooda sida barashada, ku dhaqanka iyo fulinta shacaa'irta, isaga oo

[20] Aayadda seeftu waa aayadda 5-aad ee suuradda Atowba, gadaal baanna ka xusi doonnaa –haddii Alle idmo.

[21] Sharrax faahfaahsan oo qodobkaan la xiriira akhristaha danaynayaa wuxuu ka heli karaa buugta ay ka midka yihiin : Xorriyat al-Ictiqaad Fil-Quraan al-Kariim ee uu qoray Cabdi-Raxmaan Xilli iyo al-Xorriyah Addiiniyah Fil-Islaam ee uu qoray Cabdi-Mutacaal Saciidii.

Copyright © 2009 WardheerNews.com

keligi ah ama bulsho weheliso, qarsoodi iyo bareer kuu doono." Qodobka 29-aad ee dastuurkii Soomaaliya ee 1960kiina wuxuu leeyahay sidatan: " Ruux kastaa wuxuu xaq u leeyahay xorriyadda damiirka iyo inuu si xor ah u muujiyo diintiisa iyo inuu cibaadadiisa u gutto /Every person shall have the right to freedom of conscience and freely to profess his own religion and to worship it subject to any limitations which may be prescribed by law for the purpose of safeguarding morals, public health or order "[22]

Arrimaha xorriyadda diinta dhiirrigelinayana waxaa ka mid ah: in maanta diinta iyo dowladdu ay kala duwan yihiin, oo sebenkaan dowladdu kuma dhisna diin, laakiin waxay ku dhisan tahay waddan leh dhul, shacab iyo taariikh[23]. Waddankaasna waxaa wadaaga dhammaan dadka u dhashay waddanka si kasta oo ay u kala duwan tahay diintoodu. Tusaale ahaan, Talyaaniga waxaa iska leh dhammaan dadka sita dhalashada waddankaas, si kasta oo diintoodu u kala duwan tahay. Sidoo kale, Hindiya waxaa iska leh dhammaan dadka u dhashay waddankaas iyada oo aan loo eegayn diinta ay rumaysan yihiin. Si taa la mid ah, Sacuudiga waxaa iska leh dadka sita dhalashada waddankaas si kasta oo diintoodu u kala geddisan tahay, muslimiinta kalena xaq uma laha inay sheegtaan dhalashada waddankaas, in kasta oo qibladoodu tahay Kacbada Maka, qalbigooduna ku xiran yahay Maka iyo Madiino. Sidaa darteedna waxaan aragnaa Sacuudiga oo muslimiinta kale tarxiil ahaan uga qabqabta xaramka dhexdiisa.

> Iyada oo kooban, caqiidadu waa sir muqaddas ah oo u dhaxaysa qofka iyo rabbigi, mana jirto cid faraha la geli karta xiriirkaas, waayo ma jirto cid Eebbe u wakiishay hawshaas. Waxa qura ee qofka loo oggol yahayna waa inuu diintiisa dadka ugu soo bandhigo si xushmo iyo edebi ku dheehan tahay. Cumar bin Khaddaabna(RC) waxaa laga wariyey qisadaan[24]:
> Waxaa la yiri: Cumar bin Khaddaab waxaa u timid haweenay Kirishtaan ah oo u dan sheegatay, Cumarna kolkii uu danteedii u fuliyey ayuu islaamka ugu yeeray, laakiin way diidday, Cumar oo ka baqay in falkiisu u muuqdo diin la isku dirqinayaana wuxuu yiri: " Eebbow kuma dirqinayo", wuxuuna akhriyey aayadda kor ku xusan ee oranaysa: " Khasab ma aha diinta geliddeedu,…."

[22] Nasiib wanaag iyo nasiib xumo kay doonto ha noqotee, jaartarrada iyo dastuurrada la sameeyey sanooyinkaan danbe dhanka xorriyadda diinta waa uga liitaan dastuurkii 1960kii, arrinkaasna waxaa lagu fasiri karaa galaangalka fikirka diiniga ahi uu yeeshay sanooyinkaan danbe. Waxaana xusid mudan, in dastuurka dhaqdhaqaaqyada islaamku maanta doonayaan in lagu dhaqo waddamada islaamku uu dhigayo in murtadka la dilo. Tusaale ahaan, dastuurka ururka islaamiga ah ee Xisbu Taxriir ee dalka Jordan ay u dejiyeen inay ku dhaqan waddanka kolka ay talada la wareegaan wuxuu dhigayaa sidatan: " Kuwa gala denbiga islaam ka bixidda waa in la dilaa, iyada oo lagu qaadayo xeerka riddada, haddii ay iyaga qudhoodu qirtaan inay islaamka ka baxeen" (Taqiyudiin al-Nabahaani; The System of Islam, B.116).

[23] Dunidii hore diinta iyo dowladdu isku mid bay ahaayeen, oo dhalashada qofku waxay ahayd diintiisa. Tusaale ahaanna dhalashada muslimku waxay ahayd islaamka, wuxuuna xaq u lahaa inuu ku noolaado meel walba oo ka mid ah dhulka muslimiintu degaan. Guud ahaanna, muslimiintu dhulka waxay u qaybin jireen dhul islaam [Daar Islaam] iyo dhul gaalo [Daar al-Xarbi]. Sidaasna waxaa la mid ahaa dadyowga diimaha kale haysta.

[24] Al-Imaam Muxamed Abuu Suhra; Tandiim al-Islaam Lilmujtamac (Daar al-fikri al-Carabi, Qaahira, 1999) B.145

Copyright © 2009 WardheerNews.com

> Waxaana xusid mudan, in fuqahada islaamka qaarkood markay ka hadlayaan xuquuqda sayga muslimka ah ay ku leedahay afada u dhaxda ee Ehlu-Kitaabka ahi [= yuhuudiyad ama masiixiyad] ay ku daraan xuquuq dhawr ah oo la xiriira diinteeda, waxaana ka mid ah: inuu ixtiraamo caqiidadeeda, waxayna yiraahdeen waxaa loo baahan yahay in uusan ku qalqaalin inay islaamto, si meesha aysan u imaan wax loo qaadan karo diin la isku dirqinayo[25]. Waxay kaloo yiraahdeen: waxaa loo baahan yahay inuu afadiisa u fududeeyo sidii ay ku tagi lahayd kaniisadda haddii ay doonayso. Sidoo kale, waxaan u bannaanayn inuu u diido cabidda khamriga diinteedu bannaynayso, laakiin waxaa u bannaan inuu ka waaniyo dhibkeeda[26].

Quraanka kariimkuna wuxuu waariyey xuska muuminkii qolodii Fircoon ee la yaabay dooddii dadkii nebi Muuse ku eedeeyey inuu fikrad ka dhiibtey siduu u arko Rabbigiis. Quraanka oo noo soo tebinaya wareerkii iyo dhakafaarkii qabsaday ninkaas muuminka ahaana wuxuu yiri: War ma nin baad waxaad u dilaysaan "Inuu yiri Rabbigay waa Alle !!!" [Gaafir: 28]. Eebbana isaga oo dulqaadkiisa nabaraya ayuu wuxuu noosheegay dooddii dhexmartay isaga iyo ibliis. Ibliis wuxuu ku caasiyey Allihii uumay, laakiin Alle wuxuu muujiyey sabir iyo dulqaad, oo ibliis durba seef uma qaadane waa u seeto dheereeyey, wuxuuna ka aqbalay codsigiisii ahaa: "Ii kaadi taniyo maalinta la soo bixin dadka" [Saad: 79].

Haddaba, su'aalaha u baahan in la isweydiiyaa waxay yihiin: xadka riddada ee fuqahadu sheegeen miyuusan ka hor'imaanayn xorriyadda diinta ee aayadaha quraanku ay tilmaamayaan? Dilka murtadkuse miyuusan ahayn diin la isku khasbayo? Quraanka kariimkuse muxuu ka yiri riddada? Riddada iyo siyaasadduse wax xiriir ah ma leeyihiin?.

5- Quraanka Kariimka Iyo Riddada:

[25] Mudane Saliim Al-Xus oo haray dalka Lubnaan Ra'iisu Wasaare uga ahaan jirey asal ahaan wuxuu ahaan jirey muslim sunni ah, waxaana u dhaxday haweenay kirishtan ah oo la oran jirey Leyla Fircoon, laakiin haweenaydaasi waxay islaamtay maalmo yar ka hor geerideedii, sababta ku bixisay inay islaamtana waxay ku sheegtay inay tahay iyada oo doonaysa in iyada iyo saygeeda isku meel lagu aaso/duugo, waxayna tiri: " dooni maayo In sabab diin la xiriirta darteed loo kala dheereeyo labadayada qabri". Waxayna intaa ku dartay in saygeedu uusan abidki islaamka ku qalqaalin. Dhanka kale, Saliim al-Xis gadaal danbe wuxuu noqday muslim shiico ah, sababta arrinkaas ku bixisayna waxaa lagu sheegay inuu doonayey in gabadhiisu ay wada dhaxasho hantidiisa. Sida la ogyahayna mad-hababa Sunnada iyo Shiicadu waa ku kala duwan yihiin mas'alada saamiga gabadhu ka helayso dhaxalka aabbeheed.

[26] Si ka duwan caqliga fuqahadaan, waxaa jira fuqaho isku daya inay kala dheereeyaan muslimiinta iyo dadyowga haysta diimaha kale, tusaale ahaan fuqahada qaarkood waxay isweydiiyeen sida laga yeelayo afada Ehlu-kitaabka ah ee dhimata iyada oo uurka ku sidda ilmo uu dhalay aabbe muslim ahi, xaggee lagu duugayaa? Jawaabtii ay su'aashaas ka bixiyeenna waxay ahayd: waxaa lagu duugayaa meel goonni ah, oo lagu duugi maayo qubuuraha muslimiinta, waayo haddii sidaa la yeelo, oo qabrigeedu la derso qubuurta muslimiinta waxaa dhib ka soo gaarayaa muslimiinta. Sidoo kale lagu duugi maayo qubuuraha gaalada, waayo haddii sidaa la yeelo waxaa dhibi soo gaaraysaa ilmaha ay uurka ku siddo ee muslimka ah. Sidaa darteedna, waxaa loo baahan yahay in lagu duugo meel gaar ah oo aan ahayn qubuuraha muslimiinta iyo kuwa gaalada midna.

Copyright © 2009 WardheerNews.com

Dilka murtadku waa arrin culus, waayo waa dhiig dad oo la daadinayo, shakina kuma jiro in haddii xukunkaani uu Alle xaggiisa ka iman lahaa in lagu xusi lahaa quraanka kariimka ah.
Marar badan ayaa quraanka kariimku ka hadlay riddadada, mar qurana ma sheegin ciqaab cidda riddowda -oo islaamka ka baxda- ay adduunyada ku mutaysanayso. Quraankuna wuxuu isku si u adeegsaday erayga "riddo" iyo weedha "in la gaaloobo rumayn kaddib iyo in la gaaloobo muslimnimo ka dib".
Quraanka kariimku isaga oo ka hadlaya riddada, si qayaxanna u adeegsanaya erayga riddo [= celin ama noqosho] wuxuu yiri:

1- "Waxay jecel-yihiin in badan oo ehlu kitaabka ahi inay idiin celiyaan iimaankiinna ka dib gaalo, xasad naftooda ka yimid dartiis, intuu xaqu u caddaaday ka dib, ee iska cafiya iskana saamaxa inta Eebbe ka keeni amarkiisa, Eebbana wax walba waa awoodaa." [Al-Baqarah:109].
2- " Iskama daynayaan [=gaaladu] inay idinla dagaallamaan jeer ay idinka celiyaan diintiinna haddii ay awoodaan, ruuxii idinka mid ah ee ka riddooba diintiisa oo dhinta isaga oo gaal ahi, kuwaas waxaa buray camalkoodii adduun iyo aakhiraba, kuwaasina waa naarta ehelkeeda, waxayna ku waari dhexdeeda."[Al-Baqarah:217].
3- " Kuwa xaqa rumeeyow haddaad addeecdaan koox ka mid ah kuwa kitaabka la siiyey, iimaankiinna ka dib ayay idiin celinayaan gaalnimo" [Aali-Cimraan:100].
4- "Kuwa xaqa rumeeyow haddaad addeecdaan kuwa gaaloobay waxay idiin celinayaan ciribtiinna, markaasaad noqonaysaan idinkoo khasaaray" [Aali-Cimraan: 149].
5- " Kuwa xaqa rumeeyow ruuxii idinka mid ah oo ka riddooba diintiisa, Eebbe wuxuu keeni qolo uu jecel-yahay iyana jecel una naraxiista muuminiinta kuna daran gaalada, kuna jihaada jidka Eebbe aanna ka cabsanayn canaanta canaante, taasina waa fadliga Eebbe wuxuuna siiyaa cidduu doono, Eebbana waa deeq badane ogaal badan." [Al-Maa'idah:54].
6- " Kuwa riddoobay inta hanuunku u caddaaday kaddib, shayddaan baa u qurxiyey himilo [been ah] uguna yaboohay." [Muxammad:25].

Marar kale quraanku riddada wuxuu u adeegsaday erayga "gaaloobid" iyo weedha " in la gaaloobo rumayn ama islaamid ka dib", wuxuuna yiri:

1- " Waxay tiri koox ka mid ah Ehlu Kitaabku rumeeya waxa lagu soo dejiyey kuwa (xaqa) rumeeyey maalinta gelinkeeda hore kana gaalooba maalinta gelinkeeda danbe, waxay u dhaw-yihiin muuminiintu inay noqdaane [= gaaloobaan] * Hana rumaynina cidaan diintiinna raacin, waxaad dhahdaa hanuun waa hanuunka Eebbe, in cid la siiyo wax la mid ah waxa laydin siiyey ama idinkula doodaan Eebbihiin agtiisa, waxaad tiraahdaa fadligu gacanta Eebbe ayuu ku jiraa wuxuuna siiyaa cidduu doono, Eebbana waa deeq-badane ogaal badan." [Aal—Cimraan: 72-73].

Copyright © 2009 WardheerNews.com

2- " Sidee Eebbe u hanuuninayaa qolo gaaloobay rumayn ka dib, oo qiray in Rasuulku xaq yahay, xujooyinna u yimaadeen, Eebbana ma hanuuniyo qolo daalimiin ah * Kuwaas abaalkoodu waa lacnadda Eebbe oo korkooda ah iyo malaa'igta iyo dadka dhammaantiis * Wayna ku waari dhexdeeda lagamana fududeeyo cadaabta lamana sugo * Kuwa toobad keena intaas ka dib mooyee oo wanaajiya Eebbana waa denbi dhaafe naxariista * Kuwa gaalooba rumayn ka dib, markaas kororsada gaalnimo lagama aqbalo toobaddooda, kuwaasina waa kuwa dhumay." [Aali-Cimraan: 86-90].

3- " Kuwa rumeeyey ee dabadeedna gaaloobay, ee haddana rumeeyey ee gaaloobay, markaas sii badsaday gaalnimo ma aha Eebbe mid u dhaafi iyaga, kumana hanuuniyo jidka (toosan)" [An-Nisaa:137].

4- " Nabiyow la jihaad gaalada iyo munaafiqiinta, kuna darrow, dheelmadkooduna waa Naarta Jahannamo iyadaana u xun meel loo ahaado * Waxay Alle ugu dhaaranayaan in aysan dhihin, iyagoo yiri hadal gaalnimo, ayna gaaloobeen islaamnimo ka dib, ayna damceen waxaysan hanan, waxayna ku naceen ku hodminta Eebbe iyo Rasuulkiisa fadligiisa, hadday toobadkeenaan khayr bay u tahay, hadday jeestaanna wuxuu Eebbe cadaabi cadaab daran adduun iyo aakhiraba, dhulka dhexdiisana kuma leh sokeeye iyo gargaare midna." [At-Towbah:73-74].

5- " Ciddii Eebbe ku gaalowda rumayn ka dib, oo aan ka ahayn ruuxa lagu khasbay isagoo qalbigiisu ku xasilloon yahay iimaanka, ruuxiise laabtiisu u xasisho (rumayso) gaalnimo waxaa korkooda ah caro Eebbe, waxayna mudan cadaab weyn * Arrintaasina waa inay ka doorteen nolosha dhaw (=adduunyo) aakhiro iyo inaan Eebbe hanuuninayn kuwa gaalada ah * Kuwaas Eebbaa daboolay quluubtooda, maqalkooda iyo araggooda, kuwaasina waa uun kuwo hilmaansan (xaqa) * Waxaa sugan in kuwaasu aakhiro ay iyagu uun khasaareen " [An-Naxal:106-109].

Dhammaan aayadahaas iyo kuwo kaleba waxay ka hadlayaan riddada, sidaas oo ay tahayna ma jirto aayad keliya oo xustay xad ama ciqaab adduunyo oo ay tahay in murtadka lagu fuliyo[27]. Aayaduhu waxay tilmaamayaan noocyo badan oo ciqaab ah oo murtadku ka mudanayo xag Alle maalinta aakhiro. Ciqaabahaasna waxaa ka mid ah in camalkiisu adduun iyo aakhiraba uu hoobanayo, inuu naarta ku waarayo, in lacnadda Alle ku dhacayso, in cadaabta aan laga khafiifinayn, in hanuunka laga dheeraynayo, iyo inaan toobadda laga aqbalayn kuwa

[27] Faahfaahinta qodobkaan fiiri buugta ay ka midka yihiin: Dhaha Jaabir Al-Calwaani; Laa Ikraaha Fii Diin. Cabdi-Mutacaal Asaciidii; al-Xurriyah Addiiniyah Fil-Islaam. Axmed Subxi Al-Mansuur; Xad Arriddah Al-Mascuum. S. A. Rahman; Punishment of Apostasy in Islam. Abdullah Saeed and Hassan Saeed; Freedom of Religion: Apostasy and Islam. M. E. Subhani; Apostasy in Islam.

Copyright © 2009 WardheerNews.com

gaalnimadoodu soo noqnoqoto. Waxaana xusid mudan in aayadahaas marka mid qura[28] laga reebo ay yihiin aayado madani ah, oo nebiga ku soo degey intii uu madaxda ka ahaa dowladdii Madiino.

Run ahaantiina, culumada islaamka oo dhan waxaa ku jira hal wadaad oo ku dooday in ay jirto aayad quraan ah oo loo daliishan karo in murtadka la dilo. Wadaadkaas oo magaciisa la oran jirey Maxamed Daahir bin Caashuur wuxuu ku dooday in aayadda 217-aad ee suuradda Al-Baqara ee aan kor ku soo xusnay ay muujinayso in murtadka la dilo. Laakiin dhab ahaantii aayaddu sina macnahaas uma tusinayso.

Iyada oo kooban quraanku ma sheegin xadka riddada, balse waxaa sheegay fuqahada, waayo Alle ma yaqaan hiilka iyo xafiiltanka, laakiin hiilka iyo xafiiltanku waa dhaqan dadka lagu yaqaan- marka fuqahada lagu daro, sidaa darteedna muslimiinta waxaa la gudboon inay go'aan ka gaaraan Alle iyo Catoosh midka ay u hiillinayaan.

6- Axaadiista Nebiga Iyo Riddada:

Waxa ugu xoog badan ee ay daliishadaan taageerayaasha xadka riddadu waa labo xadiis oo nebiga (SCW) laga wariyo, waxayna kala yihiin:

Kow: Xadiiska koowaad waa xadiiska mararka qaarkood loogu yeero: " Waxyaabaha dilka waajibiya", wuxuuna sheegayaa saddex qolo oo ay tahay in la dilo, waxayna kala yihiin: " Naf naf loo dilo, ruuxa guursaday ee sinaysta iyo ruuxa diinta ka noqda ee jameecadana ka baxa".

B- **Naf naf loo dilo =[Qisaas**]: xadiisku wuxuu sheegayaa in qofkii qof dila loo dilo, naftana uma kala soocin gaal iyo muslim, lab iyo dheddig, xor iyo addoon, caddaan iyo madow, ee wuxuu si cad u sheegay in naftii naf kale disha looga qisaaso. Xadiiskuna qodobkaan wuxuu ku waafaqsan yahay aayadaha quraanka iyo axaadiis kale oo badan. Tusaale ahaan, quraanku wuxuu si qeexan u leeyahay: " Nafta [waxaa loo qisaasi] naf, ishana il, sankana san, dhegtana dheg, iliggana ilig, nabaradana waa la isu qisaasi, …" [Al-Maa'idah: 45). Sidoo kale quraanku wuxuu muslimiinta u sheegay in qisaasku nolol u yahay, mana sheegin dad dhiiggoodu kala qiimo badan yahay.

Mowqifka quraankuna waa mid ka duulaya qiimaha nafta bani'aadamku leedahay, iyo in dadku ka siman yihiin karaamada dadnimo. Waxaana la wariyey in nebiga (SCW) loo sheegay in nin muslim ahi uu dilay nin dimmi ah [gaal muslimiinta kula nool dhulka islaamka], nebiguna wuxuu yiri: " Ruux ballantiisa oofiya anaa ugu mudan", wuxuuna amar ku bixiyey in la dilo gacan ku dhiiglihii muslimka ahaa[29]. Faqihii maalikiga ahaa ee Ibnu Rushdi AL-Qurdhubi-na buuggiisaa "Bidaayat al-Mujtahid" wuxuu ku yiri: muslimiintu waxay isku raaceen in muslimka gacanta

[28] Waa aayadaha suuradda An-Naxal ee 106-109

[29] Xaalka xadiiskaan culumada cilmiga xadiisku waa isku khilaafeen, oo qaar baa waxay qabaan inuu mursal yahay, laakiin kuwo kale ayaa qaba inuu xoog badan yahay.

Copyright © 2009 WardheerNews.com

laga gooynayo hadduu xado hanti uu leeyahay qof dimmi ahi. Taa awgeedna, haddii xurmada maalkiisu la mid tahay xurmada maalka muslimka, xurmada dhiiggiisuna waxay la mid noqonaysaa xurmada dhiigga muslimka[30]. Run ahaantiina, in qofkii qof dila looga qisaasaa, ma aha wax la oran karo waxaa leh diin hebel iyo deegaan hebel, balse waxaa la oran karaa qisaasku wuxuu ka mid yahay arrimaha lagu ogaan karo caqliga saliimka ah, wuxuuna ka mid noqonayaa waxa loo yaqaan "Qaanuunka Dabiiciga ah/ Natural Law", ee aan loo baahnayn in loogu abtiriyo diin, dad iyo deegaan go'an midkoodna.

Taasoo jirta, haddana fuqahada islaamka badankoodu waxay sheegeen inaan muslimka gaal uu dilay darti loo dilayn[31]. Waxayna daliishadeen xadiis oranaya: " Muslim looma dilo gaal[32]", laakiin xadiiskaan waxaa diiday culumo uu ka mid yahay Abuu Xaniifa oo sheegay in xadiiska sanadkiisu fiican yahay, laakiin macnaha uu xanbaarsan yahay aan la qaadan karin, waayo macnaha xadiisku wuxuu ka hor-imaanayaa aayadaha quraanka ee aan qaarkood kor ku soo xusnay.
Akhristow waxaa la wariyey in waddamada Khaliijka midkood uu nin reer baadiye ahi ku dilay Injineer Maraykan ah, wadaaddadii dalkaasna waxay ku doodeen in aysan bannanayn in nin muslim ah loo dilo [loo qisaaso] gaal uu dilay darti, dowladdii oo arrinku waji gabax ku noqdayna waxay maslaxo bidday inay ku andacooto in dilka reer-baadiyuhu uusan ahayn qisaas, balse loo dilayo nabadgelyada oo uu khalkhal galiyey darteed[33].

Dhanka kale, fuqahada islaamku waxay isku khilaafeen magta gaalka. Fuqahada badankooduna waxay yiraahdeen magta gaalku waxay le'eg tahay kalabar magta muslimka. Qaar kalena waxay yiraahdeen magta yahuudda iyo kirishtaanku waxay le'eg tahay saddex meeloodow meel magta muslimka (33.33% magta muslimka). Qayb saddexaad oo culumada ka mid ahina waxay yiraahdeen haddii muslim gaal dilo, gaalka waxaa laga soo qaadayaa inuu addoon yahay, markaasaa muslimka wax dilay waxaa laga qaadayaa mag qiimaheedu u dhigmo qiimaha ruuxa addoonka ahi suuqa ka joogo. Laakiin dhibaatada muslimiinta maanta ka hor-imaanaysaa waxay tahay sidee maanta lagu garanayaa qiimaha addoonka? Seyladdee goynaysa qiimaha addoonta? Ma tan Muritaaniya, mise tan Suudaan, mise Neyjar mise mid kale? Fuqahada islaamkuna doodooda waxay ku saleeyeen xadiis oranaya: " Magta gaalku waa kalabar magta muslimka[34]", si kale oo xadiiskaan loo wariyeyna waxay tahay: " Waxaa la xukumay in magta labada ahlu kitaab ay tahay kalabar magta muslimiinta, waana yahuudda iyo nasaarada." Laakiin waxaa la qiyaasayaa in uusan jirin xadiis runnimadiisa [saxiixnimadiisa) la isku halayn karo oo mawduucaan ku soo arooray. Dhab ahaantiina, doodda wadaaddadu kama tarjumayso nuxurka shareecada islaamka, balse waxay ka tarjumaysaa colaaddii gaamurtay ee qarniyadii dhexe dhaxmartay muslimiinta iyo ummadihii diimaha kale haystey ee ay

[30] Ibnu Rushdi; Bidaayat al-Mujtahid, 2/375
[31] Waxaa sidaa qaba Maalik bin Anas, Shaafici, Axmed bin Xanbal iyo fuqaho kale, laakiin waxaa diiday Abuu Xaniifa iyo saaxiibbadi.
[32] Ashaafici, al-Musnad 2/159, al-Daar Qudhni 3/135, al-Beyhaqi 8/30, Abuu Daa'uud , al-Maraasiil, 207 iyo meelo kale.
[33] Maxamed Al-Gasaali; As-Sunna Anabawiyah Beyna Ahli al-Xadiis Wa Ahli al-Fiqhi; B.
[34] Eeg: Ashowkaani; Niil al-Owdhaar, baab diyat ahli al-Dimmah (juska 7-aad, BB.221-224).

Copyright © 2009 WardheerNews.com

wadaageen dagaalka diinta ku salaysan. Waxaana lama huraan ah, in caqliga fuqahada maanta nooli uusan isku xirin afkaartii laga dhaxlay fuqahadii qarniyadii dhexe, balse uu ka duulo ruuxda shareecada iyo ulajeedooyinkeeda guud [al-Maqaasid al-Kulliyah Lil-shariicah] , isaga oo xisaabta ku darsanaya duruufaha ka jira dunida cusub iyo baahida muslimiinta ku nool.

Dhanka kale, shareecada islaamku waxay qabtaa in ragga iyo dumarku ka siman yihiin qisaasta, oo haddii nin kas u dilo haweenay waa loo dilayaa[35]. Arrinku inuu sidaas yahayna fuqahadu waxay u daliishadeen xadiis sheegaya in nebigu (SCW) dilay nin yuhuudi ah oo diley gabar addoon ah. waxaa kaloo loo daliishaday warqad la sheegay in nebigu u qoray muslimiintii Yaman, uguna sii dhiibay saxaabi la oran jirey Camar bin Xisaam (RC). Warqaddaas waxyaabihii ku qornaana waxaa ka mid ah: " Ninka waa loo dilayaa haweenayda"[36].

Sidaas oo ay tahayse, kolka loo yimaado magta, mawqifka culumada wax badan baa iska beddelaya. Fuqahada islaamka badankoodu waxay qabaan in magta haweenku le'eg-tahay kalabar magta ragga. waxayna daliishadeen axaadiis oranaysa: " Magta dumarku waa kalabar magta ragga." Iyo oraah laga wariyo Cali bin Abii Daalib (RC) oo sheegaysa inuu yiri: " Magta haweenaydu waa kalabar magta ninka." Sidoo kale, dadka qaba in magta dumarku tahay kalabar tan raggu waxay daliishadeen kulanka culumada (=al-ijmaac), oo tusaale ahaan Ibnu al-Mundir iyo Ibnu Cabdulbar waxay yiraahdeen: " Culumadu waxay ku kulmeen [= isku raaceen] in magta haweenaydu tahay kalabar magta ninka."

Kala badinta magta ragga iyo magta dumarkana waxaa ka dhashay sheekooyin yaab iyo amakaag badan, waxaana ka mid ah middaan soo socota[37]:

Imaam Maalik wuxuu Rabiica bin Cabdi-Raxmaan ka wariyey inuu Saciid bin al-Musayab ku yiri: Farta haweenayda maxaa qaan ka waajibaya [maxaa laga simayaa]?[38] Wuxuu yiri: toban geel ah! wuxuu yiri: waxaan ku iri: labadii faroodna? Wuxuu yiri: labaatan geel ah! waxaan iri: saddexdii faroodna? Wuxuu yiri: soddon geel ah.! Waxaan iri: afartii faroodna? Wuxuu yiri: labaatan geel ah!! waxaan iri: oo ma markii dhaawaceedu weynaaday, oo dhibkeedu cuslaaday ayaa qaanteedu yaraatay! Saciidna wuxuu ku yiri: War ma Ciraaqi baad tahay? Oo uu ula jeeday ma waxaad ka tirsan tahay dugsiga

[35] Waxaa jira culumo aad u yar oo laga wariyo inay qabeen in ragga aan loo dileyn dumarka. Culumadaanna waxay daliishadaan oraah Cali bin Abii Daalib iyo rag kale midba mar loogu abtiriyo oo sheegaysa in ay yiraahdeen: Haddii nin dilo haweenay, oo reerka haweenaydu ay damcaan in looga qisaaso ninka wax ka dilay, waxaa laga rabaa inay bixiyaan kalabar magta ninka, waayo magta dumarku waxay le'egtahay kalabar tan ragga.

[36] Warqadda Camar bin Xisaam ka eeg: AD-Daar al-Qudhni, al-Jinaayaat, Baab Qatli Arrajul Bil-Mar'ati 8/28. Ibnu Xabbaan; Saxiix ibn Xabbaan, Asakaat (793) 3/75. al-Xaakim; al-Mustadrak 1/395.

[37] Muxamed al-Gasaali; Taraatunaa al-Fikrii Fii Miisaan Asharci Wal-Caqli (Mac-had al-Caalamii Lilfikri al-Islaami, Daar Ashuruuq, 1991) B.137

[38] Warqaddii Rasuulku (SCW) reer Yaman ugu dhiibay Camar bin Xasmi (RC) waxaa ku qornaa: Far walba oo faraha ka mid ah waxaa ka waajibaya toban geel ah. sidaa darteedna, culumada islaamku qaanta farta waxay ka dhigeen toban halaad, iyada oo aan farta loo eegin midda ay tahay, iyo qofka ay ka go'day lab iyo dhedig midkuu yahay.

Copyright © 2009 WardheerNews.com

ra'yiga ee Ciraaq ka jirey ee Abuu Xaniifa shiikha ka ahaa? Rabiica-na wuxuu yiri: Mayee waxaan ahay caalim wax hubsanaya ama jaahil wax baranaya !! Wuxuu yiri: wiilkii walaalkayow sidaan baa sunnadu tahay [39]!!
Saciid ma oggola in afarta farood ee dumarka lagu qiimeeyo afartan geel ah, waayo haddii sidaa la yeelo waxaa ka dhalanaysa in qaanta dumarka iyo tan raggu isle'ekaato, arrinkaasna caqliga Saciid iyo saaxiibadi ma qaadan karo. Sidaa darteedna waxaa la xukumay in saddexda farood ee dumarka lagu qiimeeyo 30 geel ah, afartooda faroodna 20 geel ah, caqligana quful weyn lagu qabbiro.

Laakiin run ahaantii, culumada baaray axaadiista sheegaysa in magta dumarku tahay kalabar magta raggu, waxay qabaan in uusan jirin hal xadiis oo saxiix ah oo arrinkaan ka hadlaya oo nebiga ka sugnaaday. Sidoo kale, doodda ku andacoonaysa in la isku raacay arrinkaani waa mid aan wax ka jirin, oo dhab ma aha in culumada islaamku isla oggolaadeen in magta dumarka laga dhigo kalabar tan ragga.

Laakiin si taa ka duwan, nebiga (SCW) waxaa ka sugnaaday inuu yiri: " Nafta waxaa ka waajibaya boqol geel ah[40]". nebiguna nafta ma kala soocin, ee wuxuu adeegsaday erayga naf, oo ay soo hoos galayso naf oo dhan, rag iyo dumar, muslim iyo gaal, xor iyo addoon, madow iyo caddaan,…iwm.

Haddaba, su'aasha loo baahan yahay in jawaab loo helaa waxay tahay: xukunka wadaaddada ee magta dumarku maxay ku salaysan tahay?

Marka mawduuca qumaati loogu fiirsado waxaa la ogaanayaa in xukunkaani uu ka duulayo duruufihii bulshadu ku sugnayd dunidii hore [= wixii ka horreeyey qaybtii dambe ee qarnigii 20-aad]. Bulshooyinkii hore shaqadu waa u qaybsanayd labka iyo dheddigga, oo labku waxay ku qaybsanaayeen shaqada ka baxsan guriga, dumarkuna waxay ku qaybsanaayeen shaqada laga qabto guriga dhexdiisa. Sidaa darteedna, ragga waxaa loo arki jirey inay iyagu yihiin kuwa nolosha qoysku ay ku tiirsan tahay, oo rootiga soo tabca. Arrinkaasina wuxuu dhaliyey in ragga laga sarraysiiyo dumarka. Waayo labadii walaalo ah midkii lacag leh baa weyn!!!
Fikradda sheegaysa in magta dumarku le'eg-tahay kalabar magta ragguna waxay ka curatay duruufihii dhaqan-dhaqaale ee bulshada islaamku la wadaagtay inta badan bulshada caalamka. Sidaa awgeedna, culumada islaamku marka ay rabaan inay dadka ku qanciyaan sababta magta dumarku ku noqotay kalabar tan ragga waxay ku andacoodaan:
" Qaandhawga maaliyadeed waa in lagu saleeyaa heerka uu le'eg yahay khasaaraha ka dhashay qofka la dilay ee qoyska ka baxay, shakina kuma jiro in khasaaraha ubadka ka soo gaaraya waayidda aabbahood oo ahaa kan kafaala-qaada noloshoodu ay ka weyn tahay khasaaraha dhinacaas ka soo gaaraya weynta hooyadood. Taa waxaa la mid ah haweenayda la dilo saygeeda iyo ninka la dilo afadiisa, oo musiibada qabsanaysa haweenayda

[39] Culumadu waxay yiraahdeen sunnada halkaan waxaa loola jeedaa dhaqankii reer Madiino, ee loolama jeedo sunnada nebiga ka sugnaatay.
[40] Waxaa la wariyey in Cabdi-Muddalib oo nebiga (SCW) awoow u ahaa, uu yahay ruuxii ugu horreeyey oo gooya in magta ruuxa la dilo laga dhigo bogol neef oo geel ah, caadadaasna kolkii danbe islaamku carabtuu ka qaatay

Copyright © 2009 WardheerNews.com

saygeeda la dilaa waa ka xun tahay kan afadiisa la dilay.[41]" Shiikh kalena wuxuu qoray: " Qawaaniinta aan maanta ku dhaqannaa magta waxay u yeeshay heer ugu sarreeya iyo heer ugu hooseeya, qaalligana waxaa loo oggolaaday inuu magta ku simo waxaan ka yarayn heerka ugu hooseeya aanna ka badnayn heerka ugu sarreeya, sidaana waxaa loo yeelay si fursad loogu helo in la qiimeeyo khasaaraha qoyska ka soo gaaray ruuxa laga dilay, waana kala duwan tahay [qiimaha magdhawga] dadka badankooda shaqeeya ee shaqada ku silca, ee sidee bay u kala duwanaan waayeen ruuxa shaqeeya ee qoyskiisa biila iyo kan aan shaqayn, isla markaana aan lagu kallifin inuu cid biilo, balse isaga qudhiisa la biilo.[42]"

Hees hawleedka geelleeyda Soomaalidu geela ugu heesaan marka la shubayana waxaa ka mid ah midda geel-jirudu hasha kula hadlayo ee uu ku leeyahay:

Geerida haween guud la firo iyo guursi laga qaad
Geeridaadana gaawe maran iyo gaajo laga qaad
Geeridaydana guri ba'ay iyo gablan laga qaad.

Run ahaantiina, caqliga culumada qabta in magta dumarku ay tahay kala bar tan raggu, kama duwana caqliga geel-jirahaas, waayo labaduba waxay ka ambaqaadayaan in waxtarka raggu uu ka badan yahay waxtarka dumarka. Guud ahaanna, fiqiga waxaa qoray rag, sidaa darteedna la yaab ma leh haddii uu u muuqdo mid ka hiillinaya dumarka, kana tarjumaya aragtida iyo mowqifka ragga.

Akhristow meelaha dhifka ah ee culumada islaamku magta dumarka ka sarraysiiyeen magta ragga waxaa ka mid ah markay ka hadlayaan qaanta laga bixinayo naasaha. Culumada badankoodu waxay qabaan in qaanta laga simayo naaska laga gooyo dumarku ay ka sarrayso tan laga simayo naaska laga gooyo ragga, waayo waxtarka naaska dumarku waa ka badan yahan kan naasaha ragga. Oo bilmatal, haddii ibta naasaha ragga lagu qiimeeyo shan halaad, ibta naasaha dumarka waxaa lagu qiimaynayaa toban halaad [haddii qaanta naasaha ragga lagu bixiyo bir iyo shilin Soomaalina, tan naasaha dumarka waxaa lagu bixinayaa dahab iyo dollar].

Ugu dambayntii, waxaa jirta su'aal ay habboon tahay in Soomaalidu maanta jawaab u hesho, waxayna tahay: **Ma bannaan tahay in magta dollar lagu bixiyaa**?
Qaran jabka iyo dowlad la'aanta Soomaaliya dhibaatooyinka ka dhashay waxaa ugu xanuun badan dilka micno la'aanta ah ee bulshada oo dhan saameeyey. Qayb badan oo bulshada ka mid ahina waxay rumaysan yihiin in arrimaha dilka dadka fududeeyey ay ka mid tahay doollarka gabdhaha iyo wiilashu dibedda ka soo xawilayaan. Waayadii hore wiilasha laandheerida isbidaa markay bootaynayaan waxay oran jireen: War wallaahi iyo billaahi intaan kugu tiriyo ayaa hadhow magtaada la taano-taanaynayaa!!! Waxaana la aamminsan yahay in dooddaasi doollarka ka hor ay u badnayd fulaybajin iyo bowdoqaawis. Hase ahaatee, wixii ka danbeeyey intii gabdhaha ducaysan ee bangaarida ahi ay dibedaha u yaaceen, waxaa yaraaday –ama

[41] Eeg: Saciid Ramadaan al-Buudhi; al-Mar'ah, B.21 iyo B.44
[42] Mustafaa Asubaaci; al-Mar'ah Beyna al-Fiqhi Wal-Qaanuun, B.39.

Copyright © 2009 WardheerNews.com

xataa dabargo joogta- caadadii ahayd in magta geel lagu bixiyo, waxaana beddelay in magta lagu bixiyo doollar dibedda laga soo qaaraamay. Arrinkaasina wiilasha dalka gudihiisa jooga wuxuu fursad u siiyey inay barbaarta ku shiish bartaan.
Waxaa xusid mudan, in aqoon-yahannada baara dhaqamada Carabtu ay qabaan in sababta keentay in magta geel lagu bixiyaa ay ahayd bixinta geela oo Carabta ku adkayd darteed, arrinkaas oo ragga ka hor-istaagi jirey inay ku dhiirradaan dilka. Shakina kuma jiro in Soomaalidu geel jacaylka Carabta kala mid tahay, sidaa awgeedna haddii la doonayo in la yareeyo dilka micno-darrada ah, waxaa habboon in la soo nooleeyo dhaqankii ahaa in magta geel lagu bixiyo, waayo Soomaalidu waa taqaan macnaha geela laakiin ma taqaan macnaha doollarka.[$ = xaashi gaaladu dadka ku duufsato].

T- **Rajminta Ruuxa Guursaday hadduu sineysto**:

Run ahaantii quraanka kariimku ma kala farqin xukunka lagu qaadayo doobka sinaysta/sinaysata iyo kan lagu qaadayo ruuxa guursaday hadduu sino ku dhaco. Xukunka sinada ee quraanku sheegayna waa mid qura, waana in qofka sinaysta lagu dhufto boqol jeedal, oo quraanku wuxuu leeyahay: " Saaniyadda iyo saaniga mid kasta ku dhufta boqol karbaash."[An-Nuur: 2].

Waxaa jirta dood sheegaysa in xadka rajmiga quraan ku soo degay, laakiin gadaal danbe laga tirtiray erayadii quraanka ee sheegayey in qofka guursaday markuu sinaysto dhagax lagu dilo, balse aan la nasakhin xukunkii aayadda ee waxa qura ee la nasakhay ay yihiin erayadii. Dooddaanna waxay ku qotontaa oraah la cuskiiyo Cumar bin Khaddaab (RC) oo sheegaysa inuu yiri: " Iska jira inaad ku halaagsantaa aayadda rajmiga, oo midkiin yiraahdo labo xad kuma aragno kitaabka Alle, waayo waxaan aragnay rasuulkii Alle oo rajmiyey gadaashiisna waan rajminay, Allaan ku dhaartaye haddaanan ka baqayn in dadku yiraahdaan Cumar kitaabka Alle ayuu wax ku kordhiyey musxafka waxaan ku qori lahaa, aayad aan akhrinay oo ahayd: " Shiikha iyo Shiikhaddu [= odayga iyo habartu] hadday sineystaan dhagxiya gabigoodaba[43]".

Sidoo kale, waxaa jira xadiis Caa'isho bint Abuukar (RC) afka loogu tiray, oo sheegaya in Caa'isho tiri: " Waxaa soo degtay aayadda rajmiga iyo tobanka nuugmo, waxayna ku qornayd warqad tiil sariirta gurigayga hoosteeda, kolkii rasuulku (SCW) xanuunsadayna waa ka mashquulnay, dabadeedna Ri' aan lahayn baa soo gashay oo cuntay.[44]"
Soomaalidu waxay isweydiiyeen su'aasha ah: War waayeel waa ayo? Jawaabtii ay heleenna waxay noqotay: Waa annaga oo aan isyeel-yeelayn. Haddaan la is-yeel-yeelaynna waa caddahay in quraan ari cunay oo aan musxafka ku ool, akhriskiisana muslimiinta loo diiday uusan ku habboonayn in loo daliishado si dad

[43] Eeg: Muwadha Maalik (al-Maktabah al-Cilmiyah, dabcadda 2-aad) B. 241. Waxaana xusid mudan in ay jiraan aayado kale oo lagu andacoodo in Cumar sheegay inay quraanka ka mid ahaayeen, waxaana ka mid ah aayadda la sheegay inay oranayso: " War aabbayaashiin ha diidina, waayo gaalnimay idinku tahay inaad aabbayaashiin diiddaan."
[44] Muxamed al-Gasaali; Taraatunaa al-Fikrii Fii Miisaan Asharci Wal-Caqli (Mac-had al-Caalamii Lilfikri al-Islaami, Daar Ashuruuq, 1991) B.147

Copyright © 2009 WardheerNews.com

madaxa dhardhaar loogala dhaco. Sheeko-xariirtuna waxay qurux badnaan lahayd, oo dad badan ka gadmi lahayd haddii la oran lahaa ariga hala ciribtiro, waayo arigu waa gaal Alle iyo Rasuulkaba ku kufriyey, waayo haddii uusan sidaa ahayn muxuu ugu dhiirraday inuu quraan cuno.

Dhanka kale, waxaa jira xaddiis laga wariyo nin la yiraahdo Camar bin Maymuun oo oranaya: " Sebenkii jaahiliyadda [= islaamka ka hor] waxaan arkay daanyeerad sinaysatay oo ay isugu soo urureen daanyeerro si ay u rajmiyaan, aniguna waa la rajmiyey.[45]" Farriinta sheekadu xanbaarsan tahayna waxa weeye in daanyeerradu muslimiinta uga horreeyeen fulinta xadka rajminta. si dadbanna muslimiinta waxaa loogu soo jeedinayaa canaan ah: war ma waxaad garan weydeen xilka daanyeerradu garteen !!.

Fuqahada qaarkoodna markay qeexayaan dhawridda [= al-Ixsaan] waxay yiraahdeen: waa inuu guur xalaal ah ugu galmooday muslimad/muslim xor ah. sida qeexidda laga garan karana ruuxa muslimka ah lama rajminayo hadduu sinaysto isaga oo guur xalaal ah ugu galmooday yuhuudiyad ama nasraaniyad xor ah, sidoo kalena la rajminmaayo hadduu u galmooday haweenay addoon ah. qof ahaanna, ma garan waxa ay ku kala duwan yihiin muslimadda xorta ah iyo yuhuudiyadda ama masiixiyadda xorta ahi, marka laga hadlayo dhawrsiga laga helo guurka.

Culumada qaba in dhagax lagu dilayo qofka guursaday hadduu sinaystana[46] waxaa ka hortimid dhibaato ah sida laga yeelayo addoonka guursaday hadduu sinaysto, waayo quraanku wuxuu sheegayaa in ciqaabta la marinayo addoonka sinaysta ay tahay kalabar tan la marinayo qofka xorta ah ee guurka arkay hadduu sinaysto, oo quraanku wuxuu leeyahay: " Haddii la dhawro [=ay guursadaan] oo ay xumo la yimaadaan [sinaystaan] korkooda waxaa ah kalabar ciqaabta la mariyo kuwa xorta ah." [An-Nisaa: 25]. Haddaba, su'aasha jawaabta u baahan waxay tahay sidee loo kalabarayaa geerida, oo addoonka sinaysta loogu ciqaabayaa geeri barkeed? Laakiin si ka duwan rajminta, jeedalku wuxuu aqbalayaa in la kala nuseeyo, oo qofka xorta ah lagu dhufto 100 jeedal, addoonkana 50 jeedal. Culumada ahlu sunnada oo aad mooddo in doodda kalabaridda rajmiga addoonku ay sas ku rideyna arrinka waxay ka dhigeen "miro barde canyayuubkaa lagu cunaa", waxayna la soo boodeen jawaab ah: addoonka sinaystaa ma mudanayo in la rajmiyo.
Run ahaantiina wareerka oo dhan waxaa keenay xadiis aaxaad ah oo sheegaya in doobka sinaysta lagu ciqaabo boqol jeedal iyo sannad la musaafuriyo, qofka guursadayna boqol jeedal iyo dhagax lagu dilo. Su'aalaha jawaabta u baahanna waxaa ka mid ah: xadiiska aaxaadku ma beddeli karaa macnaha cad ee aayadaha quraanka? Quraanka kariimka oo mar walba oo uu sinada soo qaado si cad u sheega inay fal xun tahayna sidee buu u seegay inuu kala saaro xukunka doobka iyo duqayda ee ku saabsan sinada?

Rajminta waxaa kaloo loo daliishadaa in rasuulku dad ku fuliyey ciqaabtaan, laakiin waxaa la isku khilaafay goorta rasuulku rajminta fuliyey, ma waxay ahayd intii ay soo

[45] Al-Bukhaari; Saxiix al-Bukhaari (Baab al-Manaaqib, Tir. 3560).
[46] Xadka rajminta muslimiintu iskuma waafaqsana, oo tusaale ahaan waxaa si buuxda u diiday Khawaarijta iyo Muctasilada.

Copyright © 2009 WardheerNews.com

degtay aayadda 2-aad ee suuradda An-Nuur ee sheegaysa ciqaabta sinada mise ka hor. Culumada qaba rajmintu waxay ku adkaysanayaan in nebigu dad dhagax ku dilay intay soo degtay suuraddaani, laakiin culumada diiday rajmintu waxay rumaysan yihiin in nebigu ciqaabta rajminta fuliyey ka hor intii aysan soo degin aayadda qeexaysa ciqaabta sinadu. Culumadaanna waxay la tahay in nebigu ciqaabta rajminta ah ee uu fuliyey uu ka qaatay sharcigii ay ku dhaqmi jireen yuhuuddii deganayd magaalada Madiino. Sida la og yahayna, culumada cilmiga usuulu fiqigu waa isku khilaafeen in sharcigii ummadihii naga horreeyey haddii aan islaamku la imaan wax sharcigaas ka duwan uu sharci noo noqonaya iyo in kale?

Laakiin dhanka kale, waxaa jira culumo aamminsan in rajmintu tahay sheeko-xariir nebiga (SCW) ka dib la allifey. Guud ahaanna, waxaa jira aqoon-yahanno qaba in xukunka dhagax ku dilidda saanigu uu yahay sharci muslimiintu ka soo dheegteen shareecada yahuudda, kana mid yahay waxyaabaha loogu yeero israa'iiliyaadka ee muslimiintu ka dhaxleen daalacashada diimihii hore, ama wadaaddadii yuhuudda ee soo islaamay ay diinta islaamka ku barxeen.

Shir fuqahada islaamku ay sannadkii 1972kii ku yeesheen magaalada Al-Beydaa ee dalka Liibiya waxaa fikrad sidii qunbulada u qaraxday ka jeediyey Shiikhii weynaa ee Muxamed Abuu Suhra. Abuu Suhra fuqahadii meesha ku kulmay wuxuu ku yiri sidatan:

" Waxaa jira ra'yi fiqi ah oo aan muddo labaatan sano ah qarsanayey, haddana waxaa la joogaa waqtigii aan sheegi lahaa ra'yigaas ka hor inta aanan Alle la kulmin, oo uusan I weydiin sababta aan cilmigaas u qariyey, oo aan dadka ugu sheegi waayey? Fikraddaasi waa mid ku saabsan xadka rajminta ruuxa guursaday hadduu sineysto. Ra'yigayguna wuxuu yahay in rajmigu ahaa sharci Yahuuddu lahaayeen, nebiguna bilowgii hore qiray, laakiin mar danbe lagu nasakhay xadka karbaashka ee lagu sheegay suuradda Al-Nuur, taana waxaan u hayaa saddex arrimood oo marag ah: ……[47]". Dabadeedna, wadaaddadii meesha isugu yimid waa buuqeen, badankooduna waxay ku celceliyeen doodda taqliiddiga ah ee ku qoran kutubta fiqiga. Shiikh Abuu Suhrana dhawr bilood ka dib ayuu xijaabtay. Waxaana la rumaysan yahay inay jiraan culumo badan oo Shiikha fikradda la wadaaga, laakiin soo bandhigidda mowqifkooda la suga goorta ajashoodu soo dhawaanayso, ama ajashooda ka dib.

Si taa la mid ah, fuqahada islaamka qaarkood waxay ku doodeen in isdheehiddii ay isdheeheen hiddaha yuhuudda iyo kan islaamka laga dhaxlay in hiddaha yuhuuddu uu qalafsanaantii lagu yaqiin kula galgasho hiddaha islaamka, jeer arrinku waji kale yeeshay oo loo qaatay in shareecada yuhuuddu ay ka fudayd iyo dhimrin badan tahay shareecada islaamka oo asal ahaan lagu yaqiin fudayd iyo dhimrin, xukunka riddaduna wuxuu tusaale u yahay saamaynta noocaas ah[48].

[47] Dhacdadaas waxaa ka faallooday shiikh Yuusuf al-Qardaawi.

[48] Tusaale ahaan eeg: Dhaha Jaabir al-Calwaani; Laa Ikraaha Fii Diin: Ishkaaliyat Arriddah Wal-Murtadiin Min Sadri al-Islaam Ilaa al-Yoom (al-Mac-had al-Fikri al-Islaamii al-Caalami Wa-Maktabat AShuruuq Addowliyah, al-Qaahira, 2006).

Copyright © 2009 WardheerNews.com

J- **Ka Bixidda Diinta**: saddexda qof ee xadiisku sheegayo in la dilo waxaa ka mid ah: "Ruuxa ka baxa diinta ee jamaacada ka taga". Fuqahada badankooduna qofkaan waxay ku sheegeen inuu yahay murtadka diinta ka noqda oo loo baahan yahay in la dilo, iyada oo dilkiisa xadiiskaan loo daliishanayo.
Laakiin dhab ahaantii, culumada oo dhammi iskuma waafaqsana in sidaas loo macneeyo xadiiska, oo waxaa jira culumada qaarkood oo weedha rasuulka ee oranaysa " Ruuxa ka baxa diinta ee jamaacada ka taga" ku fasiray in laga wado qofka fallaagada noqda ee dilka iyo dhaca geysta [= al-Muxaarib]. Culumada sidaas xadiiska u fasirayna waxaa ka mid ah Ibnu Teymiyah. Ibnu Teymiyana wuxuu dooddiisa daliil uga dhigtay inay jirto riwaayad kale oo xadiiskaan loo wariyey, oo sharraxaad dheeri ah ka bixinaya ulajeeddada xadiiska. Riwaayaddaasna waxaa laga wariyey afadii nebiga (SCW) ee Caa'isho binti Abuu Bakar (RC). Riwaayaddaasna Caa'isho waxay ku sheegtay in nebigu yiri: " Ma bannaana dhiigga ruux muslim ah oo qiraya in Alle mooyee uusan jirin Ilaah kale iyo in Muxamed yahay rasuulkii Eebbe, haddii aysan jirin saddex midkood: ruux sinaystay guur ka dib, oo isaga dhagax lagu dilayo, iyo nin baxay isaga oo la diriraya Alle iyo Rasuulkiisa, oo isaga la dilayo ama la daldalayo ama dhulka laga musaafurinayo, ama qof qof dilay oo loo dilayo.[49]" Ibnu Teymiyana wuxuu xadiiskaan ka qaatay in ruuxa dhiiggiisu bannaan yahay ee xadiisku sheegay in la dilo uu yahay " Ruuxa ka baxa diinta ee ka taga jamaacada", sifada jamaaco ka tagidduna ma yeelan karto macne aan ka ahayn fallaagoobidda [al-Muxaarib][50].
Sidaas oo kale, fuqadaha qaarkood waxay rumaysan yihiin in aayadda xiraabada ee oranaysa: " "Abaalka kuwa la dagaallama Eebbe iyo Rasuulkiisa oo dhulka la socda fasaad waa in la dilo ama la deldelo ama gacmaha iyo lugaha isdhaaf loo gooyo, ama dhulka laga musaafuriyo, taasina waa inay mudanyihiin dulli adduunka ah iyo cadaab weyn oo Aakhiro ah" [Al-Maa'idah: 33] ay "ku soo degtay kooxdii riddoobay sebenkii nebiga (SCW), ee geela dareersaday, ee dabadeed rasuulku amarka ku bixiyey in laga gooyo lugaha iyo gacmaha, indhahana laga rido[51]", taasoo looga gudayey denbiyadii badnaa ee isugu jirey riddada, shuftaynimada, dhaca, iyo dilka ee ay kula kaceen dadkii la jirey geelii sadaqada ahaa.

Sidaa darteedna, la yaab ma leh in fuqaho badan oo ay ka mid yihiin: Cali bin Abii Daalib, Ibnu Cabbaas, xasan, Caddaa, Abuu Xaniifa iyo saaxiibadi, Atowri, Ibnu Shubrumah, Ibnu Culayah … ay ku tagaan inaan la dilayn haweenayda riddowda, sababtana waxay ku sheegeen in sifada fallaagoobiddu aysan ku rumoobayn[52], waayo caadi ahaan fallaagonimadu waa fal ragga lagu yaqaan. Sida la og-yahayna gaalnimada qudheedu ma banaynayso in qofka dhiiggiisa la daadiyo, laakiin waxaa dhiigga qofka banneeya inuu muslimiinta la dagaallamo, oo isku dayo inuu diintooda ka fidneeyo.

[49] Ibnu Teymiyah (Axmed bin Cabdi-Xaliim bin Cabdi-Salaam); Asaarim al-Masluul Calaa Shaatim Arrasuul (Seydaa-Beyruut, al-Maktabah al-Casriyah,1990) B.319
[50] Isla isaga B.319.
[51] Abuu al-Waliid Ibnu Rushdi; Bidaayat al-Mujtahid Wanihaayat al-Muqtasid (Al-Qaahira, 1974) juska 2-aad, B.492 iyo 488.
[52] Al-Qurdhubi; al-Jaamic Li'axkaam al-Quraan, Juska 3-aad, B.48.

Copyright © 2009 WardheerNews.com

Waxaana mudan in la xasuusnaado in fuqahada islaamku marka ay allifayaan kutubta fiqiga islaamka ay mawduuca riddada [Baab Arridah] hoos galiyaan mawduuca ka ballaaran ee xiraabada [Kitaab Al-Xiraabah]. Arrinkaasina wuxuu tusinayaa in fuqahadu riddada u arkaan nooc shuftaynimada ka mid ah oo loogu yeeri karo magaca "Shuftaynimo maskaxeed/ al-Xiraaba al-Fikriyah".
Maadaama, Shuftayga jidka gooyaa uu adeegsado hub, wuxuu mutaysanayaa in loogu jawaabo hub la mid ah kan uu adeegsaday, laakiin si taa ka duwan shuftayga maskaxdu wuxuu ku hubaysan yahay fikrad, caqliguna wuxuu keenayaa inaan loogu jawaabin seef iyo dhagax, balse loogu jawaabo fikrad iyo xujo, waayo seeftu seef bay ka lib keeni kartaa, laakiin seeftu fikrad kama lib keeni karto.

Haddii si kale loo yiraahdo, xaddiiskaani wuxuu ka hadlayaa cidda diinta ka baxda, muslimiintana dagaal kala hortimaada [al-Muruuq Mina Diin Wamufaaraqat al-Jamaacah], ee sina uga hadli maayo ruux diinta ka baxay laakiin aan denbi kale geysan. Sida la og-yahayna ruuxa fallaagooba wuxuu mudan karaa in la dilo isaga oo aan loo eegayn gaal iyo muslim wuxuu yahay. Sidaa awgeedna, xadiiskaani ma noqon karo daliil loo adeegsado si murtadka loogu xukumo ciqaab dil ah.

Labo: Xadiiska labaadna wuxuu leeyahay: "Qofkii diintiisa beddela dila / Man baddala Diinahu faqtuluuh[53] "

Culumada islaamkuna markay xadiiskaan ka faalloonayaan dhinacyo badan bay wax iska waydiiyaan, waxaana ka mid ah[54]:
Diinta la baddalayaa ma islaamka ayay ku kooban tahay mise waxaa soo hoos galaya diimaha oo dhan[55], oo qof kasta oo diin ka baxa ayaa xadiisku ku rumoobayaa, tusaale ahaan qofka ka baxa diimaha kale oo islaama, ama qofka ka baxa yahuudiyada oo kirishtaan noqda, ama ka baxa kirishtaanka oo buudi noqda,…iwm.
Sidoo kale, diin ka bixidda ma dadka oo dhan baa soo hoos galaya lab iyo dheddigba, oo dumarka riddooba waxaa loo dilayaa sida ragga riddooba oo kale, mise arrinku wuxuu ku gaar yahay ragga oo dumarka riddooba la taaban maayo?
Murtadkana ma isla markii baa la dilayaa mise waa la toobad weydiinayaa?
Toobadduse ma waqti go'an bay leedahay mise waqti ma laha oo weligi waa la toobad weydiinayaa?

Fuqahada mad-habta Xanafigu waxay qabaan in haweenayda riddowda aan la dilayn, waxayna daliishadeen xadiis nebiga (SCW) laga wariyo oo diidaya dilka haweenka. Xadiiskaasi wuxuu sheegayaa in nebigu arkay haweenay la dilay, uuna yiri: " Tani

[53] Al-Bukhaari, kitaab al-jihaad wa-siyar, xadiiska tirsigiisu yahay: 2794 iyo towbad weydiinta murtadka tir.6411, At-Tarmadi, kitaab al-Xuduud, Tir.1378, An-Nasaa'I, Kitaab Taxriim Addam, Tir.3995, Abuu Daa'uud, Kitaab al-Xuduud, Tir.3787, Ibnu Maajah, Kitaab al-Xuduud, Tir:2526, Axmed, Musnad banii Haashim, Tir:1775

[54] Tusaale ahaan, fiiri: Maxmuud Shaltuut; al-Islaam Caqiidah Wa-Shariicah, (al-Qaahira, Daar Ashuruuq, 1997), B.281,

[55] Culumada qaba in diinta la baddalayaa ay ku kooban tahay islaamka waxay yiraahdeen: gaalnimadu waa diin qura, oo haddii Yuhuudigu Kirishtaan noqdo kama harayso sifada gaalnimadu, sidoo kale haddii ruux cawaan ahi uu Yuhuudi noqdo kama harayso gaalnimadu. Taa awgeedna, diinta beddeliddeeda dadka loo dilayaa waa islaamka. Waxayna daliishadaan aayadda oranaysa: " Diintu Eebbe agtiisa waa islaamka" [Aali-Cimraan: 19].

Copyright © 2009 WardheerNews.com

ma dagaallamayn". Culumada qaarkoodna waxay ku tageen in xadiiskaas laga qaadanayo in murtadka axaadiistu sheegayso dilkiisu uu yahay kan dagaallamaya, sababta loo dilayaana ay tahay dagaalka ee aysan ahayn riddada[56]. Sida la og yahayna dunidii hore diinta iyo dowladdu waa isku xirnaayeen, oo diintu waxay ka tarjumeysey dhalashada qofka. Waayadaas oo loo dagaallami jirey gaalo iyo islaamna, qofku mar walba wuxuu ku khasbanaa inuu ka soo jeesto dhinaca qolada ay isku diinta yihiin. Sidaa awgeedna murtadka waxaa loo arki jirey inuu xoojinayo cududda milatari ee cadowga islaamka.

Sidoo kale, waxaa suurogal ah in la yiraahdo: murtadka riddada darteed loo dilay wuxuu ahaa Carabka oo qura, waayo dhulka carabta looma oggolayn diin aan islaam ahayn[57]. Sababta sidaa loo yeelayna ma ahayn mid diineed balse waxay ahayd mid siyaasadeed, maxaa yeelay dhulka carabta [Jasiiradda Carabta] waxaa loo arkayey inuu yahay dhul muslimiinta u gaar ah, oo meel walba oo ay joogaanba ay ku soo hirtaan, soona nabad galaan[58].

Sida la og yahayna waxaa jira axaadiis muslimiinta ka reebi jirey inay degaan meel aan ahayn dhulka islaamka. Axaadiistaasna waxaa ka mid ah midka nebigu (SCW) ku leeyahay: " Anigu beri baan ka ahay muslim kasta oo mushrikiinta dhex daga, waa inaan dabkoodu isu muuqan.[59]". Xadiiskaan oo sanadkiisu uusan xoog badnaynna culumada sharraxay qaarkood waxay yiraahdeen wuxuu ka mid yahay nusuusta leh duruufta gaarka ah ee ay ka hadlayso, nebiguna wuxuu leeyahay: Beri baan ka ahay dhiigga muslimka dhex dega gaalada ay muslimiinta dagaallamayaan, haddii muslimiintu inta ku khaldamaan gaal ahaan u dilaan, sababta oo ah isaga ayaa naftiisa dil u bandhigay ka dib markuu dhex degay gaalada la dagaallamaya dawladda islaamka. Laakiin haddii duruufuhu isbeddelaan, ee uu istaago dagaalka u dhexeeya muslimiinta iyo gaaladu, muslimku waa la degi karaa gaalada. Sidaa darteedna, xadiisku wuxuu ka tarjumayaa duruufihii lagu dagaallami jirey diinta, loona qaybsanaa guri dagaal [= Daar al-Xarbi] iyo guri islaam [=Daar al-Islaam]. Culumaduna waxay qabaan in haddii ay isbeddelaan duruufihii laga yiri nasku [= aayadda iyo xadiisku] uu isna isbeddelayo xukunkii lagu saleeyey naskaas. Waayo xukunku wuxuu ku xiran yahay cilladii markii hore keentay. Oo bilmatal haddii uu istaago dagaalkii ummaduhu diriri jireen iyaga oo u qaybsan qaab diineed – sida maanta xaalku yahay- muslimku wuxuu xaq u yeelanayaa inuu dego dhulka gaalada.

Si taa la mid ah, bilowgii islaamka muslim kasta waxaa waajib ku ahaa inuu ka hijroodo dhulka gaalada, si uu ugu biiro rasuulka iyo saxaabadii joogay magaalada Madiino. Danta laga lahaa arrinkaasina waxay ahay in muslimiintu bartaan diinta

[56] Dhaha Jaabir Al-Calwaani; Laa Ikraaha fii Diin, B. , Cabdi-Mutacaal Asaciidii; Al-Xurriyaha Addiiniya Fii Al-Islaam, B.37.

[57] Waxaa jira xadiis nebiga laga wariyo oo oranaya: " Dhulka Carabta ama Xijaas labo diin kuma kulmaan". Xilligii uu socday dagaalkii 2-aad ee gacankuna xadiiskaan waxaa aad u daliishaday wadaaddadii diiddanaa in ciidamo aan muslim ahayn la keeno Jasiiradda Carabta. Wadaaddadaasna waxaa ka mid ah Shiikh Usaama Bilaadin.

[58] Isla isaga B.37 fikraddaani waxay caqli gal ahayd waagii diinta qofku ahayd waddankiisa.

[59] Abuu Daa'uud, kitaab al-Jihaad (1645), At-Tarmadi, Asiyar (1604).

Copyright © 2009 WardheerNews.com

islaamka -oo ay adkayd inay meel kale ka bartaan- iyo inay xoojiyaan cududda ciidanka islaamka. Laakiin kolkii muslimiintu furteen magaalada Maka waxaa meesha ka baxay baahidii loo qabay in Madiino loo hijroodo, sidaa awgeedna nebigu (SCW) wuxuu yiri: "Furashada [Mako] ka dib ma jirto hijro, laakiin waxaa jira jihaad iyo niyad.[60]"

Teeda kale, fuqahada islaamku waa isku khilaafeen masalada ku saabsan in dadka aan muslimka ahayn loo oggol-yahay inay masaajidda galaan iyo in kale. Khilaafkuna wuxuu ka dhashay hadba sida loo fahmo aayadda 28-aad ee suuradda Atowba ee oranaysa: " Kuwa rumeeyow mushrikiintu waa nijaas ee yeyna masaajidka xurmaysan u dhawaanin sannadkaan ka dib …." Aayadduna waxay soo degtey sannad ka dib markii muslimiintu Maka furteen. Waqtigaas oo nebigu (SCW) dadaal ugu jirey sidii dhulka jasiiradda carabtu u noqon lahaa dhul muslimiinta u gaar ah, oo looga horistaagi lahaa in diimo kale kula tartamaan. In mushrikiinta kacbada loo diidaana waxay ifafaale iyo hordhac u ahayd qorshe loogu diiday inay ku noolaadaan deegaankaas haddii aysan qaadan diinta islaamka. Sidaa darteedna, culumada qaarkood waxay qabaan in go'aanka aayaddu faraysaa uu yahay go'aan siyaasadeed oo barax la.

Abuu xaniifa oo aayadda sidaa u fahmeyna wuxuu yiri: aayaddu waxay ku dabaqmaysaa gaalada muslimiita la dagaallamaya, haddii aysan ku imaan magangalyo loo fidiyey darteed. Wuxuu kaloo sheegay in aayaddu mushrikiinta ka horistaagayso inay kacbada ka qabtaan xilalkii ay ka qaban jireen furashadii Maka ka hor. Sidoo kale Abuu Xaniifa waxaa laga wariyey inuu yiri: diidmadu waxay khusaysaa mushrikiinta iyo cawaanta, laakiin ma khusayso ahlu-kitaabka [= yuhuudda iyo kirishtaanka]. Maalik bin Anas-na wuxuu shardi ka dhigay in baahiyi jirto, oo haddii gaaladu masjidka dan awgeed u soo galayaan waa u bannaantay, haddii kalese uma bannaana. Baahidana wuxuu mitaal uga dhigay inay garsoor darti u yimaadaan. Shaaficina wuxuu sheegay in diidmadu ku kooban tahay kacbada, oo gaaladu ay geli karaan masaajidda kale, balse sida Maalik isaguna wuxuu shardi ka dhigay inay gelidda masjidka baahi u qabaan, oo dani uga xiran tahay. Shiicadu iyagu arrinka waa ka badbadiyeen oo waxay yiraahdeen[61]: gaalku noocuu doono ha noqdee looma oggola inuu galo kacbada iyo guud ahaan masaajidda, iyo xataa dhammaan xurumaha diinta ee muslimiintu leeyihiin.

Dhinaca kale, Shiikh Yuusuuf al-Qardaawi oo daliishanaya riwaayadda sheegaysa in Cumar bin Khaddaab (RC) uu qabay in murtadka aan la dilin balse la xiro, xadiiskaan wuxuu ku fasiray si waafaqsan mowqifka Cumar wuxuuna yiri: Nebigu (SCW) markuu yiri: "Dila ruuxii diintiisa beddela" wuxuu hadlay isaga oo ah imaamka ummadda, iyo madaxweynaha dowladda, taa oo macneheedu yahay in go'aankaani uu ka mid yahay go'aannada hey'adda fulinta iyo hawl ka mid ah hawlaha siyaasadda sharciga, ee ma ahayn fatwo iyo farriin ka timid xag Alle, oo loo baahan yahay in ummaddu fuliso seben walba iyo meel kasta oo la joogo. Sidaa darteedna, dilka murtadka iyo cid kasta oo diinteeda

[60] Waxaa isla wariyey Bukhaari iyo Muslim.
[61] Waxaa xusid mudan in shiicadu aysan mad-hab qura ahayn ee sida sunnada oo kale ay leeyihiin kooxo dhinacyo badan ku kala aragti duwan.

Copyright © 2009 WardheerNews.com

beddesha waa xaq imaamku leeyahay, waxayna ka mid tahay shaqada isaga u gaarka, oo haddii uu amro in la dilo waa la fulinayaa, haddii kalena waa la iska daynayaa[62].

Dhanka kale, dhammaan axaadiista ka hadasha dilka murtadku waa axaadiis aaxaad ah [keli wariye/ aan mutawaatir ahayn][63], sida la og yahayna waxaa jira culumo badan oo qaba in axaadiista aaxaadku aysan ku habboonayn in loo daliishado fulinta xadka, sababta oo ah axaadiista aaxaadku ma tusiso aqoon si buuxda loogu kalsoonaan karo. Marar badanna waxaan aragnaa culumada islaamka oo diidaya xadiis aaxaad ah iyaga oo siyaabo kala duwan ku cilaynaya. Tusaale ahaan, culumada qaarkood waxay yiraahdeen haddii xadiiska aaxaadku ka horyimaado hab dhaqankii dadkii ku noolaa magaalada Madiino lama qaadan karo, maxaa yeelay xadiiska aaxaadku wuxuu faa'iideynayaa male, laakiin dhaqanka reer Madiino wuxuu faa'iidaynayaa xog lagu kalsoonaan karo, waayo waxay soo gaareen saxaabada iyo dadkii kale ee aqoonta fiican u lahaa diinta islaamka[64]. Sidoo kale, culumada qaarkood waa diidaan xadiiska aaxaadka haddii uu ka horyimaado qaacido guud ama qiyaaska [waxa lagu garto garaadka diinta kaashada]..

Isku soo duuboo, ma jiraan axaadiis nebiga (SCW) ka sugnaaday oo si lagu kalsoonaan karo oo qeexan u sheegaya in riddada oo qura lagu mutaysanayo ciqaab dil ah.

7- Maxaa Ka Run Ah In Culumada Islaamku Isku Raaceen Dilka Murtadka?

Waxaa marar badan lagu andacoodaa in culumada islaamku isku raaceen dilka murtadka, haddaba maxaa ka jira kulanka culumada ee la sheegayo?[65]
Culumada islaamku iskuma waafaqsana waxa loola jeeda eraybixinta "kulan ama al-ijmaac/ consensus", oo siyaabo kala duwan ayay u macneeyeen. Tusaale ahaanna, culumada qaarkood waxay yiraahdeen kulanku waa wixii ay isku raaceen asxaabtii nebigu (SCW)[66], qaar kalena waxay ku tageen in kulanku yahay wixii ay isku waafaqeen reer Madiino sebenkii khulufaa'u raashidiinta, qolo saddexdaana waxay ku tageen in kulanku yahay wixii ay isku raacaan waxgaradka dunida islaamka oo

[62] Yuusuf al-Qardaawi; Malaamix al-Mujtamac al-Muslim (Beyruut, Mu'asasat Arrisaalah, 1996) B.37.

[63] Xadiiska Mutawaatirka waxaa lagu qeexaa inuu yahay xadiiska ay wariyeen dad badan oo ay adagtahay in dhammaantood ay been isku raacaan. Xadiiska mutawaatirikana xagga xoogga waxaa ku xiga xadiiska Mash-huurka ah [= caanka ah] waxaana lagu qeexaa inuu yahay xadiis aan mutawaatir ahayn laakiin bulshadu si weyn u aqbashay uguna dhaqantay. Xadiiska Aaxaadkuna waa midka ay wariyaan qof ama labo ama saddex, wuxuuna faa'iideeyaa male.

[64] Culumada sidaas qabaa waxay u badan yihiin culumada mad-habta Maalikiyada. Imaam Maalikna waxaa laga wariyey inuu oran jirey: " Haddii reer Madiino arrin ku kulmaan, cidda khilaafta lama qiimeeyo."

[65] Culumada taageera fikradda kulanku waxay daliishadaan xadiis nebiga (SCW) laga wariyo oo oranaya: " Ummaddaydu khalad iskuma raacdo". Fuqahada qaarkoodna waxay ku tageen in ruuxa khilaafa kulanku uu gaaloobayo. Run ahaantiisa, dooddaasi waa mid laga badbadiyey, oo runta ka fog.

[66] Culumada fikraddaan qaba waxaa ka mid ah fuqahada mad-habta Daahiriyada oo uu ugu horreeyo Ibnu Xasmi oo ah shiikha mad-habta.

Copyright © 2009 WardheerNews.com

dhammi, qolo afraadna waxay la tahay in wax kulan la yiraahdaa uusan weligi dhicin, hadda ka dibna aan loo fadhin inuu dhaco[67].

Guud ahaanna, waxyaabaha la oran karo culumadu waa isku raaceen waa kuwo aad u kooban sida; waajibnimada shanta salaadood ee muslimku maalin walba tukado, sakada, soonka, xajka, xaaraannimada khamriga, sinada, …iwm. Laakiin wixii intaa ka soo hara waxaa ka taagan muran iyo dood u dhaxaysa dugsiyada fiqiga ee kala duwan. Imaam Axmed bin Xanbal-na waxaa laga hayaa inuu yiri: " Ruuxii kulan sheegaa been buu sheegay, waxaa dhici kara in dadku iskhilaafeen, … haddaad maqashaan iyaga oo leh waa la isku raacay, tuhun ka qaba ..[68]" Imaam Shaaficina wuxuu yiri: "Oran maayo, culumadana kuma jiro mid qura [oo oranaya]: kan waa la isku raacay, wax aan ka ahayn waxa caalim kasta oo aad la kulantaa uu sidaa u arko, kana wariyo kuwii isaga ka horreeyey, sida in salaadda duhurku ay tahay afar rakcadood, iyo xaaraamaynta khamrada, iyo wixii sidaa la mid ah …[69]" Ibnu Taymiyana isaga oo ka faalloonaya mawduucaan wuxuu yiri: " In badan baa lagu andacoodaa in lagu kulmay xukun ka mid ah axkaamta, laakiin dhab ahaantii taasi waxa qura ee ay muujinaysaa waa inaan la ogayn cid qabta fikrad taa ka duwan[70]".
Arrimaha muujinaya dhibka culumada islaamku kala kulmeen inay diinta ka helaan wax daliil ah oo muujinaya xujonimada ijmaacana waxaa ka mid ah qisadaan la sheegay inay qabsatay Imaam Shaafici[71]:
Waxaa la wariyey in Imaam Shaafici la weydiiyey inuu keeno daliil quraanka ka mid ah oo tusinaya xujonimada kulanka. Dabadeed, Imaam Shaafici wuxuu quraanka akhriyey saddex boqol oo jeer, wuxuuna ka soo helay aayadda oranaysa: " Ruuxii khilaafa Rasuulka ka dib intuu u caddaaday hanuunku oo raaca jidka muuminiinta midaan ahayn, waxaan uga wali yeelaynaa wuxuu ka wali yeeshay, waxaana galinaynaa jahannamo iyadaana u xun meel loo ahaado." [An-Nisaa: 115]. Waana muuqataa in aayaddu aysan tusinayn in kulanku xujo yahay.

Run ahaantiina, taariikhda islaamka oo dhan fuqahada islaamku waa ku kala aragti duwanaayeen mawduuca riddada, siyaabo kala geddisanna waa u macneeyeen, mar walbana waxaa jirey culumo diiddan xadka riddada. Tusaale ahaan Imaam Ibraahiim An-Nakhaci [dhintay 95/713] oo lagu tilmaamay inuu yahay kan fiqiga reer Ciraaq uu ka farcamay iyo Sufyaan Al-Towri [dhintay 161/772] oo ahaa shiikh caan ku ah cilmiga xadiiska, ilaa heer lagu magacaabay naanaysta ah "amiir al-mu'miniin fil-xadiis", cilmiga xadiiskana ka qoray labo kitaab oo caan ah, magcaantooduna kala yihiin: "al-jaamic al-kabiir" iyo "al-jaamic al-saqiir", labaduba waxay qabeen in

[67] Culumada diiday fikradda ijmaaca waxaa ka mid ah muctasilada iyo Khawaarijta. Guud ahaan, doodaha ku saabsan mawduuca kulanka ka eeg buugta [= kutubta] Usuulu Fiqiga. Sidoo kale eeg: Mohammad Omar Farooq; The Doctrine of Ijma: Is there a consensus? (June 2006, available online).
[68]
[69] Shaafici, Risaalah ( ), B.
[70] Ibnu Taymiyah; Rafci al-Malaam Can al-A'imat al-Aclaam.
[71] Fakhru-Diin Muxamed bin Cumar Arraasi; Manaaqib Ashaaficii (Taxqiiq: Axmed Xijaasi Asaqaa,Beyruut, Daar Al-Jabal, 1993) B.145

Copyright © 2009 WardheerNews.com

ruuxa riddooba la toobad weydiinayo inta rajo laga qabo inuu toobad keeno[72]. Al-Towrina ka dib markuu soo guuriyey fikradda An-Nakhaci wuxuu yiri: " Kani [= ra'yigaan] waa midka aan qaadanayno[73]." Haddii si kale loo yiraahdo labadaan shiikh waxay qabaan in murtadka abidkiis la toobad weydiinayo jeer uu ka dhinto. Shamsu-Diin Al-Sarakhsi [dhintay 389 ee Hijrada] oo ka mid ahaa fuqahada ugu waaweyn mad-habta Xanafiguna si dadban buu shaki uga muujiyey jiritaanka xadka riddada. Al-Sarakhsi wuxuu muujiyey in riddadu aysan lahayn ciqaab go'an ama xad, abaalmarinta murtadkana loo dib dhigay in Alle kula xisaabtamo maalinta qiyaame, wuxuuna daliishaday in ciqaabta murtadka la laalo haddii murtadku toobad keeno. Sida la og yahayna fulinta xadka toobadi ma joojiso, siiba haddii arrinka xadku uu gaaro xafiisyada dowladda. Al-Sarakhsina dooddiisa wuxuu u dhigay sidatan:
" Waxa ciqaabta mudani kuma joogsadaan toobad sida xuduudda. Oo haddii iimaamku ogaado xadka toobaddu ma hor-istaagayso fulinta xadka, oo xadka jid gooyadu kuma joogsado toobad, balse waxaa loo baahan yahay toobad iyo maalkii oo la soo celiyo ka hor inta aan iimaamku [madaxdu] gacanta ku dhigin. … diin beddelidda iyo gaalnimada asalka ahiba waa denbi weyn laakiin wuxuu ka dhaxeeyaa addoonka iyo rabbigi, abaal-marinteedana waxaa loo dib dhigay daarta la isku abaal-mariyo [Faljasaa'u calayhaa mu'akharun ilaa daar al-jasaa], ciqaabaha dunida lagu fuliyaana waa kuwo looga dan leeyahay in lagu ilaaliyo danta addoomada [bulshada] sida qisaaska oo lagu ilaaliyo nafta, iyo xadka sinada oo lagu ilaaliyo nasabka, iyo xadka xatooyada oo lagu ilaaliyo hantida, iyo xadka qadafka oo lagu ilaaliyo sharafta [= al-Cirdi], iyo xadka khamriga oo lagu ilaaliyo caqliga, …[74]"

Abuu Waliid Al-Baaji [dhintay 474 ee hijrada] oo ka mid ahaa fuqahada waaweyn ee mad-habta Maalikiyada isaguna wuxuu ku dooday in riddadu tahay denbi aan xad go'an lahayn, laakiin qofka lagu eedeeyo wuxuu galabsan karaa in lagu fuliyo ciqaab ah tacsiir ama edbin. Wuxuuna yiri: "Waa macsi uusan la xiriirin xad iyo xaq bani'aadam sida macaasida kale[75]".

Sidoo kale, dadka diiday xadka riddada waxaa ka mid ah Imaam Maxamuud Shaltuut [1893-1963] oo ahaa madaxa jaamacadda Al-As-har, wuxuuna daliishaday in quraanku uusan sheegin wax ka badan in murtadka camalkiisu hoobanayo iyo inuu aakhiro naarta ku waarayo. Sidoo kale wuxuu qabaa in axaadiista nebigu aysan murtadka siin xukun cad oo la isla oggol-yahay[76].

Cabdi-Raxmaan al-Jasiiri-na buuggiisa "Al-Fiqhi Calaa al-Madaahib al-Arbaca" wuxuu ku yiri: xadka fuqahada islaamku isku raaceen "waa saddex qura:

[72] Ibnu Taymiyah; al-Saarim al-Masluul Calaa Shaatim al-Rasuul (al-Maktabah al-Casriyah, Beyruut, Lubnaan,1990) B.321
[73] Cabdi-Rasaaq Ibn Humaam Assancaani; al-Musanaf (Juska 10-aad, B.166).
[74] Shamsu-Diin al-Sarakhsi; al-Mabsuudh (Daar al-Macrifa, Beyruut, Lubnaan) juska 10-aad, B,152.
[75] Suleymaan bin Khalaf Al-Baajii ; al-Muntaqaa Sharxi al-Muwada (al-Qaahira, 1332 ee hijrada) juska 5-aad, B.282
[76] Maxamuuud Shaltuut; al-Islaam Caqiidah Wa-Shariica, B.280-281

Copyright © 2009 WardheerNews.com

xatooyada, sinada iyo aflagaaddada [xad al-qadaf]". Sidoo kale qoraaga reer Masar ee Maxamed Saliim al-Cawaa isaguna wuxuu qabaa in uusan jirin xad ay tahay in lagu fuliyo murtadka, balse waxay la tahay in madaxda dowladda islaamku xaq u leeyihiin in ay murtadka ku fuliyaan hadba ciqaabta ay u arkaan inay ku habboon tahay, haddii si kale loo yiraahdo al-Cawaa wuxuu qabaa in riddadu aysan xad mudnayn laakiin ay mudan tahay tacsiir ama edbin[77].

Dhanka kale, sannadkii 2002 Golaha Baaritaannada [Majmac Al-Buxuuth] ee Jaamacadda As-har waxay soo saareen fatwo ay ku diideen xadka riddada iyo dilka murtadka, waxayna yiraahdaan murtadka waa la toobad weydiinayaa oo keliya.

Dadka qaba in murtadka aan la dilayn, balse la toobad weydiinayaana waxyaabaha ay daliishadaan waxaa ka mid ah qisadaan laga wariyo Cumar bin Khadaab (RC): Saxaabigii Anas bin Maalik (RC) wuxuu yiri: "Abuu Muusa al-Ashcari wuxuu dilay Xujeyna beenaale iyo saaxiibadi, dabadeedna waxaan u imid Cumar bin Khadaab, wuxuuna I weydiiyey su'aasha ah: Maxay faleen Xujeyna iyo saaxiibadi? Dabadeedna saddex goor baan iska dhego tiray su'aasha, laakiin markii danbe waxaan ku iri: Amiiru Muuminiinow: Ma waxay mudnaayeen waxaan dil ahayn? Cumarna wuxuu yiri: haddii la ii keeni lahaa islaamka ayaan u soo bandhigi lahaa, hadday toobad keenaanna waa arki lahaa, haddii kalena waa xiri lahaa[78]."
Cumar bin Cabdi-Casiis oo muslimiinta badankoodu u arkaan inuu ahaa khaliifkii shanaad ee muslimiintu yeeshaanna waxaa laga wariyey inuu qabay inaan murtadka la dilin, waxaana laga wariyaa dhacdadaan: " Waxaa soo islaamay qolo, dabadeedna muddo yar ka dib ayay diinta ka noqdeen, Maymuun bin Mahraan – oo ahaa guddoomiyaha gobolka arrinku ka dhacayna- wuxuu warqad u soo diray Cumar bin Cabdi-Casiis, Cumarna wuxuu ugu jawaabay: mar kale jisyo [gibir] ku waajibi, farahana ka qaad.[79]"

Dhanka kale, waxaa jira culumo uu ka mid yahay Cabdi-Mutacaal Asaciidii, oo iyagu qaba in murtadku uusan mudnayn dil iyo toobad weydiin toonna, arrinkiisana faraha looga qaadayo Allaha uumay oo maalinta qiyaamaha kula xisaabtamaya.

8- Siirada Nebiga iyo Riddada:

Siirada nebiga (SCW) waxaa ku jira dhacdooyin badan oo ku saabsan dad riddoobay intii nebigu noolaa. Dadkaasina waxay isugu jireen qaar nebigu diley iyo qaar uusan dilin. Kolka qummaati loogu kuurgalo xaaladahaasna waxaa caddaanaya inuu jiro

[77] Maxamed Saliim al-Cawaa; Fii Usuul Annidaam al-Jinaa'ii al-Islaami: Daraasa Muqaarinah (al-Qaahira, Daar al-Macaarif, 1978) BB.141-158. sidoo kale isla qoraagaan fiiri: Cuquubat Arriddah Tacsiiran Laa Xaddan (waa daraaso lagu faafiyey mareegta IslamOnline.net, waxaana loo rogay af-ingiriis, run ahaantiisa qoraalkaani waa isla qaybta riddada ku saaban ee buugga oo dib loo daabacay ka dib marka magac cusub la siiyey).
[78] Cabdi-Mutacaal Asaciidii; Al-Xurriyaha Addiiniyah, B.36
[79] Cabdi-Rasaaq ibn Humaam Asancaani; Musanaf Cabdi-Rasaaq (Vol.10, B.171).

Copyright © 2009 WardheerNews.com

farqi u dhaxeeya xaaladaha nebigu diley murtadka iyo xaaladaha uu iska daayey. Nebigu marna riddo keliya qof uma dilin, laakiin ruux kasta oo xilligii nebiga riddo loo diley waxaa jira fal denbiyeed kale oo riddada weheliyey, sababta dilka keentayna ma aha riddada balse waa fal denbiyeedka weheliya riddada. Haddaba, si arrinku noogu caddaado waxaa habboon inaan xusno dhawr ka mid ah dhacdooyinka caanka ah ee lagu xusay siirada nebiga ee loo daliishaday dilka murtadka[80].

1- **Ibnu Abii Sarxi**: ninkaan la yiraahdo Ibnu Abii Sarxi oo ay xagga hooyada walaalo ka ahaayeen khaliifkii 3-aad ee Cusmaan bin Cafaan, waxaa la wariyey inuu ka mid ahaa raggii waxyiga qori jirey, laakiin goor danbe ayuu inta riddoobay wuxuu ku noqday Maka, oo xilligaas xarun u ahayd mushrikiintii Qureesh. Nebiguna wuxuu amar ku bixiyey in la dilo, laakiin waxaa magangalyo u fidiyey Cusmaan bin Cafaan (RC). Run ahaantiina, sababta nebigu u doonayey inuu ninkaan u dilaa ma ahayn inuu riddoobay, balse waxay ahayd inuu canbaarayn badan nebiga u geystay. Tusaale ahaanna, waxaa la wariyey inuu oran jirey Muxamad wuxuu iga rumaystaa sixidda aan ku sameeyo quraanka, suurogalna ma ah in bani'aadam saxo waxyi xag Alle ka yimid. Wuxuu kaloo oran jirey: "Maxamed ma oga waxaan ahayn wixii aan u sheegay."

Guud ahaanna, culumada islaamku waxay qabaan in xadka aan loo shafaaco qaadi karin, qisaduna waxay sheegaysaa in Cusmaan u shafaaco qaaday ninkaan, arrinkaasna culumadu waxay u daliishadeen in sababta nebigu u doonayey inuu u dilo ninkaani aysan ahayn sabab la xiriirta mawduuca riddada. Waxaana xusid mudan in Ibnu Abii Sarxi uu seben danbe xilal ka qabtay dowladdii uu madaxda ka ahaa Cusmaan bin Cafaan (RC).

2- **Cukal iyo Curayna**: dhacdadaan ku caanbaxday magaca "Cukal iyo Curayna", waxay u dhacday sidatan: Waxaa magaalada Madiino yimid niman u kala dhashay labo beelood oo la kala yiraahdo Cukal iyo Curayna oo soo islaamay. Nimankaani markii ay muddo gaaban magaalada joogeen ayaa nebigu wuxuu maqlay iyagoo xanuun ka sheeganaya [waa dal-tabyoodeen]. Nebiguna wuxuu kula taliyey inay aadan meel lagu hayey geel nebigu lahaa [dowladdu lahayd], ayna cabbaan caanaha iyo habeedda geela. Nimankiina sidii bay yeeleen, laakiin kolkii ay caafimaadeen waxay dileen ninkii geela jirey, geeliina waa dhaceen. Nebiguna markii uu shilka maqlay wuxuu ka daba diray ciidan raacdo ah. Markii nebiga loo keenayna wuxuu amar ku bixiyey in gacmaha iyo lugaha laga jaro, indhahana laga rido, dabadeedna waxaa la waray qorraxda jeer ay ka dhinteen. Si kastaba ha ahaatee, culumada islaamka badankoodu waxay qabaan in sababta loo dilay nimankaani aysan ahayn inay gaaloobeen darteed, balse ay tahay denbiyo badan oo ay galeen, sida dil iyo dhac. Tusaale ahaanna, Ibnu Taymiyah oo qisadaan ka faalloonayaa wuxuu yiri: " Kuwaan riddada waxaa u weheliya dil, iyo maal ay qaadeen, sidaa awgeedna waxay noqdeen shufto jid gooys ah, iyo kuwo la diriraya Alle iyo Rasuulkiisa.[81]" ra'yiga Ibnu Taymiye oo kalena waxaa qaba culumo badan oo kale.

[80] Dhacdooyinkaan ka fiiri kutubta siirada sida Siirada Ibnu Hishaam iyo buugta uu ka midka yahay Asaarim al-Masluul Calaa Shaatim Arrasuul ee uu qoray al-Imaam ibnu Taymiyah.
[81]

Copyright © 2009 WardheerNews.com

3- **Miqyas bin Subaabah**: ninkaan la oran jirey Miqyas bin Subaabah wuxuu tagay magaalada Madiino isaga oo damacsan inuu u aargudo nin ay walaalo ahaayeen oo la oran jirey Hishaam bin Subaabah, wuxuuna sheegtay inuu muslim yahay, wuxuuna qaatay magtii walaalkii, dabadeedna intuu diley ninkii walaalkiis diley ayuu baxsaday, wuxuuna tiriyey gabayo uu dhacdooyinkaas uga faalloonayo. Nebiguna wuxuu amar ku bixiyey in la dilo.

4- Sidoo kale, waxaa jirey nin la oran jirey **Cabdullaahi bin Khadal** oo inta islaamay u hijroodey magaalada Madiino. Waqti waqtiyada ka mid ahna nebigu (SCW) wuxuu isku daray ninkaan iyo saxaabi kale oo ka dhashay qabiilo la yiraahdo Khusaaca si ay u soo uruuriyaan xoolo sako ah, laakiin Cabdullaahi bin Khadal intuu diley saxaabigii la socday, ayuu dareersay xoolihii sakada ahaa, wuxuuna ku noqday magaaladii Mako, reer Makana wuxuu ku yiri: " Ma arag diin dhaanta tiinna", wuxuuna lahaa labo gabdhood oo fannaaniin ah oo tiriya heeso ay nebiga ku maagaan.

6- **Saarah**: haweenaydaan la oran jirey Saarah -oo ku caan ah warqad farriin ah oo ay Qureeshtii Maka ugu dhiibtey saxaabi la oran jirey Xaadib bin Abii Baltaca- waxay ahayd fannaanad heesta, waxayna timid magaalada Madiina iyada oo sheeganaysa in ay muslintay, nebiguna waa soo dhaweeyey, hantina waa siiyey, laakiin mar danbe ayay waxay ku noqotay magaalada Maka oo xilligaas ahayd xarunta gaaladii muslimiinta dagaalka kula jirey, waxayna tirisay heeso ay nebiga ku aflagaadaysay, waana la diley.

Ibnu Taymiya-na isaga oo ka faalloonaya dhacdooyinkaan aan kor ku soo xusnay wuxuu yiri: " Kuwaan badankooda riddada waxaa u weheliya dil, iyo maal ay qaadeen, sidaa awgeedna waxay noqdeen shufto jid gooys ah, iyo kuwo la diriraya Alle iyo Rasuulkiisa, waxaana ka mid ah qaar nebiga carrabkooda ugu geysan jirey dhib kala mid dhigaya kuwa dagaalka kula jirey, ….[82]" ra'yiga Ibnu Taymiye oo kalena waxaa qaba culumo kale oo badan.

Dhab ahaantiina, dhacdooyinkaas iyo kuwo la mid ah ayay daliishadaan dadka ku andacooda in nebigu dad u diley riddo darteed, run ahaantiise dadka dhacdooyinkaan daliishadaa waxay iska indho-tiraan denbiyada weheliya riddada ee muujinaya in sababta dilka keentay ay tahay denbiga weheliya riddada laakiin aysan ahayn riddada qudheeda.

Dhanka kale, siirada nebiga waxaa lagu xusay dad riddoobay nebiga oo og, isla markaana nebigu uusan waxba u raacan. Dhacdooyinkaasna waxaa ka mid ah dhawrka soo socda:

- Waxaa la wariyey in nin reer-miyi ahi uu nebiga (SCW) beeco la galay, laakiin mar danbe ninkii reer-miyiga ahaa waa xanuunsaday, wuxuuna u yimid nebiga isaga oo ka codsanaya inuu ballantiisii u celiyo [inuu diinta ka noqdo], laakiin nebigu waa ka diiday, hadana mar labaad buu u yimid isaga oo ku leh: war Maxamadow beecadaydii ii celi, nebiguna waa ka diiday. Haddana mar saddexdaad buu u yimid isaga oo ku

[82] Ibnu Taymiyah; Asaarim al-Masluul Calaa Shaatim Arrasuul, B. 325.

Copyright © 2009 WardheerNews.com

leh: war Maxamadow beecadaydii ii celi, mar saddexaadkiina nebigu waa ka diidey. Dabadeedna, ninkii waa ka tagay magaaladii Madiina [waa gaaloobay], nebiguna wuxuu yiri: " Madiino sida buufinaha tumaalka ayay xumaha isaga sifaysaa, wanaaggeedana u cadaysaa[83]".
Sida muuqatana xaddiiskaani wuxuu si qeexan u tilmaamayaa riddo cad. Sidaas oo ay tahayna nebigu (SCW) ma ciqaabin ninkaan reer-miyiga ah, cid kalena kuma amrin inay ciqaabto, balse wuxuu u oggolaaday inuu Madiino ka tago isaga oo aan cidina wax u raacan.

Teeda kale, dhacdooyinkaan kor ku xusani waxay waafaqsan yihiin mid ka mid ah qodobadii heshiiskii Xudaybiya ee dhexmaray nebiga (SCW) iyo gaaladii reer Maka. Qodobkaasi waa kii dhigayey in qofkii ka taga reer Maka ee aada Madiina si uu ugu biiro bulshada islaamka ah, loo soo celiyo Maka, laakiin qofka ka taga Madiina ee aada Maka [riddooba] aan dib Madiino loogu celin. Waxaana xusid mudan in dadka taageera xadka riddadu ay ku doodaan in xikmadda laga leeyahay fulinta ciqaabtu ay tahay in bulshada muslimka ah iyo hanaankeeda siyaasadda laga ilaaliyo burbur iyo kala-daadad ku yimaada. Su'aasha meesha taal ee u baahan in la isweydiiyaase waxay tahay: haddii ujeeddadu sidaas tahay, goorma ayaa muslimiintu taa uga baahi badnaayeen maalinta nebigu heshiiskaas qalinka ku duugey?

Dhanka kale, munaafaqnimadu bulshada islaamka waa uga dhib badan tahay gaalnimada cad, waayo munaafaqu waa cadow kula yaal, oo aadan dhibkiisa iyo shirqoolkiis mar walba u tooghayn karin. Sidaas oo ay tahayna, nebigu (SCW) marna cid uma dilin munaafaqnimo darteed, marar badan oo saxaabada qaarkood kula taliyeen inuu dilo munaafaqiin gaalnimo cad lagu eedeeyeyna waa ka diiday. Mar walba oo fikraddaas loola yimaadana wuxuu ku jawaabi jirey oraahdiisa caanka noqotay ee oranaysa: " Lagu sheekaysan maayo Maxamed raggiisuu laayaa".
Tusaale ahaanna, Cabdullaahi bin Ubay bin Saluul iyo rasuulka waxaa dhexmaray loollan ba'an[84], culumada islaamkuna waxay qabaan inuu ka mas'uul yahay dhibaatooyinka uga waaweyn ee islaamka iyo muslimiinta qabsaday[85], waxayna ugu

[83] Saxiix al-Bukhaari, 319, Saxiix Muslim,3191.

[84] Qoraallada taariikhda islaamku waxay noosheegayaan in colaadda dhexmartay nebiga (SCW) iyo Cabdullaahi bin Saluul ay asal ahaan ka dhalatay Cabdullaahi oo nebiga u arkay inuu ka hor-istaagay inuu madax ka noqdo magaalada Madiino iyo deegganada ku meegaaran. Qoraalladaasina waxay leeyihiin Cabdullaahi intaan nebigu u soo qaxin Madiino wuxuu u sharraxnaa in loo caleemo saaro inuu noqdo ugaaska beelihii carabta ahaa ee magaalada degganaa ee AL-Ows iyo Al-Khasraj. Dhanka kalena, Cabdullaahi wuxuu xiriir wanaagsan la lahaa Yuhuuddii deggenayd magaalada, sidaa darteedna wuxuu niyadda u sheegay inuu dhulkaas ka samayn karo boqortooyo yar oo uu isagu madax ka yahay. Laakiin kolkii rasuulku magaalada soo gaaray, mashruucaas oo dhammi waa kala daatay, riyadii Cabdullaahina waxay noqotay dhalanteed iyo dhaan dabagaalle. Sidaa darteedna, Cabdullaahi nebiga wuxuu u qaaday colaad xun, waayo wuxuu iska dhaadhiciyey in nebigu ka inqilaabay ugaasnimadii iyo boqornimadii uu u dubnaa.

[85] Eedaha loo tiiriyo Cabdullaahi bin Ubay bin Saluul aad baa loo buunbuuniyaa, wadaaddada qaarkoodna waxay isku dayeen inay mas'uuliyadda dhammaan khaladaadkii muslimiintu sameeyeen ay isaga iyo nin kale oo ay sammi yihiin oo la yiraahdo Cabdullaahi bin Saba ay dusha ka saaraan, waxaadna mooddaa in wadaaddada islaamka qoorkood ay aamminsan yihiin fikrad ah: Wixii xunba Ibnu Saluul iyo Ibnu Saba baa leh. Tusaale ahaanna, qoraallada Cabdullaahi bin Saba laga qoray oo kumanyaal gaaraya waxaa ka mid ah buug dhawaan wadaad carbeed ka qoray oo ilaa 6 mujallad ah. Run ahaantiina ruuxa daalacda buuggaasi wuxuu u qaadanayaa in Cabdullaahi labo midkood ahaa: inuu

Copyright © 2009 WardheerNews.com

yeeraan magcaan ay ka mid yihiin "Ugaaska munaafaqiinta" iyo "Madaxa gaalnimada", waxayna rumaysan yihiin inuu gaalnimo cad ku dhacay, oo uu gaal-yahay. Run ahaantiina quraanka kariimka waxaa ku jirta suurad dhan oo la yiraahdo "Al-Munaafiquun", waxaana la rumaysan yahay in sababta suuraddu ku soo degtay ay tahay si ay u fadeexayso hab-dhaqankii munaafiqiintii uu Cabdullaahi horseedka u ahaa. Suuradduna waxay noosheegaysaa in Cabdullaahi isaga oo ku diganaya saxaabada, hadalkana u jeedinaya raggii ay jaalka ahaayeen uu yiri: "Ha quudinnina kuwa rasuulka la jooga jeer ay ka kala dareerayaan [= ka kala yaacayaan]" [Al-Munaafiquun:7]. Mar kalena, Cabdullaahi wuxuu si bareer ah nebiga ugu yiri: " Haddaan Madiino ku noqonno, kuwa tabarta lihi waxay ka saari kuwa dulaysan" [Al-Munaafiquun:8], isaga oo kuwa dullaysan ka wada rasuulka iyo saaxiibadi, kuwa tabarta lehna ulajeeda Cabdullaahi naf ahaantiisa . Marar badan oo rag uu ka mid ahaa Cabdullaahi bin Cabdullaahi bin Saluul oo ahaa wiil uu dhalay Cabdullaahi bin Saluul qudhiisu ay nebiga kula taliyeen in la dilo Cabdullaahi iyo raggiisana, nebigu wuxuu ugu jawaabay jawaabtiisa caanka ah ee aan kor ku soo xusnay ee ah: " Lagu sheekaysan maayo Maxamed saaxiibbadi buu dilaa".
Si taa la mid ah, duullaankii Xuneen muslimiintu waxay ka heleen hanti badan oo qaniimo ah[86], laakiin kolkii nebigu (SCW) bilaabay qaybinta hantidaas, dadka qaar baa waxay u arkeen in qaybintu u dhacday si aan habboonayn ama in iyaga laga eexday[87]. Nin ka mid ah dadkaas oo u dhashay qabiilo la yiraahdo Banii Tamiim-na inta istaagey ayuu nebiga ku yiri: "Maxamadow caddaalad samee!" rasuulkuna wuxuu ugu jawaabay: "War hooge! Yaa caddaalad samaynaya haddii aanan anigu caddaalad samayn? Waad hoogtay oo khasaartay haddii aanan anigu caddaalad samaynayn?", dabadeedna, Cumar bin Khaddaab (RC) baa wuxuu yiri:

---

ahaa qof malo awaal ah [shakhsiya usdhuuriya] oo aan dhab ahaan u jirin iyo inuu ahaa sheydaanka diimuhu sheegeen oo aan biyo isku rogin.
[86]

[87] Caadi ahaan culumada islaamka badankoodu dhacdadaan waxay u tebiyaan sidii inay ahayd wax hal ruux ku kooban, laakiin marka ruuxu si toolmoon ugu fiirsado arrinkaan wuxuu ogaanayaa in cabashadu aysan hal qof ku koobnayn, balse ay jireen dad badan oo qaybta saluugay. Tusaale ahaanna, qaabka wax loo qaybiyey waxaa saluugay Ansaartii reer Madiino, oo markay qaybta ka caroodeen isla dhexmaray weero ay ka mid yihiin: "Rasuulku tolkiis buu helay" iyo "Dhibka annagaa naloogu yeerayaa, qaniimadana kuwo kalaa la siinayaa". Arrinkuna wuxuu gaaray heer ashtakadoodii uu nebiga u keenay ugaaskoodii oo ahaa saxaabi la oran jirey Sacad bin Cubaadah, dabadeedna nebigu (SCW) wuxuu shiriyey Ansaartii, wuxuuna ujeediyey erayo uu laabtooda ku qaboojiyey. Taariikh-yahannada qaarkood oo arrinkaan wax ka qorayna waxay yiraahdeen Ansaarta oo ahaa bulsho laab wanaagsani waa ku qanceen hogo-tusaalaynta nebiga, laakiin haddii qoloda nebigu la hadlayey ay ahaan lahaayeen qaar kale oo ka mid ah beelaha carabta nebiga arrinkaasi uma fududaadeen [malaha qabaa'ilka la tilmaamayo waxaa ka mid ah Qureeshta oo lagu tilmaamay inay yihiin "Kuwa noolaha ugu hunguriga badan]. Sidoo kale, qaybtaas waxaa ka carooday qaar ka mid ah saxaabada oo diiddanaan hanti faro badan oo nebigu labo nin oo munaafaqnimo lagu tuhmayey u siiyey si uu qalbigooda ugu kasbado, labadaas ninna waxaa la kala oran jirey Cuyeyna bin Xisni iyo Al-Aqrac bin Xaabis. Isla kooxdaani waxay kaloo ka caroodeen nin la oran jirey Juceyl bin Suraaqah oo ay u arkayeen inuu labadaas nin hantida uga baahi badan yahay oo la qadiyey. Sidoo kale, qaybintaan waxaa ka carooday nin gabyaa ahaa oo la oran jirey Cabbaas bin Murdaas, oo isagu saluugay saamigii nebigu siiyey, laakiin markii danbe nebigu ninkaan wuxuu siiyey hanti badan oo uu ku qancay. Nebiguna isaga oo tilmaamaya xaaladda ninkaan iyo dadka la midka ah wuxuu yiri: " Maalkiinna ku difaaca sharaftiinna" saxaabaduna waxay yiraahdeen: " Sidee baan maalkayaga ugu difaacaynaa sharaftayada" nebiguna wuxuu ugu jawaabay: " Waxaad siinaysaan gabyaaga iyo ciddii aad carrabkeeda ka baqaysaan."

Copyright © 2009 WardheerNews.com

rasuulkii Allow maan istaago oo dilo munaafaqaan? Rasuulkuna Cumar wuxuu ugu jawaabay weedhiisii caanka ahayd ee " Allaan ka nabad-galay in dadku ku sheekaystaan Maxamed saaxiibadi buu dilaa.[88]"
Munaasabaddaasna nebiga waxaa ku soo degay aayado quraan ah, oo ay ka mid tahay aayadda oranaysa: " Waxaa ka mid ah kuwo kugu dhaleecaynaya sadaqada oo haddii la siiyana raalli noqon haddaan la siinna caroon." [Atowbah: 58][89].

Gabyaagii Soomaaliyeed ee Ismaaciil Mire-na malaha arrinkaan ayuu maanka ku hayey markuu maansadiisa caanka ah ee "Ragow Kibirka Waa Lagu Kufaa" uu ku yiri:

Kufri iyo Islaam loo collow kaysihii hore'e
Kaakici wadaadkii jihaad laguna kaalmeeye
Kumanyaal lag wada duubcad buu keenay Beerdhiga'e
Waxse kadabki go'ay markuu kaday raggiisiiye
Kabaalkina wuxuu jabay kolkuu kariyey Reer Kheyre
Ragow kibirka waa lagu kufaa kaa ha la ogaado.

Iyada oo kooban, nebi Muxamed (SCW) ma aqoon xad la yiraahdo riddo. Laakiin xadka riddadu waa sheeko-xariir gadaal danbe laga allifey si dano siyaasadeed loogu gaaro.

9- Dagaalladii Riddada Iyo Murtadnimada:

Sharcinimada xadka riddada marar badan waxaa loo daliishadaa dagaalkii khaliifkii 2-aad ee Abuu Bakar (RC) uu la galay beelihii ka riddoobey diinta geeridii nebiga ka dib. Haddaba, dhacdadaasi daliil ma u noqon kartaa jiritaanka ciqaabta riddada?

[88] Musnad al-Imaam Axmed

[89] Magaca ninka nebiga (SCW) eedeeyey ee aayadduna ku soo degtay waxaa lagu sheegay Xarquus bin Suheyr, waxaana lagu naynaasi jirey Ibnu Dii al-Khuweysira. Cumar bin Khaddaab-na wuxuu abaanduule uga dhigay ciidan uu u diray meesha la yiraahdo al-Ahwaas si ay ula dagaallamaan haraadigii ciidankii dowladdii Saasaanida oo uu hogaaminayey al-Hurmusaan. Saxaabigaani markii hore wuxuu ka mid ahaa taageerayaashii Cali Bin Abii Daalib, laakiin markii la kala xukumay Cali iyo Mucaawiye ka dib wuxuu ku biiray ciidankii ka fallaagoobay Cali ee loo bixiyey Khawaarijta. Ninkaanna Ahlu Sunnadu waxay ku tilmaameen inuu yahay aabbaha firqada goor danbe samaysantay ee loo yaqaan "Khawaarijta". Waxaana lagu andacooday in ninkaani lahaa sifooyin nebigu ku tilmaamay inay yihiin astaamaha lagu aqoonsanayo ninka ay ka farcami doonto Khawaarijtu. Sifooyinkaasna waxaa ka mid ah: inuu yahay nin madow oo gacmihiisa middood ay ku taal wax la moodo naas dumar [= wixii xunba waxaa leh madowga iyo bilis xaawo]. Sidoo kale, waxaa la wariyey in nebigu sheegay in ninkaan ay ka farcami doonaan dad cibaado badan oo diinta isku dhiba ilaa heer loo qaato in aysan jirin cid cibaado ku gaari kartaa. Laakiin sidaas oo ay tahay kooxdaani waxay diinta uga baxayaan sida fallaartu qaansada uga booddo kolka la gano. Yeelkadeede, waxaa jira culumo qaba in aayaddu aysan ku soo degin ninkaas, isla markaasna in badan oo ka mid sifooyinka lagu tilmaamay ninkaan iyo firqada ka farcamaysaa ay yihiin kuwo taariikh dambe la allifey. In arrinku sidaas yahayna waxaa loo daliishaday in Abuu Isxaaq oo culumada qaarkood ay shiiconimo ku tuhmeen uusan kitaabkiisa siirada sabab nusuulka aayaddaan ku xusin, umana adeegsan si uu ugu xumeeyo khawaarijta oo shiicada isaga lagu tuhmay uu khilaaf ba'ani ka dhexeeyo.

Copyright © 2009 WardheerNews.com

Dhab ahaantii, marka si qotodheer loo baaro dagaalkii riddada waxaa la ogaanayaa in arrinku uusan ahayn riddo iyo diin ka bax caadi ah, balse uu ahaa kacdoon hubaysan oo lagala horyimid dowladdii islaamka ee curdanka ahayd[90]. Sidaa awgeedna, dagaalkii riddada looma daliishan karo jiritaanka xadka riddada.

Islaamku wuxuu ahaa kacaan ku yimid nidaamkii dhaqan-dhaqaale ee bulshada Carabta, wuxuuna isku dayey inuu Carabta ka raro marxalladii beelaha oo u raro marxalad dowladnimo. Intii nebigu noolaana waxaa abuurantay dowlad ka hanaqaadday qaybo ka mid ah jasiiradda Carabta, siiba Xijaas [= Maka, Madiina iyo deegaannada u dhow]. Hayeeshee, nebigu wuxuu xijaabtay iyada oo mabaadida cusub iyo hannaanka dowladnimo aysan weli ku xididaysan bulshada dhexdeeda. Geeridii nebiga oo ummadda badankeeda filan waa ku noqotayna waxay dhalisay in la isweydiiyo su'aalo aan markaa ka hor cidi isweydiin iyo in nidaamkii curdanka ahaa uu sidii tusbax furtay u kala daato. Qoraagii Annuwayri oo tilmaamaya sidii xaal noqdayna wuxuu yiri:
" Carab oo dhammi, marka laga reebo Qureesh iyo Taqiif, waa riddowday, wufuuddii carabta riddowdayna waxay u yimaadeen Abuu Bakar iyaga oo u sheegaya inay salaadda oggol yihiin, laakiin sakada diiddan.[91]"

Dhab ahaantii, dadkii ku noolaa Jasiiradda Carabta markay timid geerida nebigu, waxay u badnaayeen qaar aan weli islaamin ama islaamay laakiin aan islaamka ka aqoon wax magaca dhaafsiisan[92]. Tusaale ahaan, beelaha Carbeed ee la sheegay inay islaameen waxaa ka mid ah qabiilada Yamanta ah ee la yiraahdo Cabas oo uu ka dhashay ninkii nebinimada sheegtay ee "*Al-Aswad Al-Canasi*". Laakiin qoraallada taariikhdu waxay sheegayaan in islaamku qabiiladaan magac keliya ku ahaa, waxayna wariyeen in nin beeshaan u dhashay oo la oran jirey Rabiica bin Rawaa al-Canasi uu nebiga u yimid, oo islaamay, dabadeedna uu ku noqday dhulkii qabiilkiisa deegaanka u ahaa, laakiin uu geeriyoodey ka hor intii uusan gaarin. Sidaa darteedna kolkii nin qabiilkooda ka mid ahi uu nebinimo sheegtay si fudud bay u taageereen. Sidaas oo kale, qabiilada la yiraahdo "Banuu Asad", dhawr nin oo ka mid ah ayaa islaamay wax yar ka hor geeridii nebiga. Geeridii nebiga ka dibna qabiilkaani waxay taageereen nin qabiilkooda ka dhashay oo nebinimo sheegtay oo la oran jirey "*Dhuleyxat Al-Asadii*". Quraanka kariimka oo ka faalloonaya dadkii diintoodu noocaas ahaydna wuxuu yiri: " Waxay kugu mannaysan inay islaameen, waxaad dhahdaa haygu mannaysannina islaamkiinna, Eebbaa manna idinku leh inuu idinku hanuuniyey iimaanka haddii aad run sheegaysaan." [Al-Xujuraat:17].

[90] Culumo uu ka mid yahay Ibnu Abii al-Xadiid waxay qabaan in aysan dhicin wax la yiraahdo riddo, laakiin muslimiintu eray-bixinta dagaallada riddada ay u adeegsadeen sarbeeb ahaan, waayo muslimiinta badankoodu diididda sakada waxay u arkayeen arrin foolxun (fiiri: buugga Sharxi Nahji al-Balaaga).

[91] Nihaayat al-Arab, juska 19-aad, B.61

[92] Beelaha Carabta qaarkood diinta uma qaadan iyaga oo ku qancay darteed, balse waxay u qaateen baqdin darteed. Dadkaasna waxaa loo yaqaan magaca "Aduluqaa" ama "Muslimii Fatxi". Cumar bin Khaddaab (RC) oo ahaa nin aqoon badan u leh carabta, isla markaan hadalka aan la gaban, geeridiiisii ka hor isaga oo la dardaarmaya guddigii uu u doortay inay dhexdooda ka doortaan ninka khaliifka noqonaya wuxuu ku yiri: " Arrinkaan [Khilaafada] waxaa iska leh muslimiintii Bedar iyo Uxud inta nin ka nool yahay , dadkii islaamay furashadii Maka ka dibna [= Muslimii Fatxi] yaysan u soo dhawaan".

Copyright © 2009 WardheerNews.com

Dhanka kale, Carabta badankoodu nebi Muxamad (SCW) waxay u arkayeen ugaas beeleed, islaamkana waxay u haysteen xeelad Qureeshi u adeegsanayso si ay u ballaariso awooddeeda. Oo bilmatal, ugaaskii beesha Banii Caamir oo la oran jirey Qurah bin Hubeyra Al-Qusheyrii mar uu la hadlayey Camar bin Caas (RC) wuxuu u sheegay in isaga iyo qabiilkiisu ay islaamka qaateen, maxaa yeelay: "Muxamed (SCW) wuxuu ahaa nin ka dhashay Mudar oo doonayey inuu dadka soofsado", haddii si kale loo yiraahdo: Banuu Caamir waa Mudar, Qureeshina waa Mudar, taa awgeedna tan hore waxba kama qabto islaamka, waayo Muxamed wuxuu ka dhashay isla qabiilkooda. Si taa liddi ku ahna, markii ninkii la oran jirey Museylama bin Xabiib -oo taariikhda islaamka ku caanbaxay magaca "Museylama Beenaale/ Museylamat al-Kaddaab" uu nebinimada sheegtay nin beeshiisa ka mid ahi wuxuu ku yiri: " Waa hubaa inaad beenlow tahay, Maxamedna run sheegayo, laakiin beenaale Rabiica ka dhashay baan ka jecelnahay runlow Mudar ka dhashay." Si taa la mid ah nin ay isku qabiil ahaayeen ninkii nebinimada sheegtay ee Dhuleyxat Al-Asadi isaguna wuxuu yiri: " Allaan ku dhaartaye inaan raacno nebi ka dhashay bahwadaagta -wuxuu ula jeedaa labo qabiilo oo xulufo ahaa oo la kala oran jirey Asad iyo Qadafaan- ayaan ka jecelnahay inaan raacno nebi Qureesh ka dhashay ..". dhab ahaantiina, Carabta oo ah bulsho qabyaaladdu ku xididaysatay, weligood waxay rumaysnaayeen oraahda tiraahda: " Kabtaada iyo qabiilkaagaba waa lagu dhexjiraa". Taariikhda islaamkuna [muslimiintuna] waxay nabaraysaa in dhibka ugu weyn ee muslimiinta qabsaday uu ka dhashay dhaqanka qabyaaladaynta diinta ee carabtu muslimiinta kale ku abuureen, isla dhaqankaasina waa midka qarniga 21aad Soomaalida dowlad la'aanta dhigay.

Sidaa darteedna, geeridii nebiga iyo magacaabiddii Abuu Bakar beelaha carabta qaarkood waxay u arkeen fursad ay uga gadoodi karaan isballaarinta Qureeshta. Tusaale ahaanna, Museylama bin Xabiib [Museylama Beenaale] mar uu la hadlayey qabiilkiisa oo layiraahdo Banii Xaniifa wuxuu ku yiri: " Waxaan doonayaa inaad ii sheegtaan sababta Qureeshi ay idiinka xaq yeelatay nebinimada iyo boqortooyada, Allaan ku dhaartaye idinkama tiro badna, idinkamana dagaal-yahansana, dhulkiinnaana ka ballaaran dhulkooda, hantidiinnaana ka badan hantidooda".

Dagaallada ku caanbaxay magaca dagaalladdii riddaduna dhab ahaantii xooggoodu ma ahayn dagaal diin ku salaysan, balse waxay ahaayeen loollan loogu jirey hanashada awoodda siyaasadeed iyo tan dhaqaale. Geeridii nebiga ka dibna, loollanku durba wuxuu ka qarxay muslimiintii Madiino dhexdooda oo u kala jabay Ansaar [= reer Madiino] iyo Muhaajiriin.[reer Maka], Muhaajiriinta qudhooduna waxay u kala jabeen qoysas iyo jifooyin hoose. Tusaale ahaan, kolkii Abuu Bakar lagu doortay Saqiifa bin Saacida, Khaalid bin Waliid wuxuu u tagey Cali bin Abii Daalib isaga oo ku diraya Abuu Bakar, wuxuuna ku yiri: " Abuu Xasanow .. reer Cabdi Manaafow.. ma la'idinka adkaaday?" Calina wuxuu ugu jawabay: " arrinku ma kala adkaanbaa mise waa khilaafo". Sidoo kale, Abuu Sufyaan oo caraysan baa u tagay Cali bin Abii Daalib iyo Cabbaas oo ku yiri: " War Cali .. iyo adigaan Cabbaas ah .. maxay ku dhacday in arrinka [xukunka] loo daayo jilibka ugu

Copyright © 2009 WardheerNews.com

liita Qureesh, Allaan ku dhaartaye haddaad ii fasaxdaan rag iyo fardaan ku qarqinayaa".

Dhanka kale, Beelaha Carabta qaarkood ma diiddanayn islaamka iyo madaxnimada qureeshta toona, balse waxay diideen madaxnimada Abuu Bakar (RC), oo ay u arkayeen inuu yahay nin laangaab ah oo aan istaahilin mansabka khaliifnimada (Abuu Bakar wuxuu ka dhashay jilib yar oo la oran jirey Teym bin Murra), waxayna isweydiiyeen su'aasha ah: sidee bay suuragal ku tahay inuu naxukumo qurbacaan yari (erayga bakar macnihiisu waa qaalin yar)[93]. Beelaha qaarkoodna kuma ekaan inay diideen dowladdii Abuu Bakar madaxda ka ahaa, balse waxay diyaariyeen ciidan huwan ah oo duullaan ku qaaday caasimaddii dowladda islaamka ee Madiino. Sidaa darteedna, Abuu Bakar waa ku khasbanaa inuu la dagaallamo qabaa'ilkii khatarta ku hayey dowladdii islaamka ee curdanka ahayd. Shakina kuma jiro in Abuu Bakar muujiyey garaad badan, karti iyo dhaqan dowladeed [stateman].

Si taa la mid ah, waxaa jirey qabaa'ilka qaarkood oo diiday inay dowladda siiyaan sakada xoolahooda, iyaga oo marmarsiinyo ka dhiganaya in sakada maalkooda ay ku doorsan jireen ducada nebiga, geeridii nebiga ka dibna aysan jirin cid leh duco la mid ah tii nebiga. Qoladaani waxay si khaldan u fahmeen aayadda quraanka ah ee oranaysa: " Ka qaad xoolahooda sadaqo [sako] aad ku daahirin kuna nadiifin, una ducee illeen ducadaadu waxay u noqon xasile, Eebbana waa maqle og" [Atowbah: 103]. Waxayna yiraahdeen sakadayada siin mayno cid aan ahayn nebigii ducadiisu xasilka noo ahayd.

Dhanka kale, waxaa xusid mudan in markii ay socotay dooddii dhexmartay Abuu Bakar iyo saxaabada kale, ee ku saabsanayd sida laga yeelayo qabaa'ilkii riddoobay aan mar qura la daliishan axaadiista maanta loo daliishado xadka riddada, arrinkaasina waa mid muujinaya in saxaabadii nebiga ee Madiino ku sugnaa aysan maqal axaadiistaas.
Isku soo duuboo, dagaalkii riddada laguma qaadin dad ku eedaysan inay diinta ka baxeen oo keliya, balse waxaa lagu qaaday dad loo arkayey inay khatar ku yihiin jiritaanka dowladda islaamka. Dadkaani waxay ku eedaysan yihiin khayaano qaran iyo qaran dumin. Denbiga loo haystaana ma ah mid caqiido la xiriira balse waa mid siyaasad iyo dhaqaale la xiriira. Abuu Bakar oo qodobkaan carrabka ku adkaynayaana waa kii yiri: " Allaan ku dhaartaye hadday ii diidaan dabar ay nebiga siin jireen waa kula dagaallamayaa."

Ugu danbayntii, waxaa xusid mudan in maanta wadaaddadu si weyn u adeegsadaan oraahda tiraahda: " Waa riddo aan Abuu Bakar joogin"[= Riddatun Walaa Abuu Bakar Lahaa][94]. Run ahaantiina, weedhaani waa mid khatarteeda leh, waayo nuxurka ay xanbaarsan tahay waxa weeye in cid walba oo qabta fikrad iyo dood ka duwan tan wadaddada loo baahan yahay in loo ciribtiro si la mid ah sidii Abuukar murtadiinta u ciribtiray. Weedhuna waxay si dahsoon u muujinaysaa in muslimiintu maanta ku sugan yihiin xaalad riddo oo la mid ah tii ka dhacday jasiiradda Carabta kolkii

[93] Beelaha carabta qaarkood waxay yiraahdeen: " Allaan ku dhaaranaye inuusan na xukumayn qaalinka yari" [Atabari 2/48].
[94] Weedhaan markii ugu horraysey waxaa bixiyey Wadaadkii Hindiga ahaa ee Abuu Xasan Annadawi.

Copyright © 2009 WardheerNews.com

Abuukar talada qabtay. Haddaba, waa kuma duco qabaha seefta ka aslaya bulshooyinkaas riddoobay.

10- Riddada iyo Siyaasadaynta Diinta:

Qof kasta oo aqoon u leh taariikhda diimuhu wuxuu og yahay in siyaasaddu su fudud u faddarayso diinta. Keligi-taliye walbaana uu heli karo wadaad diinta ugu fasira hadba sida uu jecel yahay. Diinta waxaa loo arkaa xaq muqaddas ah, oo ay tahay in la rumaysto wax alle iyo wixii ay sheegto, sidaa darteedna ciddii diinta hanataa waxay helaysaa awood xad-dhaaf ah oo ay dadka ku dareersan karto iyaga oo raalli ah. taa awgeedna dowladihii dunida soo maray badankoodu waa yaqaanneen in diinta siyaasad ahaan loo adeegsado.

Waxaa la wariyey in xilligii dowladda Cabbaasida uu madaxda ka ahaa boqorkii la oran jirey al-Mahdi, uu nin caammi ahi maalin yimid golihii boqorku dadka kula kulmi jirey, isaga oo sita kab cad maro ah lagu duubay, wuxuuna u dhiibay boqorkii isaga oo ku andacoonayaa in kabtaan uu illan jirey nebi Muxamed (SCW). Boqorkiina kabtii wuxuu ugu dhaqaaqay dhunkasho iyo inuu isku masaxo, wuxuuna amar ku bixiyey in ninka kabta keenay la siiyo toban kun oo dirham. Kolkii golihii lagu kala tegayna al-Mahdi wuxuu raggii khusuusida ahaa ku yiri: ma waxay idinla tahay inaan rumaysatay in nebi Muxamad kabtaan xirtay? Waa hubaa in nebigu uusan kabtaan arag, laakiin waxaan ka baqay inuu caamada ku dhex faafiyo boqorku nebiguu neceb yahay, taana waxaan ka doorbiday inuu ku dhexfaafiyo boqorku nebiguu jecel yahay, maxaa yeelay caamadu waa rumaysataa wixii loo sheego oo dhan[95].
Qisadaan nuxurkeedu waa fasiraadda boqorku bixiyey, oo qeexaya sida dowladuhu diinta u siyaasadeeyaan, xurmada dadweynuhu diinta u hayaanna uga dhigtaan aalad lagu xakameeyo damiirka dadweynaha.

Dunida islaamka xukun ku dirirku wuxuu ahaa astaan muuqata oo lagu garto taariikhda muslimiinta[96], illaa heer laga yiri: " Islaamka seef looguma siiban si la mid ah sida loogu siibtey xukun ku raadinta" [= Maa Sulla Seyfun Fil-Islaam Kamaa Sulla Min Ajli al-Imaarah]. Sidaa darteedna, muslimiintu waxay safka hore ka galayaan ummadaha diinta sida weyn danahooda siyaasadeed ugu fushada.
Tusaale ahaanna, quraanka waxaa ku jirta aayad oranaysa: " Kuwa rumeeyow addeeca Eebbe, oo addeeca rasuulka iyo kuwa amarka leh ee idinka midka ah." [An-Nisaa:59]. Aayaddaan oo malaha ah midda madaxda dunida islaamku ugu jecel yihiin, asalkii hore waxay lahayd macne ka duwan kan gadaal sida weyn loogu adeegsaday.
Sida laga garan karo sababtii ay ku soo degtay aayaddu, kuwa amarka leh waxaa loola jeedaa madaxda ciidanka, aayadduna waxay ka hadlaysaa edebta iyo kala danbaynta loo baahan yahay in ciidanku yeesho, siiba marka la joogo furunta hore ee dagaalka. Sida la og-yahayna ciidan aan la hayn kala danbayn iyo go'aan midaysan uma suuroobayso inuu dagaal guul ka soo hooyo.

[95] Al-Bagdaadi; Taariikh Bagdaad, juska 13-aad, BB. 163-166
[96] Muxamed al-Gasaali; Asmat Ashuuraa Fii al-Mujtamacaat al-Carabiya Wal-Islaamiya (Daar Asharq al-Awsad, Al-Qaahira, 1990) B.38

Copyright © 2009 WardheerNews.com

Aayaddaani waxay lahayd sabab ay ku soo degtay oo culumada islaamku ay u soo tebiyeen labo siyaabood oo nuxurkoodu isu dhaw yahay, waxayna kala yihiin:
Kow: duullaamadii muslimiinta midkood ayaa waxaa arrin isku khilaafay Khaalid bin Waliid oo ahaa abbaanduulaha ciidanka iyo Cammaar bin Yaasir[97]. Kolkii duullaanka laga soo noqdayna dhacdadaas waxaa loo sheegay nebiga (SCW), dabadeedna nebiga waxaa ku soo degay waxyi qiraya in la addeeco kan amarka leh, oo halkaan ah hoggaamiyaha ciidanka[98].

Labo: sababta kale ee la sheegay in aayaddu ku soo degtayna waxay leedahay sidatan: nebiga (SCW) ayaa ciidan uu madax u ahaa saxaabi la oran jirey Cabdullaahi bin Xudaafa (RC) wuxuu u diray si ay u soo fuliyaan hawl-gaar ah. waqti waqtiyada ka mid ahna, Cabdullaahi - oo lagu sheegay inuu ahaa nin kaftan iyo madadaalo badan - wuxuu amar ku bixiyey in dab la shido, kolkii dabkii la shidayna wuxuu raggii la socdey ku yiri: miyaan la idinku waajibin inaad I addeecdaan? Waxay yiraahdeen: Haa, wuxuu yiri: oo wax walba oo aan idinku amro ma fulinaysaan? Waxay yiraahdeen: haa, wuxuu yiri: haddaba, waxaan idinku amrayaa inaad dabkaan ku daadataan. Dabadeedna waa iskhilaafeen, oo qaarkood waxay damceen inay amarka fuliyaan,qaar kalena waa diideen. Kolkii ay Madiino ku soo noqdeenna nebiga ayay dhacdadaas uga sheekeeyeen, nebiguna kuwii damcay inay dabka isku tuuraan wuxuu ku yiri: haddaad dabkaas geli lahaydeen waad ku jiri lahaydeen taniyo maalinta qiyaamaha. Nebiguna (SCW) wuxuu intaa raaciyey inuu yiri: " Cidna laguma addeeco macsida Eebbe, waxaase lagu addeecaa wanaagga." Nebigana waxaa ku soo degtay aayadda aan kor ku soo xusnay. Sida muuqatana nuxurka qisadu kama duwana nuxurka qisada hore.

Run ahaantiina, culumada islaamku lix macne oo kala duwan ayay siiyeen erayga "Kuwa Amarka leh" ee aayadda ku soo arooray, waxayna kala yihiin sidatan:

A- Waa culumada, oo loola jeedo fuqahada.
B- Waa ummarada, oo loola jeedo madaxda siyaasadda.
C- Waa madaxda ciidanka
D- Waa saxaabada.
E- Waa Abuu Bakar iyo Cumar (RC).
F- Waa imaamyada cismada leh (fikraddaani waxay ku gaar tahay Shiicada).

Laakiin gadaal danbe aayadda waxaa si weyn loogu fasiray in loola jeedo madaxda siyaasadda [= dheh khaliif, ama amiir, ama suldaan, ama iimaam, ama madaxweyne, ama wixii kale ee la doono], waxaana laga qaatay in mucaaradnimadu xaaraan tahay, oo aysan marna bannaanayn in madaxda dowladda laga horyimaado, haddii aysan la

[97] Arrinka ay isku qabteen Cammaar iyo Khaalid waxaa lagu sheegay inuu ahaa nin ka mid ah mushrikiintii oo Cammaar nabadgelyo u fidiyey Khaalidna ka diiday. Waxaase xusid mudan in Cammaar bin Yaasir iyo Qureeshta colaad xumi ka dhaxaysey, waayo Cammaar wuxuu rumaysnaa in Qureeshi afka ka islaantay laakiin ay uurka gaalo ka yihiin. Fikraddaasna ma qarsan jirine si bareer ah ayuu u oran jirey. Arrinkaasina wuxuu keenay inay marar badan isku dhacaan, siiba wixii ka danbeeyey geeridii nebiga (SCW).

[98] Tusaale ahaan fiiri: Siirat Ibnu Hishaam, juska 4-aad, B.15, Saxiix al-Bukhaari; Kitaab Asxaab Annabi, mujalladka2-aad, juska 4-aad, B.213 iyo Kitaab al-Magaasi, Mujaladka 2-aad, Juska 5-aad, BB. 40,84, 87,119.

Copyright © 2009 WardheerNews.com

imaan gaalnimo caddaan ah [= al-Kufru al-Bawaax][99]. Waxaana xusid mudan in ehlu sunnada iyo khawaarijtu aad ugu kala aragti duwan yihiin macnaha la siinayo aayadda. Waxaadna mooddaa in doodda khawaarijtu runta u dhow dahay.

Run ahaantiina, siyaasadaynta diinta islaamku waxay bilaabatay saacaddii nebigu (SCW) xijaabtay tan iyo saacaddaanna waa taagan tahay. Kulankii "Saqiifa bin Saacida" ku dhexmaray Muhaajiriinta iyo Ansaarta ee looga xaajoonayey mawduuca khilaafadu wuxuu albaabka u furay in siyaasaddu diinta ku danaysato, laakiin waxaa arrinku si weyn u soo shaac baxay wixii ka danbeeyey dilkii khaliifkii saddexaad ee Cusmaan bin Cafaan (RC) iyo loollankii cuslaa ee dhexmaray labada qoys ee Banii Ummaya iyo Banii Haashim.

Iyaga iyo ku allahoode, waxay wariyeen in nebigu (SCW) ku riyooday riyo naxdin ku beertay, oo ahayd in la tusay iyada oo Reer hebel ay qabrigiisa wasakhaynayaan geeridiisa ka dib[100]. Dabadeedna, Eebbe oo nebigiisa niyadda u qaboojinayaa wuxuu soo dejiyey aayadda quraanka ah ee oranaysa: " Kama aanan yeelin riyadaan ku tusinay waxaan ka ahayn fidno aan dadka (ku imtixaanayno)" [Al-Israa: 60]. Reer-Hebelka magacooda la qariyeyna waxaa lagu fasiray in loola jeedo Banii Ummaya. Haddaba, maxaa la gudboon Banii Ummaya?

Banii Ummaya oo dareemay in sheekadaani tahay mid loo falkiyey si iyaga suuqa looga saaro -malahana rumaysnaa maahmaahda Soomaaliyeed ee tiraahda: " Rag iska celi iyo Rabbi ka baq meel ma wada galaan !!"- iyaguna waxay allifeen xadiis oranaya: " Eebbe waxyigiisa wuxuu ku aamminay saddex: Aniga, Jibriil iyo Mucaawiye.[101]", iyo mid kale oo oranaya: " Haddaad aragtaan Mucaawiye oo manbarkayga dushiisa ka khudbaynaya ku soo hirta, waayo isagu waa daacad la aamino[102]". Hase ahaatee, Mucaawiye kolkii uu ka guulaystay Cali bin Abii Daalib (RC) wuxuu taageerayaashiisa ugu khudbeeyey: " Dhulka Eebbaa iska leh, aniguna waxaan ahay khaliifka Alle, sidaa awgeedna wixii aan qaato anigaa iska leh, wixii aan dadka u daayana waa aniga iyo deeqsinimadayda[103]". Wuxuuna dhidibada u taagay boqortooyo magac islaam sidata, laakiin nuxur ahaan aan waxba kaga duwanayn kuwii Roomanka iyo Beershiyaanka[104]. Taniyo waagaasna muslimiintu ma arag dowlad diin ku dhaqanta, laakiin waxay marar badan arkeen madax diinta dantooda ku qunsado.

Su'aalaha ay isweydiiyaan culumada u dhuun-daloola cilmiga xadiiskuna waxaa ka mid ah: goorma ayuu bilowday dhaqanka tumidda axaadiista bugta ahi? Maxayse ahaayeen sababihii dhaliyey in la allifo axaadiista nebiga lagu been-abuurto?.

---

[99] Waa weedh mugdi ku jiro, oo aan lahayn macne si cad la isula oggolaan karo
[100] Adhabari; Tafsiir, juska 8-aad, B.16
[101] Ibn Katiir (Ismaaciil); al-Bidaaya Wanihaaya (al-Qaahira, 1348 hijrada) 8/120.
[102] Al-Bagdaadi (Abuu Bakar Axmed Cali al-Khadiib); Taariikh Bagdaad (Beyruut, Daar al-Kutub al-Cilmiyah) juska 1-aad, B.259.
[103] Atabari; Taariikh Arrusul Wal-Muluuk, juska 2-aad. B. Sidaan oo kalena waxaa ku dooday inta badan boqorradii dowladdii Cabbaasida.
[104] Mucaawiye bin Abii Sufyaan waxaa laga wariyey inuu oran jirey: " Anigaa ah boqorkii ugu horreeyey".

Copyright © 2009 WardheerNews.com

Su'aasha koowaad culumadu waa ku kala aragti duwan yihiin, waxaana jira saddex aragtiyood oo kala ah:
Kow: culumada qaarkood waxay qabaan in dhaqanka allifidda axaadiista beenta ahi uu bilowday intii nebigu (SCW) noolaa, in arrinku sidaa yahayna waxay u daliishadeen xadiiska caanka ah ee oranaya: " qofkii si ulakac ah iigu been abuurtaa naarta boos ha ka diyaarsado.[105]"

Labo: qaar kale oo culumada ka mid ahina waxay qabaan in been-abuurka xadiisku uu bilowday qaybtii danbe ee xilligii uu talada hayey khaliifkii 3-aad ee Cusmaan bin Cafaan, xilligaan oo ku beegan kolkii ay dhaceen dhacdooyinka ku caan-baxay magaca "al-Fitna". Tusaale ahaanna, Abuu Suhra taariikhda bilowga been-abuurka xadiiska wuxuu ka dhigay sannadkii 41 ee hijrada, eedda falka tumidda axaadiista been abuurka ahna wuxuu dusha ka saaray Cabdullaahi bin Saba iyo saaxiibadi[106].

Saddex: qolo saddexaad oo culumada ka mid ahi iyaguna waxay qabaan in dhaqanka allifidda xadiisku uu bilowday dhammaadkii qarnigii koowaad ee hijrada. Culumadaan waxay taariikhdaan u qaateen si ay tuhunka uga fogeeyaan saxaabadii nebiga (SCW).

Guud ahaan, waxaa si weyn loo rumaysan yahay in falka tumidda xadiisku uu xoogaystay wixii ka danbeeyey dilkii Cusmaan (RC) iyo curashadii dowladdii Ummawiyiinta. Sababta keentay falkinta xadiiskuna waxay ahayd iyada oo loo adeegsaday dano siyaasadeed. Ibnu Quteyba oo arrinkaan ka faalloonayaana wuxuu yiri: " Muslimiintu waa colloobeen, qolo walibana qolyaha kale ayay gaalaysay, koox kastaana mad-habtooda waxay ku xoojiyeen nooc axaadiis ah.[107]" Taa awgeedna, waxaa la rumaysan yahay in siyaasaddu tahay sababta ugu muhiimsan ee keenta falkinta xadiiska.
Sidaa darteedna, la yaab ma leh in Ahlu-Sunnadu sheegaan in Shiicadu masuul ka tahay dhaqanka falkinta xadiiska, halka Shiicaduna dhankooda kaga andacoodaan in Ahlu-Sunnadu yihiin kuwa allifey axaadiista ugu badan. Tusaale ahaan, Shiicadu waxay ku doodeen in dowladihii Ummawiyiinta iyo Cabbaasiyiintu ay masuul ka yihiin falkinta axaadiista, waxayna yiraahdeen nebigu (SCW) xukunka wuxuu u dardaarmay Cali bin Abii Daalib (RC) iyo reer Banii Haashim, taana waxaa u daliil ahaa xadiiska la yiraahdo "Gadiir Khum" oo markii nebigu yiri ay goob joog ahaayeen boqol iyo siddeetan kun oo saxaabada ka mid ah, laakiin Ahlu-Sunnadu si ay u deedafeeyaan xadiiska Gadiir Khum waxay tumeen axaadiis sheegaya in loo baahan yahay in muslimiintu ka wada tashadaan cidda talada u qabanaysa [= al-Imaamatu Shuuraa].

Dhanka kale, waxaa jira axaadiis nebiga loogu abtiriyo oo sheegaya in loo baahan yahay in madaxda muslimiintu ay noqdaan qabiilka Qureeshta, waxaana ka mid ah xadiiska oranaya: " al-A'imatu min Qureesh[108]" [= madaxdu waa inay Qureesh

[105] Xadiiskaan oo la sheegay in laga wariyey lixdan saxaabi, waxaa laga qoray qoraallo uu ugu caansan yahay buugga uu qoray Adhabaraani (Suleymaan bin Axmed oo dhintay 360 hijrada); Dhuruq Xadiis Man Kaddaba Calaya Mutacamidan (Beyruut, 1990).
[106] Abuu Suhra (Muxamed); al-Xadiis Wal-Muxadisuun (Beyruut, 1984) B.480.
[107] Ibnu Quteyba (Abuu Muxamed bin Cabdullaahi); Ta'wiil Mukhtalif al-Xadiis (Beyruut, 1972) B.2
[108] Abuu Daa'uud Adhayaalisi; Musnad Adhayaalisi

Copyright © 2009 WardheerNews.com

noqdaan] iyo midka kale ee oranaya "Dadku arrinkaan [= xukunka iyo siyaasadda] Qureesh bay uga danbaynayaan[109]" iyo weliba mid saddexaad oo oranaya: " Hor-mariya Qureesh hakase hormarina". Fuqahada islaamka badankooduna waxay ku tageen in shuruudaha iimaamka muslimiinta looga baahan yahay uu ugu horreeyo shardiga ah inuu yahay Qureeshi dhalad ah[110], oo xukunka ma qaban karto cid aan ahayn Qureesh, xataa haddii uu yahay nin bah-wadaag la ah. Iimaamku waa inuu yahay nin aabbihiis Qureeshi yahay[111].
Si muslimiinta loogu qanciyo in Qureeshtu muslimiinta kale ka fadli badan tahayna waxaa la curiyey dood sheegaysa in ruuxa Qureeshta ahi uusan gaaloobin [= al-Qureshiyu Laa Yatasandaq][112], oo Qureeshigu si kasta oo uu buudi iyo baadari u noqdo waa kii diintu ku soo duxdo, oo dhiiggooda ayaa islaam ah.
Culumada tafsiirkuna markay sharraxayaan suuradda 106-aad ee quraanka, oo ah suuradda la yiraahdo "Qureesh", waxay xusaan xadiis laga wariyo Ummu Haani binti Abii Daalib [dhimatay 40 hijrada] oo ay nebiga (SCW) ilmo adeer ahaayeen, xaddiiskaasina wuxuu sheegayaa in nebigu yiri: " Eebbe Qureesh wuxuu siiyey toddobo arrimood oo uusan hortood iyo gadaashood midna cid kale siin: khilaafada iyagaa iska leh, xijaabadana iyagaa iska leh, waraabinta xujeyduna iyagay u gaar tahay, nebinimadana iyagaa lagu goonni yeelay, maroodina waa loogu gargaaray, Eebbana waxay caabudeen toddobo sano oo aysan jirin cid kale oo xilligaas Alle caabudaysey, nebigana waxaa ku soo degtay suurad dhan oo aan cid kale lagu xusin.[113]"

Dhab ahaantiina, axaadiista noocaan ah, muslimiinta dhexdooda dhiig badan baa uga daatay. Laakiin axaadiistaani waxay u muuqdaan inay yihiin kuwo la allifey[114], sababta oo ah waxay isku si uga hor-imaanayaan nuxurka islaamka, axaadiis kale oo badan[115], hab dhaqankii saxaabada qaarkood[116] iyo caqliga fiyow. Tusaale ahaanna, xadiiska Ummu Haani wuxuu si cad u sheegayaa nidaamka khilaafada, sida la og yahayna nidaamka khilaafadu nebiga waa ka danbeeyey, oo markii ugu horreeyey waxaa lagu yagleelay kulankii ka dhacay Saqiifa bin Saacida sannadkii 11-aad ee hijrada geeridii nebiga ka dib. Suurogalna ma ah in nebigu ka warbixiyo dhacdooyin dhacaya goor danbe oo taariikhda islaamka ka mid ah. Nebiga (SCW) oo xaqiiqadaan ka hadlayaana wuxuu yiri: "Haddaan ogaan lahaa waxa maqan, waxaan badsan lahaa

[109] Saxiix al-Bukhaari;
[110] Eeg: Abaa al-Xasan al-Maawardi; al-Axkaam Asuldaaniya Wal-Wilaayaat Addiiniyah (Daar al-Kitaab al-Carabi, Beyruut, 1990) B.32
[111] Culumada fikraddaan sida weyn u taageeray waxaa ka mid ah Imaam Shaafici iyo Ibnu Xasmi, tusaale ahaan eeg: Musnad Ashaaficii Calaa Haamish Kitaab al-Um.
[112] Sheekada ku saabsan in Qureeshtu aysan gaaloobin waxaa allifey khaliifkii Cabbaasida ee Haaruun al-Rashiid.
[113] Al-Waaxidii (Anniisaabuurii); Asbaab Nusuul al-Quraan (Daar al-Kutub al-Cilmiyah, Beyruut, 1998) B.492. Asiyuudi (Jalaalu-Diin); Labaab Annuquul Fii Asbaab Annusuul (taxqiiq: Xamsa Nashratii iyo kuwo kale, al-Maktabah al_qayimah, al-Qaahira) B.494
[114] Waxaa jira aqoon yahanno badan oo qaba in axaadiistaan ay allifeen rag uu ka mid yahay Imaam Shaafici oo qudhiisu qureeshi ahaa. Soomaaliduna waa iyada tiraahda: Fiqi tolki kama janno tago.
[115] Waxaa ka mid ah axaadiista sheegaysa in muslimiintu aysan kala fadli badnayn iyo axaadiis kale oo uu ka mid yahay xadiiska oranaya "Addeeca xataa haddii madax la idiinka dhigo addoon Xabashi ah oo madaxiisu sabiib u eg yahay". Akhristow xadiiskaan qudhiisa shaki ma kaa galay.
[116] Saxaabada aad mooddo inaysan maqal xadiiskaan waxaa ka mid ah Cumar bin Khaddaad oo yiri: " Haddii uu noolaan lahaa Saalimkii mowlaha ahaa madax nimadaan u dooran lahaa."

Copyright © 2009 WardheerNews.com

khayrka, xumaanina ima taabateen." [al-Acraaf: 188] Caa'ishana(RC) iyada oo arrinkaan carrabka ku adkaynaysa waxay tiri: " Ciddii ku andacoota in Muxamed waxa maqan og-yahay, Alle si weyn bay ugu been-abuuratay.[117]"
Ibnu Khalduun oo axaadiistaan ka faalloonayaana wuxuu yiri: nebigu (SCW) wuxuu tixgeliyey awooddii iyo casabiyaddii Qureeshi ku lahayd carabta dhexdeeda sebenkaas. Ibnu Khalduunna wuxuu rumaysnaa in cidda wax xukumaysa –cidday doonto ha ahatee- looga baahan yahay in ay yeelato awood iyo casabiyad looga heybaysto[118]. Farqiga u dhexeeya fuqahada iyo Ibnu Khalduunna wuxuu yahay: fuqahadu waxay qabaan in loo baahan yahay in muslimiintu ay Qureeshta barakaystaan, laakiin si taa ka duwan Ibnu Khalduun waxay la tahay in halkaan aan looga baahnayn barakaysi, balse loo baahan yahay in la helo cid maaraysa loollanka bulshada. Loollanka bulshadana waxaa maarayn karta cidda leh awood ay bulshadu uga heybaysato, uguna soo istaagto. Ibnu Khalduunna wuxuu qabaa inuu dadka xukumo kan ugu seef dheer, waayo seefta dheeri waxay keenaysaa in dadku ka heybaystaan.

Sidaa darteedna, beesha Jareer-weyn hadday maanta Soomaalida dhexdeeda ku yeelato sumcad iyo awood la mid ah tii Qureeshtu ku lahayd carabta dhexdeeda sebenkii nebiga, waxay xaq u yeelanaysaa, waajibna ah in looga danbeeyo talada qaranka Soomaaliyeed iyo weliba in barbaarta beelaha ajidu aysan guursan karin gabdhaha Jareer-weyn, laakiin odayaasha Jareer-weyn waxaa u bannaan inay la baashaalaan gabdhaha ajida. Haddii khalad dhaco oo wiil aji ahi uu guursado gabar jareer-weyn ahna, gabadhaasi waxay xaq u leedahay in saacadda ay doonto ay shadaaftiisa dibedda ugu tuurto, iyada oo ku eedaynaysa inuusan geyaan u ahayn [kafaa'o la'aan darteed].
Si liddi ku ah fikradda Ibnu Khalduun, waxaa jira culumo rumaysan in xukunka loo dhiibo qof aan ka soo jeedin qoys ama beel awood badan leh, maxaa yeelay awoodda beeshu waxay hor-istaagaysaa in awood loo yeesho la xisaabtanka madaxa ummadda, oo lagu dirqiyo inay caddaalad ku dhaqaan shacabka. Sidaa darteedna, kooxdaani waxay qabaan in loo baahan yahay in xukunka loo dhiibo cid aan Qureesh ahayn[119]. Culumadaani waxay qabaan in haddii madaxnimada loo sharraxo labo nin oo mid Qureeshi yahay kan kalena Beeraale [al-Nabdhi) ay tahay in la doorto beeraalaha, waayo beeraaluhu waa ka tabar yahay Qureeshiga, sidaa awgeedna haddii uu khilaafo shareecada, muslimiintu waxay awood u yeelanayaan inay xukunka ka tuuraan[120]. Dhab ahaantiina, fikradda culumadaani waxay la mid tahay fikraddii Soomaalida ee ahayd: "Durbaankaaga waxaa loo dhiibtaa nimaad ka qaadan karto." Waxaana xusid mudan in firqada Khawaarijtu ugu horreeyeen cid diidda in madaxa muslimiinta Qureeshnimo shardi looga dhigo, waxayna qabeen fikrad ah in talada muslimiintu u siman yihiin, loona baahan yahay in loo dhiibo hadba ruuxa loo arko inuu ku habboon yahay, oo uu leeyahay karti iyo caddaalad uu ummadda ku hoggaamiyo. Ruuxaasi

[117] Al-Qurdhubi; al-Jaamic Li'axkaam al-Quraan (Daar al-Kutub al-Cilmiyah, Beyruut, 1996) juska , B.150.
[118] Cabdi-Raxmaan bin Muxamed bin Khalduun; Muqaddimat ibn Khalduun (Daar al-Kitaab al-Carabi, Beyruut- Lubnaan, 2006) BB. 188-190.
[119] Ashahristaani (Abuu Fatxi Muxamed bin Cabdi-Kariim); al-Milal Wa-Nixal (Taxqiiq Sayid Keylaani, Beyruut, Daar al-Macrifa, 1982) juska 1-aad, B.91.
[120] Isla isaga iyo isla bogga.

Copyright © 2009 WardheerNews.com

hadduu doono addoon Xabashi ah ha noqdee [Walow kaana cabdan Xabashiyan][121].

Yeelkadeede, mawduuca riddadu wuxuu safka hore uga jiraa mawduucyada loo adeegsado siyaasadaynta diinta. Maxaa yeelay qolo kasta oo doonaysa inay diinta wakiil ka noqoto waxay ku khasban tahay inay kooxaha kale oo dhan daaqadda ka tuurto, si ay iyadu fagaaraha ugu keliyeysato.
Tusaale ahaanna, firqooyinka kala duwan ee muslimiintu waxay leeyihiin muuqaal caqiido ama aydiyooloojiyadeed, laakiin dhab ahaantii waxay ka abuurmeen dano siyaasadeed oo ay kala matalayeen. Waxaana jira xaddiis labo si oo isku liddi ah nebiga looga wariyo, waxayna kala yihiin sidatan:
Nebigu (SCW) wuxuu yiri: " Ummaddaydu waxay u kala bixi doontaa toddobaatan iyo labo firqo [=kooxood] dhammaantoodna jannaday galayaan marka mid laga reebo." Ama nebigu wuxuu yiri: " Ummaddaydu waxay u qaybsami doontaa toddobaatan iyo labo kooxood, dhammaantoodna naartay galayaan marka mid laga reebo". Run ahaantiina waxaa jira culumada qaar rumaysan in riwaayadda hore ee xadiisku ay sax tahay[122], laakiin sidaas oo ay tahay marna ma maqalno riwaayaddaas, balse har iyo habeen waxaan maqalnaa tan danbe, sababta oo ah koox kasta oo ka mid ah firqooyinkaas faraha badan ee muslimiintu u qaybsameen waxay isu aragtaa in iyadu ay tahay tan badbaadaysa [= al-Firqa Annaajiya]. Tusaale ahaanna kooxdaan waxaa isku si u sheegtaa Ahlu Sunnada, Muctasilada, Khawaarijta, Shiicada, ….iwm. qolo walibana waxay ku andacootaa inay iyadu tahay tan Alle metesha ee loo baahan yahay in lagu wada dabo faylo.
Wadaad wiil uu dhalay waaniyey ayaa waxaa laga hayaa inuu yiri:
" Ka fagow sinada, xatooyada, iyo cabidda khamriga. Laakiin inaad Alle la kulanto adiga oo intaas oo dhan sameeyey ayaan ka jeclahay inaad la kulanto adigoo haysta afkaarta Camar bin Cubeyd iyo saaxiibadi[123]".
Maalin dhawayd waxaan dhagaystay waraysi laga qaaday labo wadaad oo ka kala tirsan garabyada isku haya siyaasadda Soomaaliya, labada wadaadna midba firqada kan kale wuxuu ku eedeeyey inay khawaarij yihiin [= kuwo diinta ka baxay][124].
Arrinkuna wuxuu u muuqday: Abeesadu intaysan kugu candhuufin baa lagu candhuufaa.

Guud ahaan, dowladaha diinta sheegtaa waxay ka siman yihiin caado ah in mucaaradka diinta laga saaro ka hor inta aan dhiiggooda la bannaysan. Sidaa awgeedna, taariikhda islaamka waxaan ku arkaynaan tobonnaan – haddiiba aysan gaarayn boqollaal ama kumanyaal- ka mid ah culumada islaamka oo dilkooda dowladdu u adeegsatay aaladda xeeshu ku dheehan tahay ee riddada. Culumada seefta riddadu galaafatay oo tiro badanna waxaa ka mid ah Shiikh caan ahaa oo la oran jirey Axmed bin Nasar al-Khusaaci (Dhintay 231 Ee Hijrada).

[121] Xilligaas carabtu afrikaanka ay taqiin waxay ahaayeen addoonta laga keeno Bariga Afrika, sidaa awgeedna erayga Xabashi wuxuu ula macne ahaa Afrikaan madow. Run ahaantiina, waa eray liidid iyo midab takoor muujinaya.
[122] Culumada sidaas qaba waxaa ka mid ah Cabdi-Mutacaali Asaciidii.
[123]
[124] Waxaa xusid mudan in labada wadaad aysan is ogayn oo mid walba goonnidiisa waraysiga looga qaaday. laakiin waxaa isku mid ah luqaddooda iyo aqoontooda.

Copyright © 2009 WardheerNews.com

Dowladdii Cabbaasida xilligii ay majaraha u hayeen al-Maamuun, al-Muctasim iyo al-Waatiq waxaa xoogaysatay firqada loo yaqaan Muctasilada, waxaana suuq heshay dooddii Muctasilada ee ahayd in quraanku makhluuq yahay iyo inaan Alle la arki karin. cid walba oo fikradaha muctasilada diiddana waxay mudatay ciqaab. Dadkii la ciqaabayna waxaa ka mid ahaa Axmed bin Xanbal iyo Axmed bin Nasar al-Khusaaci oo la sheegay inay Axmed bin Xanbal isku maqaam iyo fikrad ahaayeen, qisadiisana sidaan loo wariyey[125]:

Sannadkii 231 ee hijrada, maalin sabti ah oo bisha Ramadaan ay bilow tahay, ayaa Axmed bin Nasar al-Khusaaci waxaa la soo hor istaajiyey khaliifkii al-Waatiq, al-Waatiq-na durba wuxuu weydiiyey su'aasha ah: Maxaad ka leedahay quraanka? Wuxuu yiri: waa hadalka Alle. Wuxuu yiri: miyaa la abuuray?. Wuxuu yiri: isagu waa hadalka Alle. Wuxuu yiri: maalinta qiyaame rabbigaa ma arkaysaa?. Wuxuu yiri: sidaas baa la wariyey. Wuxuu yiri: war hooge ma waxaa loo arkayaa sida makhluuqa?. Wuxuu yiri: Allaa sidaas sheegay. Wuxuu yiri: war ma jir buu leeyahay, oo ma meel baa qaadi karta, oo ma il baa qaban karta? Anigu waa ku gaaloobay rabbiga sifadiisu sidaas tahay. Dabadeedna, wuxuu ku jeestay culumo golaha fadhiyey, oo wuxuu weydiiyey: maxaad ka leedihiin?. Culumadu illeen waa nafleeye, mid ka mid ahaa oo la oran jirey Cabdi-Raxmaan bin Isxaaq al-Qaadi baa wuxuu la soo booday: dhiiggiisu waa xalaal. Culumada intoodii badnaydna waa ku raaceen fatwadaas, dabadeedna shiikh la oran jirey Ibnu Abii Daa'uud, oo la sheegay inuu ahaa shiikha muctasilada[126] oo ka xun dilkiisa ayaa wuxuu yiri: Muuminiinta Amiirkoodow waxaa laga yaabaa inuu xanuunsan yahay ama maankiisa wax u dhimman yihiin, ee bal arrinkiisa dib ha loo dhigo, oo ha la toobad weydiiyo. Khaliifkiise wuxuu yiri: wuxuu iigu muuqdaa inuu yahay mid gaalnimo caddaystay, caqiidadiisana ku adkaysanaya. Dabadeedna, khaliifku wuxuu amray in loo keeno seef la oran jirey Asamaamah (waa seef la sheegay inuu lahaa Camar bin Macad Yakrib), wuxuuna yiri: kolkaan istaago yaan cidina ila istaagin, waayo waxaan rabaa inaan tillaabadayda ajar uga helo dilka gaalkaan caabudaya rabbiga aynaan annagu caabudayn, isla markaana aynaan aqoon sifooyinka uu ku sheegay. Wuxuuna dalbaday in la keeno wasakh-dhawr dhiiggiisa dhulka laga xijiyo, waana ku fariisiyey, wuxuuna amray in luqintiisa qumaati kor loogu taago, dabadeedna wuxuu u soo dhaqaaqay dhankiisa, wuxuuna ka duuliyey luqunta, wuxuuna amray in madaxiisa Baqdaad la geeyo, oo dhankeeda bari maalmo la suro, dhankeeda galbeedna maalmo kale, dhegtana waxaa loogu dhejiyey warqad lagu qoray: "Bismillaahi Raxmaan Raxiim: kani waa madaxa Axmed bin Nasar bin Maalik oo Cabdullaahi al-Imaam Haaruun al-Waatiq Billaahi Amiir al-

[125] Ibnu Katiir; al-Bidaaya Wa-Nihaaya, Juska 10-aad, BB. 316-320. Sidoo kale, Eeg: Al-Bagdaadi (Abuu Bakar Axmed Cali al-Khaddiib); Taariikh Bagdaad (juska 5-aad, BB.176-177), Ibnu Jawsi; Taariikh Ibnu Jawsi. Aqoon-yahannada qaarkood waxay rumaysan yihiin in khilaafka u dhexeeyey Axmed bin Nasar al-Khusaaci iyo al-Waatiq uu ahaa mid siyaasadeed, waxayna sheegaan in al-Khusaaci oo qudhiisu Cabbaasi ahaa ay dabada ka riixayeen culumada xaddiiska oo dhegta ugu sheegay inay boqornimo u dooranayaan haddii xukunku isbeddelo oo nimanka markaas talada hayey talada lagala wareego. Iyada oo kooban aqoon-yahannadaani waxay rumaysan yihiin in Al-Khusaaci iyo culumada xadiisku dan-wadaag ahaayeen.

[126] Ninkaani muddo dheer ayuu Qaadii-Qudaat ka ahaa dowladdii Cabbaasida, waase la isku khilaafay mowqifkiisa ku aaddan afkaarta Muctasilada.

Copyright © 2009 WardheerNews.com

Muuminiin uu ugu yeeray inuu qiro in quraanku makhluuq yahay iyo inuu diido in Alle wax loo e'kaysiiyo [Atashbiih], laakiin waxaan canaad ahayn wuu diiday, Allana naar buu u dadajiyey ...!!!". hadalkaas macnihiisu waa in khaliifku wadaadka ku xukumay gaalnimo, isla markaana uu gacantiisa ku dilay, dabadeedna uu naarta u diray, waxaadna mooddaa in khaliifku adduun iyo aakhiro labadaba uu isagu xukumo, oo sida qisada ka muuqata khaliifku Alle wax yarna uma dayn.

Madaxii Axmed bin Nasar-na maalmuu Baqdaad ku deldelnaa, jirkiisa intiisa kalena wuxuu yiil Magaalada Saamarraa, ilaa goor danbe la isugu keenay, oo la duugay. Xanaabiladuna [= culumada cilmiga xadiiska] waxay faafiyeen sheekooyin badan oo ku saabsan karaamaad la sheegay in lagu arkay shiikha, waxaana ka mid ah in muddadii madaxiisu uu surnaa Baqdaad uu si iskiis ah qiblada ugu jeesan jirey, raggii madaxa waardiyaha ka hayeyna waxay isku dayi jireen inay qiblada ka leexiyaan, laakiin markasta kacbada ayuu soo eegi jirey[127]. Waxaana lagu dooday in habeenkii la maqli jirey madaxa oo cod dheer ku akhrinaya suuradda Yaasiin[128]. Midkoodna wuxuu ku andacooday inuu go'aan ku gaaray inuu hubsado waxa ka jira arrinkaas, dabadeedna habeen buu waardiye ka qabtay madaxa, kolkii saantii iyo sawaxankii dhammaadeen, oo dadku seexdeenna wuxuu maqlay madaxa oo akhrinaya quraan ay ka mid ahayd aayadda oranaysa: " Dadku ma waxay u maleeyeen in looga tagi inay dhahaan waan rumaynay iyagoo aan la imtixaanin." [Al-Cankabuut: 2], arrinkaasina baqdin iyo jariiraco ayuu ku abuuray[129].

Si kastaba ha ahaatee, mid ka mid ah khulufadii ka danbeeyey al-Waatiq oo la oran jirey al-Mutawakil ayaa ku qancay dooddii Xanaabilada, arrinkaasina Xanaabilada wuxuu fursad u siiyey inay iyaguna markooda muctasilada raafka mariyaan, xaalna wuxuu noqday: " Ninba waa mare mus ma kula koray". Taa awgeedna, culumada xaddiisku Mutawakil waxay la simeen khaliifkii Abuu Bakar Asadiiq, waxayna yiraahdeen: " Abuu Bakar As-Saddiiq wuxuu la diriray kuwii riddoobay jeer ay ka yeeleen amarkiisii, … Mutawakil-na wuxuu tirtiray bidcadii wuxuuna muujiyey sunnada.[130]"
Aqoon-yahannadii wax ka qoray Al-Mutawakil waxay ku sheegeen inuu ahaa nin u go'ay "dhaantada iyo waraabidda biyo-kulaylka", iyo inuu ku takhasusay bikro-jebinta gabdhaha, waxayna sheegeen inuu lahaa in ka badan: " Afar kun oo gabdhood [=Siriyah] oo uu dhammaantood u galmooday[131]", taasoo jirta, haddana culumada sunnadu waxay Alle uga baryaan inuu ugu denbi dhaafo dagaalkii uu la galay kuwii qabay in quraanku yahay makhluuq darteed[132]. Waxayna u bixiyeen magaca "Sunno gargaare / Naasir As-Sunnah"[133].

[127] Al-Bagdaadi (Abuu Bakar Axmed Cali al-Khaddiib); Taariikh Bagdaad (juska 5-aad, B.208).
[128] Isla isaga; juska 5-aad, BB.178-179.
[129] Isla isaga, juska 5-aad, B. 179.
[130] Al-Bagdaadii; Taariikh Bagdaad, juska 7-aad, B.170.
[131] Asuyuudhi (Jalaalu-Diin Cabdi-Raxmaan); Taariikh al-Khulafaa (taxqiiq Maxamed Muxyadiin Cabdi-Xamiid, Seydaa-Beyruut, al-Maktabah al-Casriyah, 1997) B.396.
[132] Isla isaga, B.401.
[133] Sawirka culumada xadiisku ay ka bixiyeen al-Mutawakil ka eeg buugga: Taariikh Bagdaad; juska 7-aad, BB.170-172.

Copyright © 2009 WardheerNews.com

Si taa la mid ahna, boqorkii Maxamed al-Amiin oo xukunka uga danbeeyey aabbihiis Haaruun Ar-Rashiid, wuxuu ku caanbaxay ardaalnimo iyo siyaasad xumo, sidaas oo ay tahayse culumada xadiisku aad bay u mahadiyeen, waxayna sheegeen inay rajo ka qabaan in Eebbe u danbi dhaafo. Sababta ay sidaa u yeeleenna waxay ahayd iyaga oo u arkayey inuu uga hiilliyey muctasiladii loollanka ba'ani kala dhexeeyey. Axmed bin Xanbal oo ahaa ugaaska culumada xadiiskana[134] waxaa laga wariyey inuu yiri: "Ammiin waxaan Alle uga rajaynayaa inuu ugu denbi dhaafo wuxuu ku markaday Ismaaciil bin Culaya darteed.[135]".

Iyaga iyo ku Allahoode, waxay wariyeen in wadaad la oran jirey Abii Bakar bin Abii Sheyba oo akhrinta axaadiista ka bilaabay masjidkii Arrasaafa kolkii uu xukunka qabtay Mutawakil ka dib, xadiiskii ugu horreeyey ee uu akhriyey uu ahaa mid sheegaya in nebigu (SCW) uu yiri: " Ii ogaada Cabbaas waayo wuxuu ka haray aabbayaashay, ninka adeerkiisna wuxuu la mid yahay aabbihiis"[136]. Dhacdadaanna waxaa loo daliishadaa sida diintu ugu nugushahay in dano siyaasadeed lagu fushado.

Dhaha Jaabir al-Calwaanina buuggiisa cinwaankiisu yahay: " Laa Ikraaha Fii Diin [Diintu Khasab Ma Aha]" wuxuu ku xusay dhacdadaan:

Kolkii sannadkii 1963kii ay Bactiyiintu inqilaab kula wareegeen talada dalka Ciraaq, waxay damceen inay ka takhalusaan kawaadirtii iyo xubnihii xisbigii Shuuciga, oo ay u arkayeen inuu khatar ku yahay xukunkooda, dabadeedna maxkamad milatari ayaa waxay soo saartay bayaan ku caanbaxay bayaanka 13-aad, oo dhigaya in loo baahan yahay in la ciribtiro shuuciyiinta, iyada oo lagu eedaynayo inay diinta ka baxeen [= riddoobeen]. Fulinta xukunkaas oo galaafan lahaa nolosho kumanyaal ruuxna waxaa loo xilsaaray sarkaal la yiraahdo Cabdiqani Arraawi.

Cabdiqani oo ahaa sarkaal ka soo jeeda qoys wadaaddo ah, isla markaana jeclaa ku dhaqanka diintu, wuxuu istusay in si xukunka dilku u noqdo mid dadweynaha ka gadmi kara, loo baahan yahay inuu noqdo mid shareecada waafaqsan, sidaa darteedna waxaa loo baahday in la helo fatwo arrinkaas ku saabsan oo ay culumada diintu soo saaraan. wuxuuna go'aan ku gaaray in la helo fatwo ay soo saaraan afar wadaad [= 2 wadaad oo sunni ah iyo 2 shiico ah]. subaxdii xukunka la fulin lahaa habeenkeediina saddex wadaad baa waxaa laga qoray fatwo ay ku bannaynayaan dhiigga Shuuciyiinta. Laakiin wadaadkii afraad oo ahaa Dhaha Jaabir al-Calwaani qudhiisa ayaa Cabdi-Qani wuxuu ka dhaadhiciyey in ujeeddada loo xasuuqayo shuuciyiintu aysan ahayn mid diin loogu adeegayo, balse ay tahay mid dano siyaasadeed laga leeyahay, Bactiyiintuna ay damacsan yihiin inay marka hore ka takhalusaan Shuuciyiinta marka labaadna culumada diinta, arrinkuna uu la mid yahay sheekadii

[134] Waxay yiraahdeen: "Haddaad aragto nin reer Baqdaad ah oo jecel Axmed bin Xanbal ogow inuu sunnada jecel yahay, haddaad aragto inuu neceb yahay Axmed bin Muciinna ogow inuu beenaale yahay".
[135] Asiyuudi (Jalaalu-Diin Cabdi-Raxmaan); Taariikh al-Khulafaa (Taxqiiq Maxamed Muxiyadiin Cabdi-Xamiid, Seydaa-Beyruut, al-Maktaba al-Casriya, 1997) B.374.
[136] Al-Bagdaadi; Taariikh Bagdaad, juska 10-aad, B.68.

Copyright © 2009 WardheerNews.com

laga wariyey dibiga ee ahayd: " Waxaa la i cunay maalintii la cunay dibiga cad !!!"
Cabdiqani-na subaxdii la fulin lahaa dilka ayuu iska casilay xilkii loo dhiibay, arrinkaasina wuxuu dhabqiyey qorshihii lagu khaarijin lahaa Shuuciyiinta. In badan oo ka mid ah shuuciyiintii subaxdaas la warjeefi lahaana mar danbe waxay noqdeen wadaaddo cimaamado leh, oo masaajidda ka addima ama ka tujiya.

Dhab ahaantiina, doodda ku andacoota in muslimiintu aysan aqoon wax la mid ah maxkamadihii baaritaannada [Maxaakim Ataftiish/ Inquistion] ee Yurub ka dhacay waa mid xaqiiqada ka fog, muslimiinta iyo Yurubna kuma kala duwana jiritaanka maxkamadaha noocaas ah, haddii uu jiro farqi u dhexeeyaana waa mid heerka ah, ee ma aha mid nooca ah. tusaale ahaanna, khaliifkii Cabbaasiga ahaa ee Al-Mahdi [746-785] wuxuu sameeyey wasaarad loo bixiyey wasaaradda murtadiinta [Diiwaan Asanaadiqa], tiro badnida aqoon-yahannadii uu xasuuqay darteedna wuxuu kula baxay naanaysta ah " Kawaanlaha Murtadiinta/ Jasaar Asanaadiqa".
Sidoo kale, sheekooyinka argagaxa leh ee qoraalada taariikhda islaamka lagu xusay waxaa ka mid ah midda ka warramaysa sidii amiirkii Khaalid bin Cabdalla al-Qasri uu ku dilay aqoon-yahankii la oran jirey Jacad bin Dirham, waxayna leedahay sidatan: " Maalin ciid arrafo ah ayaa waxaa noo khudbeeyey Khaalid bin Cabdullaahi Al-Qasri, wuxuuna yiri: War dadow; noqda oo qasha udxiyadiina, Eebbe annaga iyo idinkaba ha innaga aqbalee, anigu waxaan ku udxiyaysanayaa Jacad bin Dirham-e, waayo wuxuu ku dooday in Alle uusan Nebi Ibraahim khaliil ka dhigan, Nebi Muusana uusan hadal la hadlin, Eebbe ha ka sarreeyo waxa Jacad ku sifeeyaye, dabadeedna intuu manbarkii ka degtay ayuu bireeyey.[137]"

Akhristow, taariikhda ninkaan taqwada badan waxaa ka mid ah:
- Inuu Saciid bin Jubeyr u dhiibay Xajaaj bin Yuusuf, oo sidaa lagu dilay.
- Inuu labo jeer faqihii weynaa ee Abuu Xaniifo gaalnimo ku eedeeyey, oo shiikha la weydiiyey inuu riddada ka towbad keeno (denbiga dhabta ah ee Abuu Xaniifa lagu eedaynayey wuxuu ahaa in uusan dowladda u dhego-nuglayn).
- Inuu hantidii muslimiinta hooyadi oo kirishtaan ahayd ugu dhisay kaniisad ay ku cibaadaysato.
- Muddadii uu guddoomiyaha ka ahaa gobolka Xijaas wuxuu soo saaray wareegto uu ku sheegayo in ciddii addeeci weyda khaliifka uu ku deldelayo xaramka dhexdiisa.
Sida la og yahayna shareecadu waxay xaaraamaysay in xuduudda xaramka lagu dilo xayawaanaadka, fuqahada islaamkuna waxay ka doodaan in abeesada iyo dabaqallooca lagu dili karo xaramka dhexdiisa.

Si kastaba ha ahaatee, waxaad mooddaa in culumada islaamku tan iyo waqti aad u fog ay ku baraarugsanaayeen xiriirka ka dhexeeya mawduuca riddada iyo siyaasadda, arrinkaasna waxaa laga dheehan karaa mowqifkii labo ka mid ah culumadii waaweynaa ee islaamka, oo kala ah: Al-Awsaaci iyo Sufyaan Al-Towri.

137

Copyright © 2009 WardheerNews.com

Nebiga (SCW) waxaa laga wariyey inuu yiri: " Dadka waxaa u khayr badan kuwa nool qarnigayga, dabadeedna kuwa ku xiga, dabadeedna kuwa ku xiga", nebiga waxaa kaloo laga wariyey : " Dunida kama harin waxaan ahayn balo iyo fitno". Axaadiistaas iyo kuwa la midka ahna culumada islaamku waxay ka qaateen in adduunyadu aysan wax faa'iido ah lahayn, ummadaha ku noolna midba tan ay ka danbayso ay ka shar badan tahay, kana khayr daran tahay, adduunyaduna gebi ahaanba ay gabaabsi tahay, isla markaana aan laga sugayn waxaan dhib iyo fidno ahayn.

Dhanka kale, nebigu (SCW) wuxuu yiri: " Khilaafadu gadaashay waxay jiraysaa soddon sano". Xadiiskaas iyo kuwo kale oo la macne ahna culumada islaamku waxay ka qaataan in "khulufada ama imaamyada dhabta ahi ay yihiin Abuu Bakar, Cumar, Cusmaan iyo Cali" ama inay ka kooban yihiin: " Abuu Bakar, Cumar, Cusmaan, Cali iyo Cumar bin Cabdul-Casiis". Saxaabigii Abuu Hureyrana wuxuu yiri: " Khilaafadu waxay ka jirtaa Madiino, boqortooyaduna Shaam". Culumada islaamkuna waxay sheegeen in nidaamka xukunku uu maro saddex marxaladood oo kala ah: " Nebinimo, khilaafo iyo boqortooyo". Marxaladda boqortooyadana waxaa lagu tilmaamay inay tahay mid qaniinyo kulul, oo la xalaashanayo cabidda khamriga, xirashada xariirta iyo galmada xaaraanta ah.

Dhanka kale, aayad quraanka ka mid ahi waxay leedahay: " Waxaad tihiin ummadda u kheyroon ee loo soo bixiyey dadka, waxaad fartaan wanaagga, waxaadna ka reebtaan xumaanta" [Aali-Cimraan: 110]. Nebiguna (SCW) isaga oo la hadlaya muslimiinta –siiba kuwa garashada iyo aqoonta leh- wuxuu yiri: "Midkiinna xumaan arkaa gacantiisa ha ku beddelo, haddii uu kari waayana carrabkiisa, haddii uu kari waayana qalbigiisa -ha ka naco- kaasaana iimaanka ugu liita." Culumada islaamkuna nusuustaas iyo kuwa la midka ah waxay kala baxeen qaacido oranaysa: " Malaa'igtu samaday waardiyeysaa, culumaduna dhulkay waardiyeeyaan[138]".

Haddaba, su'aasha meesha ku jirtaa waxay tahay: muxuu yahay mowqifka culumada islaamku ay ka qaadanayaan boqorrada qaniinyada kulul ee keli-taliska miiran ah, ee xalaashanaya xariirta iyo galmada xaaraanta ah?
Wadaaddada islaamku la dhaqanka boqorrada noocaan ah waxay ka istaageen saddex mowqif oo kala geddisan, waxayna kala yihiin:

Kow: qayb ka mid ah culumadu waxay simeen adeecidda madaxda siyaasadda iyo adeecidda Alle iyo Rasuulkiisa, waxayna si cad u doorteen inay adeecaan oo la shaqeeyaan madaxda samaan iyo xumaan kay doonaan ha yeeshaane. Culumada noocaan ahina waligood waxay ahaayeen inta badan culumada islaamka. Waxaana la oran karaa halkudhegga kooxdaani wuxuu ahaa: " Ruuxii madaxda dhayalsadaa adduunyadiisuu khasaaraa". Culumadaanna waxaan tusaale uga dhigan karnaa wadaad caan ahaa oo la oran jirey al-Awsaaci.

[138] Sufyaan Al-Towri ayaa laga hayaa inuu yiri: " Malaa'igtu samaday ilaalisa, culumada xadiiskuna dhulkay ilaaliyaan".

Copyright © 2009 WardheerNews.com

Abuu Camar Cabdu-Raxmaan bin Camar oo loo yaqaan al-Awsaaci wuxuu ku dhashay magaalada Dimishiq sannadkii 88 ee hijrada, wuxuuna ku dhintay magaalada Beyruut sannadkii 157 ee hijrada. Awsaaci oo ku noolaa dhulka loo yaqaan Shaam iyo afkaartiisii oo ku faaftay isla dhulkaasina waxay dhaliyeen in loo bixiyo magaca Faqiiha Shaam.
Dhulka Shaam taariikhda islaamka wuxuu caan ku yahay in dadkiisu dowladaha u dhego-nugul yihiin, oo mucaaradada ka soo baxdaa ay aad u yar tahay. Sidaa darteedna la yaab ma leh haddii aan aragno shiikh Awsaaci oo la shaqaysanaya dowladaha oo dhan, tusaale ahaan shiikhu wuxuu ka mid ahaa culumadii ka agdhawaa dowladdii Ummawiyiinta, laakiin markii ay dhacday dowladdii Ummawiyiintu ee ay timid dowladdii Cabbaasiyiintu isla markiiba wuxuu ka mid noqday culumada taageera dowladda.

Laakiin si taa ka duwan Ciraaq taariikhda islaamka wuxuu ahaa xarunta mucaaradka, waxaana ka soo baxay culumo ku dhiirrada inay soo bandhigaan afkaartooda. Culumadaasna waxaa tusaale u noqon kara Imaam Abuu Xaniifa. Abuu Xaniifa waxay isku casri ahaayeen Shiikh Awsaaci, oo wuxuu noolaa xilliyadii dowladihii Ummawiyiinta iyo Cabbaasida, labadubana waxay usoo bandhigeen, oo weliba ku cadaadiyeen inuu dowladahooda xilal sare ka qabto, sida xilka Qaadii Alqudaad, laakiin Abuu Xaniifa waa ku gacan sayray dowladahaas, wuxuuna ka doorbiday inuu u go'o faafinta afkaartiisa. Sidaa awgeedna, labada dowladoodba waa xireen, markii danbana waa dishey dowladdii Cabbaasida, marar badanna waxay ku eedeeyeen inuu diinta denbi ka galay iyo inuu gaalnimo ku dhacay.
Sidaa darteedna la yaab ma leh inaan ogaano in dhammaan wadaaddada madaxda ka agdhawi ay isku si u necbaayeen Abuu Xaniifa, wadaaddada colaadda xun u qabayna waxaa ka mid ah Awsaaci.

Awsaaci isaga oo isku dayaya inuu raalligeliyo madaxda ayuu cadaawo xun u qaaday Abuu Xaniifa, iskuna hawlay sidii uu dadka uga fogayn lahaa. Dhacdooyinka arrinkaas caddaynayana waxaa ka mid ah middaan Shiikhii Cabdullaahi bin Mubaarak uu ka wariyey Awsaaci qudhiisa.

Cabdullaahi Bin Mubaarak wuxuu yiri: " Waxaan imid Shaam, magaalada Beyruut-na waxaan kula kulmay Awsaaci, wuxuuna igu yiri: War Khuraasaaniyow [waa deegaanka cabdullaahi asal ahaan ka soo jeedo] waa kuma bidcoolahaan ka soo baxay magaalada Kuufa ee lagu naynaaso Abuu Xaniifa? Dabadeed waxaan ku noqday gurigaygii, waxaana soo qaatay qaar ka mid ah qoraalladii Abuu Xaniifa, waxaana ka soo saaray dhawr mas'alo oo wanaagsan [si fiican loo diyaariyey], hawshaasina saddex maalmood bay igu qaadatay, maaalintii saddexaadna aniga oo qoraalkii sita ayaan u imid Awsaaci oo ahaa mu'addinka iyo imaamka masjidka. Wuxuu yiri: kitaabkaan maxaa ku qoran? Dabadeedna waxaan u dhiibay qoraalkii, wuxuuna ka daalacday mas'alo ishiisu qabatay. Dabadeedna intuu kitaabkii jeebka gashtay ayuu salaaddii aqimay, oo dadkii tujiyey. Intaa ka dibna wuxuu la soo baxay buugii wuxuuna bilaabay inuu akhriyo ilaa uu ka dhammeeyey, dabadeedna wuxuu igu yiri: War Khurusaaniyow waa kuma Nucmaan Bin Taabit-kaani? Waxaan ku iri: waa shiikh aan ciraaq kula kulmay. Markaasuu

Copyright © 2009 WardheerNews.com

wuxuu igu yiri: kani wuxuu ku jiraa culumada kuwa ugu wanaagsan, ee orod u tag oo wax ka kororso [wax ka baro]. Waxaan ku iri: kani waa Abuu Xaniifaha aad dadka ka celisid [aad dadka uga digtid]".
Awsaaci inkasta oo uu akhriyey afkaartii Abuu Xaniifa, uuna qiray qiimahooda, haddana marna wax iskama beddelin mawqifkii uu ka taagnaa Abuu Xaniifa, waayo cadaawada uu u hayey wadaadku ma ahayn mid ku wajahan afkaarta shiikha, balse waxay ku salaysnayd sida dowladdu u arkaysey afkaarta iyo mawaaqifta Abuu Xaniifa.

Labo: kooxda labaadna waxay qaateen mawqif ah in madaxda laga dheeraado, oo aan lagu dagmin dhaldhalaalka agtooda ka muuqda. Waxayna qabeen in marka qura ee ay bannaan tahay in madaxda loo tagaa ay tahay marka xaqa la farayo. Halhayska kooxdaanna waxaa ka mid ah: " Mar walba oo aad adduunyada madaxda weel ka darsato, iyaguna aakhiradaaday weel ka darsadaan." "Ruuxu intuu boqorrada u dhawaado ayuu Alle ka dheeraadaa." Xasan al-Basrina waxaa laga wariyey inuu oran jirey: " Ha u tegin amiirka xataa haddii uu kuugu yeero inaad u akhriso suurad quraan ah." Sufyaan Atowrina wuxuu oran jirey: " Jahannamo waxaa ku yaal tog ay degaan culumada boqorrada booqda oo qur ahi." Wuxuu kaloo oran jirey: " Haddaad doonayso inaad badbaaddo suldaan ha u tegin, qof dhintayna ha ka xajin." Waxaadna mooddaa in kooxdaani ka duulayeen xadiiska oranaya: " Jihaad waxaa ugu fadli badan eray run ah oo suldaan jowr badan [dulmi badan] hortiisa laga yiraahdo.[139]"

Mowqifka culumadaani waa mid naxasuusinaya qiso la sheegay inay dhexmartay Cusmaan bin Cafaan (RC) iyo saxaabigii kale ee la oran jirey Abuu Dar al-Gafaari (RC). Waxaa la sheegay in Cusmaan damcay inuu helo taageerada saxaabigaan, taa awgeedna wuxuu lacag u dhiibey addoon uu lahaa, wuxuuna ku yiri lacagtaan u gee Abuu Dar, haddii uu kaa qaatana waa ku xoraynayaa. Addoonkiina lacagtii ayuu Abuu Dar u geeyey, laakiin Abuu Dar waa ka diiday, addoonkiina isaga oo ku calaacalaya ayuu wuxuu ku yiri: guddoomiddeeda waxaa ku xiran xorriyaddayda, Abuu Darna wuxuu ugu jawaabay : " Laakiin qaadashadeedu anigay addoon iga dhigaysaa !!!"

Culumada mowqifkaan qaatay waxaa ka mid ahaa Abuu Xaniifa, Sufyaan Atowri, cabdullaahi bin Mubaarak iyo kuwo kale oo badan. Tusaale ahaan Sufyaan al-Towri (97- 161) wuxuu ka mid ahaa culumada aamminsan in cilmigu ka madaxbannaanaado siyaasadda iyo ku danaysiga, waxaana laga wariyey inuu oran jirey: "Dhaqanka xumi waa cudur, culumaduna waa dawo, ee haddii daawadu xumaato maxaa cudurka lagu daaweynayaa?" . Wuxuu kaloo oran jirey: "culumadu waa cusbada baladka ee haddii cusbadu xumaato sidee loo hagaajiyaa". Waxaa kaloo laga hayaa inuu oran jirey: " Ruuxii u qosla daalimka ama hanti ka qaataa

[139] Xadiiskaan inkasta oo sanadkiisa lagu sheego inuu saxiix yahay, laakiin wuxuu u muuqaa inuu ka mid yahay axaadiista gadaal danbe laga allifey. Waxaana la qiyaasayaa in la allifey wixii ka danbeeyey kolkii ay abuurmeen xisbiyada mucaaradka ahi.

Copyright © 2009 WardheerNews.com

wuxuu burburiyey tiirarka islaamka". Waxaa kaloo la wariyey inuu khaliifkii Cabbaasida ee Al-Mahdi uu ku yiri: " Cidna ha ii soo dirin jeer aan anigu kaaga imaado, waxna ha I siin jeer aan kaa weydiisto".

Madaxdii dowladduna Sufyaan Atowri waxay ku xukumeen inuu yahay sindiiq diinta ka baxay, oo dhiiggiisu xalaal yahay, taa awgeedna Sufyaan noloshiisii oo dhan wuxuu ku dhamaystay isaga oo wareegaya daafaha dunida islaamka oo ka cararaya madaxdii dowladihii islaamka, ama isaga oo ku jira qolqol uu kaga dhuumanayo madaxdaas. Ugu danbayntiina wuxuu goor habeen ah ku geeriyoodey guri ku yiil magaalada Basra oo lagu qarinayey.

Sheekooyinka bidhaaminaya mawaaqifta ay kooxda 1-aad [= Awsaaci iyo saaxiibadi] iyo tan 2-aad [= Sufyaan Atowri iyo saaxiibadi] ay ka kala taagnaayeen la dhaqanka siyaasiyiintana waxaa ka mid ah sheekadaan uu wariyey wadaad la oran jirey Mufadal Bin Muhalhal, oo yiri sidatan:

Mufadal bin Muhalhal wuxuu yiri: " Waxaan xajka isu raacnay Sufyaan al-Towri, kolkii aan Maka gaarnayna waxaan is-helnay al-Awsaaci, maalin maalmaha ka mid ahna waxaan ku kulanay gurigii aan degnay, sannadkaasna xajka waxaa madax ka ahaa Cabdu-Samad bin Cali al-Haashimi [104- 185] oo adeer u ahaa khaliifkii al-Mansuur, isla markaana guddoomiye uga ahaaXijaas.

Iriddaa la soo garaacay, waxaan niri waa kuma? Wuxuu yiri: Waa Amiirka, durbadiibana waxaa istaagay al-Towri oo galay qolqol danbe, dabadeedna waxaa istaagay al-Awsaaci oo Amiirkii iridda ka furay. Cabdu-Samadna wuxuu ku yiri: Waa kuma Shiikhu? Wuxuu yiri: waxaan ahay Abuu Camar al-Awsaaci, wuxuu yiri: waad salaaman tahay, miyaan warqadahaagu noo imaan jirin, oo aanan danahaaga kuu fulin jirin, muxuu sameeyey Sufyaan Atowri? Wuxuu yiri: qolqolkuu galay, dabadeedna Awsaaci wuxuu galay qolqolkii Sufyaan ku jirey, wuxuuna ku yiri: ninkaani adiguu ku raadinayaa. Dabadeedna waxaa soo baxay Sufyaan Atowri oo wajigiisa caro ka muuqato, wuxuuna yiri: Asalaamu Caleykum, sidee tihiin? Cabdu-Samadna wuxuu yiri: Abuu Cabdullaahiyow waxaan kuugu imid inaan masaa'ishaan kaa qoro [= masaa'il ku saabsan xajka]. Sufyaanna wuxuu ugu jawaabay: ma kuu sheegaa wax taas kaaga kheyr badan, wuxuu yiri: oo waa maxay? Wuxuu yiri: waa hawlaha aad ku jirto oo aad faraha ka qaaddo, wuxuu yiri: oo sidee baan ka yeelayaa Abuu Jacfar [= khaliifka]? Wuxuu yiri: Haddaad Alle doorato, Alle Abuu Jacfar waa kaaga filan yahay.

Kolkii Cabdi-Samad tegayna Awsaaci wuxuu Sufyaan ku yiri: Abuu Cabdullaahiyow kuwaani waa Qureesh, kumana qancayaan waxaan ka ahayn inaan weynayno, wuxuu yiri: Abuu Camarow ma awoodno inaan garaacno, laakiin waxaan awoodnaa inaan u edbinno sidaad hadda arkaysey oo kale.
Mufadalna wuxuu yiri: dabadeedna Awsaaci dhankayga ayuu soo eegay, wuxuuna igu yiri: war meesha naga kici, waxay u badan tahay in kaasi [=guddoomiyuhu] soo diro cid luqunta xarig noo surta [nala daldalo], waxaana ii muuqata in kani [= Sufyaan al=Towri] uusan taa dan iyo heello ka lahayne".

Copyright © 2009 WardheerNews.com

Saddex: mowqifka kooxda saddexaad wuxuu u dhexeeyaa mawqifka labada kooxood ee hore, waxayna ku tageen in loo baahan yahay in madaxda wanaagga la faro, xumahana laga reebo iyada oo isla markaa la iska ilaalinayo duufsiga madaxda, oo aan lagu kadsoomin macmacaanka adduunyadooda..

Dhanka kale, kolka si qotodheer loo eego mawqifka culumada kala duwani ay iska taageen mawduuca riddada, waxaa la ogaanayaa in mawqifka wadaad walba uu caadi ahaan ka tarjumayo mawqifkii uu ka taagnaa xiriirka lala yeelanayo siyaasiyiinta [= madaxda dowladda], oo caadi ahaan wadaaddada u dhaw madaxdu si weyn bay u taageeraan adeegsiga xadka riddada, laakiiin si taa ka duwan culumada mucaaradka ahi aalaaba ma taageeraan mawduuca riddada.
Tusaale ahaanna, aqoon-yahannada qaarkood waxay rumaysan yihiin in xadiiska ka hadla saddexda arrimood ee dilka keena - ee aan kor ku soo xusnay- uu yahay xadiis la allifey sebenkii dowladdii Cabbaasida, uuna allifey shiikh Cabdu-Raxmaan bin Cammar al-Awsaaci, danta uu ka lahaana ay ahayd inuu ku raalli geliyo madaxdii dowladdii Cabbaasida.

Isku soo duuboo, Eebbe islaamka wuxuu u doortay inuu noqdo diin, laakiin dad baa damcay inay ka dhigaan siyaasad. Dadkaasina waa kuwa had iyo jeer seefta riddada ku haddada kuwa ay arigtida iyo afkaarta ku kala duwan yihiin.

11- Kibirka Waa Lagu Kufaa:

Sheekaa waxay leedahay sidatan: labo nin oo mid Maraykan yahay kan kalena Jabbaan ayaa waxay u baxeen si ay u soo booqdaan qubuuraha dad ay ehelo ahaayeen. Kolkii qabriyadii ay tageenna ninkii Maraykanka ahaa wuxuu qabrigii ruuxii ay ehelka ahaayeen dul saaray xirmo ubax ah, kii Jabbaanka ahaana qabrigii eheladiisa wuxuu dul saaray xantoobo bariid ah, dabadeedna kii Maraykanka ahaa oo yaabban ayaa si kajan ah wuxuu kii Jabbaanka ahaa u waydiiyey su'aasha ah: "ruuxa aad qaraabada tihiin goormuu soo toosayaa si uu u cuno bariidka?", Jabbaankiina wuxuu si fudud ugu jawaabay: " Kolka saaxiibkaa u soo tooso si uu u ursado carafta ubaxa?"

Farriinta sheekadu tebinaysaa waa in ubaxa iyo bariidku ay yihiin astaan. Waa astaan lagu muujinayo muxubada iyo qaddarinta loo hayo ruuxa dhintay. Bariidka iyo ubaxa midkoodna ma leh qiimo isaga u gaar ah, haddii aysan wehelin dareenka ay muujinayaan oo ah mid bulshadu siisay. Si taa la mid ahna, diimuhu ma laha qiimo iskii u muuqda oo lagu garto xaq iyo baadil kan ay yihiin, ee hadba waa sida qofka iyo bulshadu u aragto. Oo diin waliba dadka rumaysan waxay ugu muuqataa xaq muqaddas ah, oo aan loo baahnayn in sina shaki iyo muran loo galiyo. Laakiin, isla diintaasi kuwa aan rumaysnayn waxay ugu muuqanaysaa waalli iyo doqonnimo isbiirsaday, oo loo baahan yahay in ruuxa garaadka lihi iskala weynaado. Tusaale ahaan, ruuxa muslimka ahi wuxuu yaab iyo ashqaraar u dhintaa kolka uu arko Jabbaan samaynaya tiknooloojiyada casriga ah tii ugu danbaysey, oo si silloon –waa sida caamadu u arkaane- ugu sujuudaya cad dhagax ah. Si taa liddi ku ahse isla Jabbaankaasi wuxuu yaab iyo amakaag u dhimanayaa markuu arko muslim salaad

Copyright © 2009 WardheerNews.com

tukanaya ama labo qayd qaba oo kacbada dawaafaya. Mowqifkaasina waa mid naxasuusinayaa maahmaahda Soomaaliga ah ee tiraahda: " Maan dad waa mudacyo afkood".

Sida la og yahayna, diinta waa loo dhashaa ee lama qaato, oo caadi ahaan qofku ma qaato diin uu ku qancay markuu baaray ka dib, balse wuxuu qaataa diintii uu ka soo gaaray waaridki iyo bulshada uu la nool yahay, xaqa iyo baadilkana wuxuu u yaqaan hadba sidii aabbihiis iyo deriskiisu ugu sheegeen ama ku soo ababiyeen, oo xaal wuxuu isugu biyo shubtaa " **Innaa wajadnaa aabaa'anaa …../ Aabbayaalkeen baaan ka soo gaarnay**" iyo "Caado laga tagaa caro Allay leedahay", taa awgeedna, waxaan aragnaa barafisoor Hindi ah oo si taqwo iyo khushuuc badan u caabudaya sac, isaga oo aan marna isweydiin halka sacu qiimahaas ka keenay. Si taa la mid ah, Soomaaliga geel jiraha ah ee aan wax akhrin waxna qorin, ee ay dhici karto in uusan salaad iyo soon toona aqoon, islaamka wuxuu u haystaa walax mucjiso ah, oo aan marna muqaddisnimadiisa laga hadli karin[140]. Farqiga qura ee u dhexeeya barafisoorka iyo geel-jiruhuna waa in midkood ku dhashay Hindiya, ayna dhaleen waalidiin Hinduus ahi, halka kan kale ku dhashay Soomaaliya, ayna dhaleen waalidiin Muslim ahi.

Akhristow bal isweydii diintaadu waxay noqon lahayd haddii aad ku dhalan lahayd Mumbey, ama Tookiyo, ama Moosko, ama Rooma, Ama Tal-Abiib, waalidkaana asal ahaan ka soo jeedi lahaa ummadaha dhulalkaas degga. Sidoo kalena aan isweydiinno waxay noqon lahayd diinta wadaaddada diimaha kala duwan haddii qolo kastaa ka soo jeedi lahayd dhul aan ahayn midka qadartu ku abuurtay. Tusaale ahaan, soo ma dhici kari lahayn in wadaaddada buudigu yahuud noqdaan, kuwa yahuudduna masiixi, masiixiguna muslim, muslimkuna diintii kale ee la doono, cawaantuna muslimiin muwaxidiin ah. Run ahaantiina, waa dhif iyo naadir in dunida laga helo ruux haysta diin uu qaatay ka dib markii uu ku qancay xaq nimadeeda.
Ummadaha kala aamminsan diimaha iyo dhaqamada kala duwanina waxay nabad iyo xasillooni ku wada noolaan karaan haddii qolo kastaa qaddariso diinta iyo dhaqanka qolada kale. Dhibka iyo isku dhacanu waxay imaanayaan marka qolo tiraahdo annagaa saxsan inta kalena waa khaldan yihiin, annagaa ilbax ah inta kalena waa cawaan, annagaa Eebbe na doortay inta kalena ibliis baa durbaan u tuma, annagaa xaqa haysanna inta kalena waa baadil, annagaa jannada galayna inta kalena naartaa loo dareerinayaa, , , , .
Qof walba iyo ummad kastaa waxay xaq u leeyihiin inay diintooda iyo dhaqankooda u arkaan kuwa xaqa ah, laakiin isla markaa waxaa waajib ku ah inay ixtiraam iyo qaddarin u muujiyaan diimaha iyo dhaqamada kale. Qofna kuma khasbana inuu rumeeyo diin iyo dhaqan uusan rabin, laakiin qof waliba wuxuu ku khasban yahay inuu tixgeliyo dhammaan diimaha iyo dhaqamada ummadaha kala duwan. Waxaa cid kasta u bannaan inay isla weynaato, laakiin waxaa cid walba ka reebban dhayalsiga dhaxalka ummadaha kale.

[140] Siyaasigii Masaarida ahaa ee Mustafe Naxaas wuxuu buuggiisa xusuus qorka ah ku sheegay inuu hoggaamiyihii muslimiinta Hindiya ee Maxamed Cali Janaax uu mar kula taliyey si aan Ingiriisku u kala jarjarin dalweynaha Hindiya waxaa habboon inaad Nehro la heshiiso, laakiin Janaax wuxuu ugu jawaabay: " Ma awoodo inaan la heshiiyo Nehro, waayo Hinduustu waxay caabudaan lo'da, waxayna barakaystaan dhiriqdeeda, annaguna inta gawracno ayaan hilibkeeda cunnaa !!"

Copyright © 2009 WardheerNews.com

Sidaa darteedna, islaamku muslimiinta wuxuu ka reebay in ay wax cay ama aflaggaaddo ah u geystaan diimaha dadyowga kale, oo tusaale ahaan quraanku wuxuu muslimiinta ku leeyahay: " Ha caayina waxay caabudayaan Eebbe sokodiis, oo ay markaas iyana aflaggaadeyn Eebbe cadownimo iyo cilmi la'aan, sidaasaan ummad kasta ugu qurxinay camalkeeda." [Al-Ancaam: 108].
Su'aasha loo baahan yahay in qof walba oo muslim ahi isweydiiyaana waxay tahay: maanta hab dhaqanka muslimiintu ma ka tarjumayaa macnaha aayaddaas mise maya?

Abbaaraha, dhammaan dalalka adduunka, siiba kuwa reer galbeedka marka lagu daro Faatikaanka waxaa ku yaal masaajid waaweyn iyo mawlacyo muslimiintu ku cibaadaystaan, islaamkana ku bartaan. In badan oo ka mid ah masaajiddaas iyo mawlacyadaasna waxaa lagu aflagaaddeeyaa siyaasadaha iyo dhaqamada ummadaha dalalkaas ku dhaqan. Su'aasha isweydiinta u baahnina waxay tahay: dunida islaamka ma ka jirtaa dowlad qura oo fursad noocaas oo kale ah siisa diimaha kale.
Jaamacadaha dalalka Biritan, Faransiiska, Jarmalka, Talyaaniga, Isbaanishka, Ruushka, Maraykanka, Kanada, Ostaraaliya, Jabbaan, Shiinaha, Hindiya, iyo kuwo kale oo badani waxay leeyihiin qaybo lagu dhigo diinta islaamka [= shareecada, taariikhda iyo ilbaxnimada islaamka) iyo xarumo lagu baaro laamaha kala duwan ee aqoonta islaamka. qaybahaas iyo xarumahaas cilmibaariddana waxaa ka hawl-gala aqoon-yahanno muslimiin ah, sannad walbana waxaa cilmi-baarid iyo inay duruus ka bixiyaan u taga boqollaal kale.

Su'aasha ay tahay in muslim waliba isweydiiyaana waxay tahay: dunida islaamka ma ka jiraan jaamacado lagu dhigo diin aan islaamka ahayn, muslimiintuse ma oggolaan karaan in aqoon-yahanno aan muslim ahayni ay jaamacadaha dunida islaamka ka dhigaan maaddada diinta, gaar ahaan diinta islaamka. Jaamacadaha dunida islaamkuse diyaar ma u yihiin inay miisaaniyad gaar ah u qoondeeyaan barashada iyo baaridda diimaha Buudiga, Hinduusiga, Yuhuudiyadda, Kirishtanka, …iwm.
Muslimiinta ku dhaqan dalalka reer galbeedku waxay xaq u leeyihiin inay samaystaan ururro iyo jamciyado, inay yeeshaan qalab warbaahineed, inay faafiyaan oo daabacaan qoraallada ku saabsan diinta islaamka sida: kitaabka quraanka, kutubta tafsiirka, xadiiska, siirada … iwm., inay helaan hilib xalaal ah, inay furtaan bangiyo islaam ah, iyo arrimo kale oo badan oo ka tarjumaya diintooda iyo dhaqamadooda. Haddaba, aan isweydiinnee dadyowga diimaha kale haysta ee ku dhaqan dunida islaamku ma heli karaan xuquuq taas la mid ah.

Haddaba, miyaan loo baahnayn in muslimiintu is-garwaaqsadaan, oo fahmaan xikmadda ku jirta maahmaahda Soomaaliyeed ee tiraahda: "Gaalka dil gartiisana sii !!". Miyaan la gaarin waqtigii diinta loo arki lahaa inay tahay xaq ka mid ah xuquuqda aadanaha, oo qof walba faraha looga qaadi lahaa inuu qaato diinta uu doono, Ilaahiisna si xor ah u caabudo, haddii uusan ku xad gudbayn qaanuunka, isla markaana wax u dhimayn amniga iyo anshaxa guud.

Waxaa la wariyey in nin Kirishtaani ahi uu u yimid halyeygii Hindiga ahaa ee Mahatmaa Gaandi isaga oo weydiinaya su'aasha ah: ii sheeg sidaan ku qaadan karo diinta Hinduusiga. Gaandina ninkii wuxuu ku yiri: "Waxba hinduusi ha noqon, laakiin noqo kirishtaan suubban!". Waxayna u muuqataa, in haddii qofka

Copyright © 2009 WardheerNews.com

Mahaatma Gaandi u tagey uu noqon lahaa buudi, ama yahuudi, ama muslim, ama diintii kale ee la doono, in jawaabta Gaandi noqon lahayd hayso diintaada, laakiin noqo muumin wanaagsan. Diimuhu waa kala magac iyo muuqaal duwan yihiin, laakiin nuxurkoodu waa isu dhow yahay, waana in ruuxu xaq dhawro dhammaan noolaha kale, isaga oo garwaaqsanaya in dhammaantood uu uumay Rabbi keli ahi, ayna jirto xikmad loo uumay. Waana in la ogaado "in murtadku uusan ahayn kan dabka ku gubta, balse murtadku uu yahay kan dabka huriya[141]".

12- Gunaanad:

Isku soo duuboo, Islaamku riddada wuxuu u arkaa dhaqan xun oo caro Alle iyo ciqaab aakhiro lagu galabsanayo, laakiin marna ma jideyn ciqaab aadane oo murtadku adduunyada ku mutaysanayo. Muslimiintuna waa in ay ogaadaan in maanta la joogo xilligii naqdinta iyo kala hufidda lagu samayn lahaa fikradihii laga dhaxlay culumadii Islaamka ee noolaa qarniyadii dhexe, oo laga tuuri lahaa wixii aan aasaas xooggan ku qotomin, isla markaana aan la jaanqaadi karin baahida bulshada qarniga 21-aad. Inkasta oo anqaasta culumadu ay ka fadli badan karto dhiigga shuhadada, haddana marna anqaastu ma aha waxyi Eebbe oo aan la beddeli karin. Waana in mar walba xisaabta lagu darsado in Eebbe nebi Muxamed (SCW) u soo diray si uu naxariis ugu noqdo caalamiinta, laakiin uusan u soo dirin si uu u warjeefo caalamiinta. Eebbana wuxuu yiri: " **Ciddii disha naf aan naf (dilin) ama fasaadin dhulka wuxuu la mid yahay inuu dilay dadkoo dhan, ciddii naf nooleeyana wuxuu la mid yahay isagoo dadkoo dhan nooleeyey" [Al-Maa'idah: 32].** Nebiguna (SCW) wuxuu noo-sheegay in muslimiinta uu ugu wanaagsan yahay **"kan dadku** [muslim iyo gaalaba] **ay ka nabad galaan afkiisa iyo addinkiisa**", wuxuu kaloo noosheegay in diintu tahay akhlaaq wanaag "**Addiinu xusnu al-khuluq"**.

Eebbow na solansii !!!

Saciid A. Ismaaciil
Sismail42@gmail.com

[141] Sidaa waxaa nagu baraarujiyey W. Shakespeer.

Copyright © 2009 WardheerNews.com

We welcome the submission of all articles for possible publication on WardheerNews.com
So please email your article today Opinions expressed in this article are those of the author
and do not necessarily reflect the views of WardheerNews
Maqaalkani wuxuu ka turjumayaa aragtida Qoraaga loomana fasiran karo tan WardheerNews.

_____

Copyright © 2009 WardheerNews.com

==========